
# DALKII UDGOONAA

*"The Land of Spices"*



**Qore: Axmed Cartan Xaange**

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

AKADEEMIYADA CILMIGA
IYO FANKA

# DALKII UDGOONAA

# *"The Land of Spices"*

**Qore: Axmed Cartan Xaange**

*MUQDISHO 1984*

# ARAR

Wixii qiime iyo raandhiis leh way raagaan oo dhaxalgal bay noqdaan; wixii aan qiime lahaynse ma waaraan oo dhaqso bay uga baaba'aan xusuusta iyo waayaha dadka. Da' walba dhaxal bay u dhaaftaa midda ka dambeysa, dhaqanka wacan iyo aqoonta ayaa ugu qiime weyn waxa dadku kala dhaxlaan. Farsamada bulshadu waa biladaye muujinaya inta ay le'eg tahay garaadka iyo ilbaxnimadoodu, iyo hadba heerka ay joogtay ilbaxnimadaasi intii ay soo jireen dadka kasbay.

Nolosha dadka waxaa saldhig u ah hantida dhaqaale ee taal dhulkooda, taariikhdoodana waxaa laga dayaa abuurta dhulkooda: dhirtiisa, dhagaxiisa, webiyadiisa, buurihiisa, badahiisa iyo nafleyda ku dul nool oo idil baa sheega waayaha dalkaas. Afkooda, asluubtooda iyo oonta ay ku nool yihiinna way muujisaa ilbaxnimada iyo dhaqanka dadka.

Taariikhda ama waayaha ilbaxnimada Soomaaliyeed in badan baa weli u baahan in daaha laga rogo. «DHULKII UDGOONAA» in Geeska Afrika, ee haatan Soomaalidu deggan yihiin, adduunkii hore u yiqiin baynu ognahay. Maxaa dalkaas loogu bixiyey magacaas, maxaa udgoonaysiiyey dalkaas? Jawaab saxan uma hayno weydiintaas; goobid ballaaran baa loo baahan yahay si bal loo helo jawaab aan runta ka durugsanayn.

Sida la ogyahay, Soomaaliya waxay ku fadhidaa dal kumanguurooyin marin u ahaa, haddana u ah, xiriirka ganacsiga iyo dhaqan ee ka dhexeeyey qaaradaha Yurub, Aasiya iyo Afrika. Doorkaas isku-xiriirinta adduunka waxay Soomaaliya ku mutaysatay waa Badweynta Indiya iyo Badda Guduudan ee ku heeran, kuwaas oo ah halbawleyaalka isgaarsiinta qaaradahaas. Soomaaliya, haddaba, waa qaran badeed, ilbaxnimo iyo horukaca dal kastana aalaaba wuxuu ka fufaa magaalooyinka ku yaal xeebaha iyo agagaarkooda; sababta oo ah xiriirka ganacsi iyo dhaqan ee magaalooyinkaasi toos ula yeeshaan adduun-weynaha.

Badeecadda Soomaaliyadii hore, ama «Dalkii EEBBE», caan ku ahayd ee dibedda u dhoofin jirtay waxaa ugu qiime weynaa Xijiga. Waa laga joogo in ka badan saddex kun iyo afar boqol oo sano «Dalkii Eebbe» oo keli ah baa laga heli jirey xijiga ugu fiican.

Goobidda taariikhda xijiga Soomaaliya iyo sidii uu geedkaas qiimaha weyni u saameeyey ilbaxnimo iyo dhaqamo badan ee adduun weynaha hawl weyn iyo waqti dheer bay u baahan tahay; sidaas awgeed, kuma dheeraan karno arrintaas markan. Inkastaba, waxay nala tahay maragma-doonto in magaca «DHULKII UDGOONAA »asalkiisu ka yimid geedka Xijiga. Malahaas baana u sabab ah faallayadan gaaban ee arrintaas ku saabsan; iyo weliba ujeddada aannu ka leenahay hawshan oo idil.

Waxaa kale oo jira waxyaalo qiime weyn leh oo aan weli dhaxal guurin, ee farsamadii Soomaaliyeed ee asiiliga ahayd, iyo heerka sare ee farshaxanka ay gaareen, ka marag ah. Waxyaalahaas waxaa ka mid ah Dhirta aan ahayn Xijiga ee iyaguna taariikhda iyo waxtarka weyn u leh nolosha dadweynaha Soomaaliyeed, siiba reer-miyiga ee la bidayo in ay yihiin gundhigga taariikhda iyo dhaqankooda. Waxa kale oo dhirtaas ku dheehan murtidii iyo suugaantii dadka Soomaaliyeed kasbeen kuman-guurooyin tegey, oo noqday hanti waarta. Meel kasta oo ay ku duugan tahay hantidaas in laga soo qodo ee la soo nooleeyo baa habboon haatan. Dhirtaas kuwo ka mid ah baannu tusaale-ahaan si kooban ugaga faalloonaynaa; maxaa wacay lama wada koobi karo tiradooda iyo waxtarkooda.

Gaadiidka badda ee Soomaaliyadii hore, iyo midda cusubiba, wuxuu waayo badan ku koobnaa doonyaha shiraaca leh ee u dabaylo-raaca berri-carab, Indiya, Sawaaxil iyo dalal kale. Ilbaxnimada, dhaqanka iyo badeecadda Soomaaliyeed qarniyo badan waxaa si ballaaran u fidiyey badmaaxyada Soomaaliyeed, siiba kuwa dega gobollada Bari ee ku sii jeeda berri-carab iyo Indiya. Faallo kooban baannu ka bixin doonaa arrintaasna, iyo weliba kheyraadka badaha Soomaaliyeed.

Erayada qalaad ee shaqada Xijiga galay waa raad inoo geyn kara taariikhdii hore ee «DHULKII UDGOONAA». Erayadaasi afaf badan oo kala duwan bay ka soo jedeen, waxayna muujinayaan sida dhaqamo iyo suugaan shisheeye u saameeyeen taariikhda iyo dhaqanka geeska afrika kuman-guurooyinkii la soo dhaafay. Sida ay nala tahay, erayadaas shisheeye waxay badankood ka soo jeedeen dalalkii «Dhulka Udgooni» la lahaan jirey xiriirka ganacsiga iyo siyaasadda muddodaas fog.



Mahad weyn waxaa naga mudan dadkii talo iyo taagba nagu kaalmeeyey intii aannu ku hawlanayn shaqadan, ayna ka mid yihiin:

Cali Xuseen «Madoobe» (iilay)
Jaamac Xuseen
Siciid Xuseen «dable»
Cabdikariin Xaaji Faarax
Yaasiin Cismaan Keenadiid
Aw Jaamac Cumar
Xasan Shiikh Muumin
Yuusuf Ciise «Badmacaanshe»
Barni Jaamac Cumar
Maryan Axmed

Axmed Cartan Xaange

Xamar, 1973 - Maajo 1980.

# TUSMO

Arar .................................. Bog 3

Qayb kow B): WAAYAHA ILBAXNIMADA SOOMAALIYEED

1. Fircoonnadii iyo reer-punt .......... 12
2. Taallo-tiirriyaad .......... 16
3. Xararro iyo Aslid .......... 17
4. Asiiliga erayga "SOOMAALI" .......... 18
5. Magacyada Magaalooyinka Soomaaliyeed .......... 20

**Qayb kow T): WAAYAHA XIJIGA REER-PUNT**

1. Xiji .......... 22
2. Maydi .......... 23
3. Jadar ..........
4. Xabagta Jadarka .......... 26
5. Shaqaalaha xijiga .......... 28
6. Beeyo .......... 29
7. Xabagta la cuno .......... 30
8. Gaadiidka faleenka lagu raro .......... 31
9. Suugaanta xijiga .......... 31
10. Uunsi .......... 32

**Qayb labo: DHIRTA LAGA SAMEEYO WEELKA**

1. Qabo .......... 34
2. Argeeg .......... 38
3. Saabka haanta .......... 40
4. Suugaanta haanta .......... 42
5. Xab (qarbad) .......... 44
6. Suugaanta Xabka .......... 46

**Qayb saddex: DHIRTA QUUDKA LEH**

1. Timir .......... 47
2. Suugaanta timirta .......... 49
3. Daray .......... 49
4. Suugaanta darayga .......... 50
5. canjeel .......... 51
6. Suugaanta canjeelka .......... 53
7. Garas .......... 53
8. Suugaanta garaska .......... 54



9. Yicib .......... Bog 54
10. Suugaanta Yicibta .......... 55
11. Mareer .......... 55
12. Suugaanta Mareerka .......... 55

**Qayb afar: DHIRTA DAAWADA LEH:**

**b) Dacarfaal**

1. Carmo .......... 58
2. Dacar .......... 58
3. Galool .......... 60
4. Jaleelo .......... 60
5. Kulan .......... 60

**t) Caallirjoojis**

1. Murcanyo .......... 60
2. Gogobo (gagabood) .......... 61
3. Xardhagax .......... 61
4. Murre (malmal) .......... 61
5. Kiriiri .......... 61
6. Caday .......... 62
7. Culay (cugay) .......... 62
   b) dhirta culayga
   t) caws-deebeed
8. Suugaanta culeyga .......... 64

**Qayb shan: AQAL SOOMAALI**

**B) Caw**

1. Gogosha Cawda .......... 65
2. Dermooyin .......... 66
3. Weelka Cawda .......... 67
4. Caddiir .......... 67
5. Aslidda Cawda .......... 68
6. Xararka dermooyinka (barabaro) .......... 69
7. Suugaanta dermooyinka .......... 70

**T). Rarada**

1. Jarco iyo Weylaalis ........ Bog 71
2. raar (harar) ........ 71
3. Kebed ........ 74
4. Suugaanta kebedda ........ 76

**j). 1. Dhigo**

b) Qabax ........ 77
t) Lool ........ 79
2. Aslidda dhigaha ........ 79
3. Suugaanta asalka ........ 79
4. Udbo ........ 79
5. Suugaanta udbaha ........ 80
6. Xargaha ........ 80

**Qayb lix B): MARASHIDII SOOMAALIDII HORE** ........ 84

1. Qayraan (dhuu) ........ 82
2. Dharka dumarka ........ 82
Garbasaar (hagoog) ........ 83
Gambo ........ 83
Qalabka qurxinta ........ 83
3. Dharka ragga ........ 84

**Qayb lix T): KAYDKA DHAQANKA QARANKA**

**Qayb toddoba: DHISIDDA DOONTA**

1. Dhisidda doonta ........ 86
2. Shaqaalaha doonta ........ 88
3. Noocyada doonta ........ 89
4. Shiraacyada doonta ........ 89
5. Iidaad iyo cayaaryo ........ 90
6. Qaybaha doonta ........ 90
b) gudaha ........ 90
t) oogada sare
7. Barroosinka ........ 90

**Qayb Sideed B): DABAYLAHA GANACSIGA**

b) Koos ........ 92
t) Shamaal (xagaa) ........ 92



j) Asjab (wajiine) ........ 93
x) Suugaanta Asjab ........ 94

Qayb siddeed T): **DHOOFIDDA DOONYAHA SOOMAALIYEED**

1. Yohoon Sawaaxil ........ Bog 94
2. Yohoon Cadmeed ........ 95
3. Xawaal (Asjab : taanga-mbili) ........ 95
4. Aqbalma-yaqbal (wajiine) ........ 96
5. Magaalooyinka carbeed ee doonyaha Soomaaliyeed u dhoofi jireen ........ 96-
6. b) Bilo Asjab ........ 97
t) Bilo Gu' ........ 97
j) Bilo Diraaceed (xawaal) ........ 97
x) Bilo Koos ........ 98
kh) Bilo Xagaa ........ 98
d) Bilo Dayreed ........ 98
r) Bilo Qorraxeed ........ 99

**Jimeynta Xilliga Badmaaxeenka iyo reer-miyiga**

7. Dirir ........ 100
b) Magacyada dirirrada ........ 100
8. Suugaanta Dirirrada ........ 101
9. Rugaha Raxmaaniga iyo Diiradda ........ 105

**Qayb Sagaal: NOOCYADA KALLUUNKA SOOMAALIYEED**

b) Libaaxbadeed ........ 108
t) Noocyada Kalluunka kale ........ 111
j) Qalabka jillaabidda kalluunka ........ 116
x) Bislaynta hilibka kalluunka ........ 117
kh) Sadaf (luul) ........ 118
d) Suugaanta Badda ........ 119
r) Suugaanta kalluunka ........ 123

**Qayb Toban: ERAYBIXIN**

1) Erayada Masartii hore ........ 124
2) • Giriigga ........ 125
3) • Latin ........ 125
4) • Carbeed ........ 125
5) • Hindiga ........ 126
6) • ka haray Af-Soomaaligii hore ........ 126

**RAADRAAC QORAAL (Bibliography)** ................ Bog 128

Astaamaha Tashade yaal
Aqsum iyo Sudan
Asmara iyo Jabuti
Adari iyo Awdal
Avalite iyo Museylan
Andera iyo Bulxaar
Arladii Ilaah
Araraha Serabion
Geeska Afrika
Punt loo aqoon jirey
Geedaha Udgoonka leh
Adduunyada u diri jirey
Taariikhda Afrika
Ninkii eegi doonow
Arladii aan tiriyaad
Aad uga heleysaa...

*(Axmed Nuur Yuusuf)*

## MASAWIRRO

Bog. 14 : Puntite 'tribute',tomb of Rekhmire (Tuthmosis III.)
» 25 Geedka Jagcarka
» 27 Migaaf
» 36 Haan la tolayo
» 39 Haan
» 41 Haan saabsan
» 52 Canjeel (Mukay)
» 59 Qoraha iyo Dacarta
» 73 Raar
» 78 Aqal Soomaali (1)
» 81 Aqal Soomaali (2)
» 110 Libaax-badeed
» 115 Kalluun (tarraqad)

## Qayb Kowaad B): WAAYAHA ILBAXNIMADA SOOMAALIYEED

### 1. Fircoonnadii iyo reer-Punt

Taariikhdu waxay ka marag kacday, sida aannu ararta ku muujinnay, in Soomaalidu kumaan-guurooyin xiriir ganacsi iyo dhaqan la lahaan jireen dalal badan oo ku yiil qaaradda Afrika iyo Aasiya. Xiriirkaasi wuxuu ahaa mid u baahan socdaalka badaha oo badmaaxyada Soomaaliyeed u dhoofi jireen, siiba dalalka koofur Carbeed, Indiya, bariga fog iyo koofur Aasiya. Kolkii la bartay xoogga shiraaca iyo isbeddelka dabaylaha ganacsiga ayuu suurtoobey socdaalkaasi, aqoonta dadkana si weyn u kordhiyey. Badmaaxyada Soomaaliyeed waxay kale oo u safri jireen dalalka ku yiil xeebaha woqooyi Afrika ee Badda Cas, Masartii qadiinka ahaydna ku jirtey. Xeebaha koofur Afrikana way ka ganacsan jireen Soomaalidii hore. Dhinaca kale, badmaaxyada dalalkaas shisheeyana way u soo safri jireen geeska Afrika; sidaas buu ku xoogoobey xiriirkaas ganacsiga iyo dhaqanka ee Soomaaliya la lahaan jirtey dunida inteeda kale.

Badeecadda Soomaaliya u diri jirtey iyo tii ay keensan jirtey waxay ahayd, sida lagu hayo qoraallo taariikheed, mid noocyo badan leh (eeg ararta).

Kolkii qarnigii 18-aad matoor beddelay xooggii shiraaca, doontiina markab ka tallaaba badaha, socdaalka hawaduna isu soo dhoweeyey adduunkii oo idil heer cusub oo ilbaxnimo ayuu furay gaadiidkaasi. Socdaalkii qadiinka ahaa ee doonta iyo shiraaceeda ku sinnaa waa laga tallaabsaday, oo wuxuu noqday heer gaboobay oo laga guurey.

Inkastaba, safarkii badaha ee ay doonyaleyda Soomaaliyeed kumaan-guurooyin tegey wadeen, iyo ganacsigii ay la lahaayeen dalalka dibedda ma wada joogsan markii gaadiidka cusubi soo baxay. Badmaaxyada Soomaaliyeed facba facii ka horreeyey waxay ka dhaxleen waaya-aragnimo iyo aqoon qoto dheer, karti iyo geesinnimo hawshooda ku saabsan. Badmaaxnimadu waxay dadkaas u noqotay dugsi dhallinyarada lagu tababaro, si qofku uga soo baxo kaalinta uu ku leeyahay nolosha bulshadiisa, isaguna si xarrago leh kula soo baxo dhuunigiisa dharaareed. Hawsha badmaaxnimada Soomaaliyeed qiimahaas weyn ee taariikheed bay weli leedahay oo mar kasta soo noolaynaya, haatanna ka dhigay gundhigga dhaqaalaha gobollada bari ee dalka. Wixii qiima leh way waaraan, socodka waqtiguna ma duugeeyo, saa maskaxda iyo muruqa qofka baa kasbay qiimahaase. Arrintaas baana u sabab ah faallahayagan kooban ee ku saabsan hawsha iyo nolosha badmaaxyada Soomaaliyeed ee ku nool gobollada bari.



Raadraaca taariikhda dunidu wuxuu muran-la'aan cadday-nayaa in muddo ka bilaabata qarnigii (qarni waa 100 sano) 15-aad xilligeenna (Ciise ka hor (xkh) Geeska Afrika laga yiqiin adduunkii qadiinka ahaa ee ay ka mid ahaayeen saddanooyinkii waagaas ka dhisnaa agagaarka badda dhexe, sida Masartii Fircoonnada; Giriiggii Helenik; Foneshiyan iyo Saddanooyinkii Bariga Dhexe, sida Shiinaha, kd. Waxaa la ogyahay inay badmaaxyo iyo sahamiyeyaal ka yimid dalalkaas kuwo ka mid ah soo booqan jireen geeska Afrika qarniyo kala duwan, ka dibna bilawday xiriir ganacsi iyo dhaqan ka dhexeeya dadkii kolkaas degganaa dalkaas iyo carradii socotadaasi ka yimaadeen. In xiriirkaasi boqol-guurooyin dambe socday baa la ogyahay. Dalalka xiriirkaas la yeeshay geeska Afrika, oo waa dambena ay dalalkaas shisheeye u yiqiinneen "Raasigii Udgoonaa", waxaa ka mid ahaa Masartii qadiinka ahayd, Shiinaha, Giriiggii, Roomaankii, Farsi, Carabta kd. Reer Masar, oo la bidayo inay ahaayeen dal shisheeye ee xiriir wax wadaqabsi la yeesha geeska Afrika kii ugu horreeyey waxay qaaradda Afrika docdeeda bari u yiqiinneen "Punt", oo loo maleeyey in ereygaas macnihiisu yahay "Dalkii Eebbe".

Ganacsiga Masartii qadiinka ahayd la lahaan jirtay boqol-guurooyin badan dalka Punt, oo loo filayo in uu ahaa dal ku fadhiya inta u dhaxaysa xeebaha woqooyi-bari ee Badda Cas iyo kuwa koofur-bari ee Badweynta Indiya, waxaa qiraya qoraallo la hayo. Qoraalladaas waxaa ugu macna weyn faallada ku saabsan socdaalkii xusuusta dheeraa ee ay boqoraddii Hatshepsut u soo dirtay dalka Punt, laguna qiyaasay inuu ahaa sanooyinkii 1490-1468 xkh. Socdaalkaas taariikhdiisa si tifaftiran baa loogu masawiray derbiyada xujuub-taallada Deir-el-Baxri ee haatan Masarta cusub ka dhisan. Masawirradaasi waxay muujinayaan noloshii tiillay waagaas dalka Punt, waxaana ka mid ah masawirkii boqorkii iyo boqo-

raddii dalkaasi u talin jiray berigii socdaalkaasi tegey dalkooda. Boqorka iyo afadiisa oo dameer fuushan buu muujinayaa masawirku. Masawirradaasi waxaa loo maleeyey in ay yihiin kuwii ugu qadiinsanaa ee laga hayo taariikhda qaybta qaaradda Afrika ee koofur ka xigta lamadegaanka Sahara.

Masawirrada Deir-el-Baxri waxaa kale oo ku ag qoran tiro muujinaysa badeecaddii la yaabka lahayd ee reer Punt, ee ay badmaaxyada reer Masar ka soo buuxsadeen markabyadooda kolkjii ay soo noqdeen. Hatshepsut seygeedii, Tuthmosis ee lagu qiyaasay inuu noolaa sanooyinkii 1490-1439 xkh., wuu sii xoojiyey xiriirka ganacsiga ee ka dhexeeyey Masar iyo Punt. Badeecadda yaabka leh ee Punt looga keenay boqoradda waayahaas waxaa ka mid ahaa:

1,685 heket (miisaan) oo dahab ah<br>
155 deben " oo dahab ah<br>
2 kidet "<br>
134 bidde oo rag iyo haweenba leh<br>
114 dibi waaweyn<br>
419 sac<br>
daayeer nooca apes<br>
eyo<br>
malmal engegan<br>
foolmaroodi<br>
looxaanta saadka<br>
haragshabeel<br>
iyo wax kasta oo wanaagsan ee dalkaas yiil...

(eeg buugga: Ancient Records of Egypt, J. H. Breasted, Chicago, 1906, vol 2, iyo buugga : Soomaaliya, Cultural Department, Ministry of Education, Mog., August 1967, pp. 62-63).

Sababta ugu weyneyd, sida loo filayo, ee reer Masar iyo qolooyinkii kale ee dalka Punt u soo safri jirayba, waxay ahayd ganacsiga "dhirta udgoon", ee ay reer Punt hodan ka ahaayeen. Badeecadda kale oo ay danayn jireen ganacsatada shisheeye waxaa ka mid ahaa fool maroodi. harag shabeel, looxaanta saadka



Sawir: Puntite "Tribute", Tomb of Rekhmire (Tuthmosis III)



iyo qandalka, malmalka kd., oo adaygooda awgiis (dhuuxmadoobaad) loxodyada fircooniinta geeriyooda looga qori jiray,xujuubyadoodana lagu sharixi jirey, sida la hubo. Ha yeeshe, badeecadda reer Punt u diri jireen suuqa adduunka waxaa boqol-guurooyin badan ugu qiima weynaa "dhirta udgoon".

Beecsharada "Dalka Eebbe" la lahaan jiray suuqa adduunka waxaa si tifaftiran uga sheekeeyey nin badmaax ahaa oo Giriig u dhashay,ee socdaal ku maray xeebaha geeska Afrika muddo lagu qiyaasay qarnigii 1-d xkh. Wuxuu ka marag kacay ninkaasi:

> "... reer Avalites (Awdal ama Seylac baa loo filayaa beledkaas - ACX) oo 400 ee Stadia (1 Stadia = 1 mayl) dhinaca woqooyi ka xiga Raasiga Udgoon (Raas Casayr?), badeecadda ay dibedda u dhoofiyaan waxaa ka mid ah:
>
> dhirta udgoon<br>
> fool maroodi<br>
> qolof diin<br>
> malmal (myrrh) kuwa kale oo idil ka fiican...Badeecadda dibedda ay ka keensadaan waxaa ka mid ah :
>
> biladayeyaal<br>
> sharbeed mira canab laga tuujiyey oo Thebes laga keenay<br>
> dhar loogu tala galay reer Berber (malaha waa Berbera beledkaasi - ACX)<br>
> haruur

khamro iyo macdanta "Tin"-ka ah ee aan badnayn..." - (waxaa warkaas lagu qoray buugga : The Peripulus of the Erythrean Sea, waxaana soo xigtay Breasted).

Durraamad ama kahaybadaysi diimeed, dhalasha iyo dhimashada qofka oo loo uumiyo, fooxinta aqallada iyo siyaalo kale oo badan buu adduunkii hore ugu dhaqmi jiray faleenka laga keeno "dhulka udgoon", oo guyaal badan ahaa dalka keli ah ee laga helo faleen ku filan suuqa ballaaran ee adduunkaas oo idil. Reer Masar waxay maydiga ku kawrixin ama engejin jireen meydka booqrradooda si uusan u qurmin oo kumanyaal gu' u oollaado. Farsamadaas waxaa loo yiqiin "mummification", kawrixin iyo keydinta meydka.

Intii aan dhaqammada kala duwan ee shisheeyuhu saamayn dadka soomaaliyeed waxay lahaan jireen dhaqan iyo xeer u gaar ah ee qoto dheer ku leh xusuustooda. Guryo ay ku hoydaan, weel ay wax ku shubtaan, dhar ay qaataan iyo hub ay ku dagaallamaan bay samaysan jireen. Farshaxannimada iyo kartida soomaalidii hore waxaa marag u ah alaabada ay samaystaan oo lihiga u ahaan jirtey. Nasiibdarro, farshaxannimadaasi way sii baaba'aysaa oo da'da haatan joogta illowdey. Gumeystayaalkii dalka u talin jiray boqolka sano baa sii xabaalay farsamadii iyo farshaxankii hibo u ahaan jiray dadka soomaaliyeed, si ay maskaxdooda ugu tallaalaan dhaqan qalaad oo u dhaxal wareegaan.

Raadraaca haatan la hayo ee ka marag kacaya ilbaxnimadii iyo farshaxankii soomaaliyeed ee gaarey heerka sare waxaa ka mid ah taallooyin, mallugyo, gebiyo far, xarar iyo masawirro ku qoran yihiin; jajabka jalxadaha iyo fujaanno; lacag bir ah, oo laga helay meelo badan ee ka mid ah Soomaaliyada cusub.

## 2. Taallo-tiiriyaad (tuuriyaad)

| Meel | Gobol | Nooca Xararka |
|---|---|---|
| 1. Baardheere | Baay | dhagxan tuban |
| 2. Xabaalo Ambiyaad | Bari | » » |
| 3. Xabaalo dhaleed | Mudug | xujuubbo qadiin ah |
| 4. Boosaaso | Bari | taallo dhisan |
| 5. Hartiyimi | Nugaal | » » |
| 6. Laas-caanood | » | » » |
| 7. Buur Haybe | Bay | taalo dhisan, xujuubbo |
| 8. Burco | Togdheer | dhagxan tuban |
| 9. Sheekh | » | » » |
| 10. Ceerigaabo | Sanaag | » » |

Taallooyinkaas qaar waa dhagxaan uun la iskor saaray ballaar ahaan, qaarkoodna waa dhismo kor u taagan (taalo-tiirriyaad, ama tuurriyaad); kuwa ugu dheeri waa toban, ballacana waa toban mitir.

Ujeeddada dhismooyinkaas Soomaalidu siyaalo kala duwan bay u sheegaan: qaar waxay ku sheegaan xujuubbo ay dhiseen tolalkii Gaalla ee sebenno hore ku noolaa geeska Afrika. Qaar kalena waxay yiraahdaan dhismooyinkaasi waa xusuus ay ka tageen dad qadiin ah ee aan la aqoon cid ay ahayeen.



Taalloyin la faagay waxaa laga helay lafo dad; jajab maacuun dhoobo ka samaysan iyo alaabo kale; arrintaasina waxay ka marag kacaysaa in dhismooyinkaas qaarkood yihiin xujuubbo lagu aasi jiray dad geeriyooday (eeg buugga: "Scientific Notes, Somali-Soviet Expedition, Moscow, 1974, p. 314, iyo Lewis I. M., the So-Called "Galla Graves" of Northern Somaliland, "Man", 1961, vol.LXI, P. 103).IN kastaba, waxaa hubaal ah in taallooyinku yihiin raad ay ka tageen bulsho gaartay ilbaxnimo iyo farsamo heer sare ah, sidii reer Punt lagu tilmaamay kuman-guuryooyin ka hor.

## 3) Xarraro iyo Aslid

Ilbaxnimadaas waxaa kale oo ka marag kacaya sawirrada iyo xarrarada ku dul qoran gebiyada iyo qararka ku yaal meelo badan ee ka mid ah Soomaaliyada maanta, sida:

| Meel | Gobol | Nooca Xararka |
|---|---|---|
| 1. Godxardhane | Nugaal | qoraallo, sawirro |
| 2. Qubiyaale | » | » » |
| 3. Hilayo | Sanaag | qoraallo |
| 4. Karinheeggane | » | qoraallo, sawirro |
| 5. Dhalanle | » | qoraallo |
| 6. Buq Caqable | Hiiraan | dhagxan la qoray |
| 7. Dooyaale | » | sawirro, bohol |
| 8. Heerkuqoran | Sanaag | qoraallo |
| 9. Madduunha | » | qoraallo, sawirro |

Tussaale ahaan bohosha Godxardhane waxay ku taal meel saddex iyo toban kiloomitir woqooyi-galbeed ka xigta Ceel Afweyn; ballarka irridda godku waa toddoba mitir, dhererka saqafkuna shan mitir; guduhu waa ballaaran yahay, galbeed buuna u jeedaa. Wadi-iqe ciriiri ah baa u kaca galbeed iyo raarta bohosha. Derbiga dhinaca galbeed waxaa ku sawirran dad ku jooga fardo; geel, libaaxyo iyo waxyaalo kale ee aan la garan karin. Derbiga woqooyi-galbeedna waxyalahaas oo kale baa ku qoran. Sawirrada waxaa lagu dul qoray dhagxaanta derbiga ee yare jilicsan, iyada oo lagu dhaqmayo qalab leh caarad dhuuban. (eeg buugga: Scientific Notes, Somali-Soviet Expedition, Moscow, 1974, p. 316).

Lama oran karo bulshadii ka tagtay raadkaas ilbaxnimo iyo farshaxanka heerka sare ahi ma ahayn soomali, sida ay dhaaxaa yiraahdaan qoreyaal doonaya in ay daboolaan taariikhda soomaaliyeed. Libinta iyo muunada ilbaxnimadaas waxaa iska leh dadka soomaaliyeed; waa qaybtii dadkaasi ku darsadeen ilbaxnimada adduunka ee loo siman yahay.

**4) Asliga ereyga "SOOMAALI"**

Haddii la goobay oo la raad raacay meesha uu ka soo jeeday iyo macnaha ereygaas, waxaa loo maleeyey in uu ka yimid jirridaha hoos ku qoran middood:

b) Samaale
t) Soo maal
j) So' maal

Suugaanta la xusuusto iyo sheeko-xariiryooyinka dadweynaha soomaaliyeed waxay muujiyeen in magacyadaasi soo jireen waayo fog; welina ku nool yihiin af-soomaaliga jira haatan.

Magac (Samaale) ragga soomaaliyeed baa la baxa, wuxuuna ka unkamay jirridda: samaan:

Samantar
Samawada
Samalaho
Samaale...kd.

Haddii lafagur naxwe lagu sameeyo erayga (samaale) waxaa muuqata in uu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

1) samaan(ta) waa magac
2) le(h) waa fal lahaansho

Labadaas xubnood baa isku xiriirismay oo unkay isku-dhafka Samaanle(h).

Waayo badan ka dib dhawaaqii isku-dhafkaas wuu sii qayirmay ama doorsamay; maxaa wacay, erayada afku waa wax nool oo dhasha oo dhinta muddo ka dib. Ereyga (samaanleh) waxaa ku dhacay isbeddel, sida:



3) Shibbanaha (h) ee dhammaadka ah (leh) waa laga tagaa, kolkii fal-lahaanshahaasi gadaal kaga xiriirsamay magaca (samaan + leh = samaanle)...

4) Shaqalka (a) ee alanka ama xubinta hore (samaan) waxaa fikiyey shaqalka (oo); alanka 1-d ee erayguna wuxuu noqday: sa = soo...

5) Shaqal (e) (samaanle - eeg 2) waxaa fikiyey shaqalka (i); alammada erayguna waxay isu rogeen: soo + **ma** + n + **le** = Soomanle.

6) Shibbanaha (n) ee dhammaadka (samaan - eeg 1) waa laga tegey isagana kolkii shaqalka (i) fikiyey shaqalka (e) (eeg 5); maxaa wacay labada shibbane (n) iyo (l) (samaanli) kuma dersi karaan jagadaas, isaga oo macnaha eraygu doorsamin.Shibbanaha (n) waxaa fikiyey shibbanaha (l) kolkii fal-lahaanshaha (leh) (eeg 3) gadaal kaga xiriirsamay jirridda (samaan).Isbeddelkaas ka dib eraygii qadiinka ahaa (samaan)wuxuu u xuub siibtay erayga cusub (Soomaali). Erayga (soo - eeg t) waa falkaab, wuxuuna qeexayaa falka (maal); weerta oo ebyanina waxay ka unkantay, sida sheeka-xariiradu werisay:

7) soo maal (xoolaha)
Magacna waa noqdaa erayga (maal), waa xoolo, mood iyo noolba.
Erayga (So' - -eeg j) wuxuu ku jiraa erayada nool ee af soomaaliga, macnehiisuna waa (hilib - so' iyo saan). Orahda 7 macnaheedu wuxuu noqon karaa, haddii la eego naxwaha soomaali-weynaha:

**8) hilib xoolaad**

Kolkii la is feer dhigay erayada lagu tusay qaybaha (b, t iyo j) waxaad moodda in erayga (samaan -eeg qayb b) yahay, ama u dhow yahay, jirriddii uu ka unkamay erayga (Soomaali); kaas oo ah, sida la ogsoon yahay, magaca haatan loo yaqaan dalka ku yaal Geeska Afrika ee ay deggan yihiin dadka ku hadla af-soomaaliga, ama Soomaalida.

### 5) Magacyada Magaalooyinka

Soomaaliya waxaa laga helaa, siiba gobollada bari, magaalooyin iyo rugo badan oo ay ku duugan tahay sheekadii qadiinka ahayd ee ka marag kacaysa ilbaxnimadii iyo horukacii lagu yiqiin reer Punt, ama Dalkii Eebbe. Magaalooyinkaasi waxay leeyihiin magacyo qadiin ah oo la oran karo waa raadraac tusaya ilbaxnimadaas, waxaana ka mid ah:

| Magaalo | macnaha magaca |
|---|---|
| 1. Bayla | baylah, kalluun aan la kala lahayn |
| 2. Bareeda | berisamo, badbaado, barwaaqo |
| 3. Bacaadweyn | bacad weyn, buur ciideed |
| 4. Baargaal | baar geel, banka Daylac oo geelu daaqo, kuna badan yahay |
| 5. Berbera | beri-beri, waqtiga kulaylaha waa laga guuri jirey, waqtiga qaboobahana waa la soo degi jirey; meel beri-beri la joogo. |
| 6. Boosaaso | busayl, xiiso |
| 7. Butiyaalo | ku bood, badda |
| 8. Burco | ciid |
| 9. Tooxin | toox, dherer, xarrago, dhirta Dhamasta baa ka baxda |
| 10. Xarsho | ciid |
| 11. Xaabo | xaabso, kalluunka |
| 12. Xaafuun | xaafood, geed xooluhu cunaan daran-ahaan |
| 13. Xiis | xir |
| 14. Daamo | dumin, laaso xareed ah oo baddu dumiso baa ku oolli jirey |
| 15. Durduri | durdur, orod |
| 16. Raas-Casayr | casiif (carabi), burburi |
| 17. Shalcaw | cawd, kul |
| 18. Dhurbo | dhuur, dhir |
| 19. Caluula | Calowla', boqorad qurxoon ee u talin jirtey magaaladaas, sida la yiri |
| 20. Ceelaayo | ceelal leh |
| 21. Garso | gaarsii barwaaqada, xiji baa ka baxa |
| 22. Geesaley | geesi leh, geeso guul leh (geesaguulle - magac rag) |
| 23. Qandala | qandal leh, geed |
| 24. Qaw | haadaan, bohol |
| 25. Karin | buuro dhexdood |
| 26. Laas-qoray | laas iyo qori |
| 27. Maydh | mayr, qasaal, maydi(xiji) |
| 28. Murcanyo | muranla', dal barwaaqo |
| 29. Wareegsame | wareeg, u wareeg Calawla' |
| 30. Hurdiyo | hurdo, meel bacad ah oo la seexdo |
| 31. Ayl | il biyo ah, durdur |
| 32. Afkalahaye | marso ballaaran, illin |
| 33. Ollog | oddoros, tilmaan-qaadasho, majare |



Magaalooyinka qadiinka ah ee haddii dhab loo sahamiyo wax weyn ka sheegi lahaa ilbaxnimadii iyo waayaha soomaaliyeed way badan yihiin (eeg qayb kowaad 2 iyo 3). Goobid dhinac kasta ah,siiba qodaalka iyo sahanka guud ee dhulka baa loo baahan yahay, si daaha looga qaado dhaxalkaas qaranka ee xabaalmay boqol guuroyin tagay.

## QAYB KOW T) : WAAYAHA XIJIGA PUNT

Saddanadii 11-d ee uu u talin jiray Fircoonkii Metuhotep ee jirey qarnigii 21-d xilligeenna ka hor (xkh), xijiga laga keeno dalkii reer Punt ee la geeyo Masar waxay ugu dhaqmi jireen sida fooxinta, catar, saliid la ismariyo oo nuxuraysa oogada qofka iyo siyaalo kale oo badan. Qoraalka la helay ee ku saabsan safarkii caanka ahaa ee boqoraddii Hadshepsut (1490 - 1468 xkh) u dirtay dalka Punt waagaas, waxaa lagu weriyey badeecaddii safarkaasi boqoradda uga keenay dalkaas, taas oo ahayd mid "yaab iyo irkig leh". Waxaa ka mid ahaa badeecaddaas alaabta hoos ku qoran:

dhirta udgoon ee Dalka Eebbe oo idil
kolayo ay ka buuxdo Xabag Malmal
dhir qoyan ee Malmal
saad (loox)
looxyo geedka Cinnamon
looxyo geedka Khesyt
looxyo nooca Ihmut
looxyo nooca Sonter
Indhokuul...

(waxaa laga soo xigtay buugga :Soomaaliya, Cultural Department, Ministry of Education, Mog., 1967, bog 62-63).

Qoraalladaasi waxay kale oo weriyeen in dhirta xijiga ee laga keenay Punt lagu tallaalay fagaaraha Taallada durraamadka ee boqortooyada, oo "Cir iyo dhulba buuxiyey udgoonkii fooxu; udgoonkii baa ka buuxsamey Guriga Weyn, Amon wadnehiisuna waa u riyaaqay..." (eeg buugga Soomaaliya, bog 66).

Marka wax la durraamanayo foox baa la shidi jirey dunidii qadiinka ahayd, welina waa sidii. In Eebbaha ama waaqu uusan qancayn fooxla'aantiis baa la moodi jirey. Amon iyo Waaqyo kale sidaas bay uga haybaysan jireen reer Masartii hore.

### 1) XIJI

Xijigu waa beerta faleenka, erayga (faleen)falid buu ka yimid. Xijigu saddex qaybood buu u kala baxaa:



1. maydi oo ah nooc luubaanta ka mid ah, isaga baana ugu fiican
2. beeyo oo nooca labaad ah
3 xabag oo nooca saddexaad ah.

Saddexdaas caynba dibedda baa loo dhoofiyaa. Dhirtaasi iyaga baa iska baxa, ee cidi ma beerto. Saddexda geedba Berdaha bay le'eg yihiin marka ay si fiican u baxaan.


2) Maydiga ama Jagcarku waa magac guud. Inta aan geedka hog lagu dhufan, nagaf (daqar) baa lagu dhuftaa, meesha la nagfay baa ka dib hog noqota.Maydiga mindi (Migaaf) baa lagu sarcaa (sarsaraa), meesha la sarcay ama la nafgay hog baa la yiraahdaa. Geed kastaba sida uu u weyn yahay baa hogta loogu dhuftaa. Nagfidda ka dib 2 toddobaad baa loo kaadiyaa nagafka, si qolofi u fuusho. Qolofta hore ee maydiga waa layska tuuraa, qolofqaadka labaadna 2 toddobaad baa la sugaa, wax yar oo il cad, ama fiirto la yiraahdo baa laga guraa qolofqaadka labaad, ilaa kan toddobaad. Goorta ay ugu buuxsanto, isha ama fiirta baa la fujiyaa,si uu Jadarku u diiqaalyeeyo. Geedka xijiga haddii sano walba la galo, ama la saro aqdun ama golof buu noqdaa. Sidaas darteed waa in sano ama ka badan loo kaadiyo, si uu u nasto geedku. Marka uu geedku sanooyin nasto wuu cayilaa oo cogor baa la yiraahdaa.

3) Jadarku waa xabag laanta la dureerta, marka uu jadarku dhulka fariistana habto baa la yiraahdaa. Haddii qorraxdu kulushahay hogtu 2 toddobaad bay ku qolfaysataa kuna awdantaa. Xilliga qaboobaha ahse intii bil ah bay ku qolfaysataa hogtu.Hogtu waa dhaawac jirka geedka lagu dhigo, sida jirka qofka oo kale, sidaas darteed waa in aan laga fujin qolofta muddadaas ka hor, si ay u sarac wanaagsanaato, caana badanna u dhiiqdo. Muddada ka hor haddii qolofta laga fujo wuu gaagaxayaa geedku, carun guduudan baana ka yimaada, meesha caanuhu ka iman lahayeen.

Marka jadarku kaydsamo in kiilo le'eg buu noqdaa, geedka laamihiisa ama jirridiisa buu ku dhegaa. Geedka ugu madisan oo 100 hogood ku taal 100 kiilo oo jadar ah buu dhali karaa. Intaas waxaa u si dheer ishii ama fiirtii la sii guran jirey intii uusan jadarku guuyoobin.

Marka hore dhuraad ama dambiil baa lagu soo guraa jadarka, kadibna kafadda ama maxmaladda oo ah dambiil weyn baa lagu shubaa. Labo qofba kafad bay leeyihiin, calaha oogadooda baa laga soo dejiyaa kafadaha oo golaha hoos ku yaal baa la keenaa. Ka dibna muudi ama karoor, taallo, baa lagu daraa oo la waraa, si uu u engego. Jadargoyntaas wixii ka dambeeya luf ama haraa baa la yiraahdaa, ilaa nagafka dambe laga gaarana waa la lufeystaa. Xijiga dhulka weyn ku fadhiya miciyaan baa la yiraahdaa. Kamakacaan waa xijiga la dul deggan yahay, shaqadiisuna joogtada tahay sanada oo dhan. Kob waxaa la yiraahdaa xijiga hawshiisu ku dhammaato muddo yar.





Sawir: Geedka Jagcarka

Waxtarka geedka xijigu wuu badan yahay, waxaa ka mid ah:

1 — foox ama bukhuur diimaha baa loo shidaa
2 — dubaalad ama liifad la shito baa laga dhigaa
3 — haamaha, doonyaha baa lagu kabaa looxiisa
4 — xanjo la calaliyo oo ilkaha u roon weeye
5 — daawo-ahaan baa loo cabbaa nakhwaha ama xabagta moxorka
6 — xoolaha baa la cabbsiiyaa beeyada daawo-ahaan
7 — jiliftiisa ama licig haamaha gocoyada ah iyo qarbedyada ama xurugga ah, haraga cusub, baa lagu aslaa
8 — caleentiisa xoolaha baa cuna jiilaalkii
9 — xaygiisa shinnida baa reer ka samaysa
10 — kiisa engegga salkiisa bagafsan hayaayad baa laga dhigaa oo digsiga baa lagu daboolaa, ama xeero baa laga dhigtaa cunnada lagu gurto.
11 — daabka migaafka baa laga gooyaa laamihiisa, kd.

**4) Xabagta Jadarka**

Xabagta Jadarku waxay u kala baxdaa una kala qiima badan tahay sida soo socota:


1. ilcad ama fiirto oo hogta dhexdeeda ka baxda
2. jadar ama guuyo oo laamaha iyo jirridda la dareerta
3. koorib oo ah xabbadaha dhulka ku daata marka la gurayo
4. habto oo inta laamaha ka soo da'da dhulka ku biirta
5. hool oo ah qolof iyo xuub isku dhafan
6. luf ama gorse oo ah lufluf soo baxa jadarka ka dib. Lufka looma kala sokeeyo oo qof kasta wuu guran karaa. Jadarkase waa la kala leeyahay oo dad baa ku tacbay sano dhan.

Sheekada dadweynuhu waxay werisay in uu geedka maydigu cirka ka soo degey oo dhulka ku habsaday. Maydigu dhadhaabka buu ka baxaa oo xididka buu dhulka la helaa, salkiisuna sallaxa buu ku barraqsanyahay, sida hayaayadda digsiga. Meeliba meesha ay ka neecaw badan tahay buu ka baxaa geedkaasi. Maydigu waa abaar-ku-noole, sida berdaha iyo higlada. Dadku waxay aaminsan



yihiin in geedku engegayo haddii migaafka (mindida xijiga lagu soo guro) dab la geliyo. Sheekadu waxay kale oo werisay in ay waa hore dhawr carruur ahi warantamaysey (warmo ridaya) heleen geedka maydiga markii ugu horreysey goortii ay geedka waran ku dhufteen oo uu ku dhegey, suu diir weyn buu leeyahaye.

**MIGAAF**




**MIGAAF**

1 2 3
FURE: 1 - afeeye (bir)
2 - daab (gajaf)
3 - habtagure (bir)

5) **Shaqaalaha Xijiga**

Qiimaha go'an ee shaqaalahu kula heshiiyaan ninka xijiga leh maqdac baa la yiraahdaa. Ninka ama haweeneyda shaqaalaha ahna waa la maqdacay baa la yiraahdaa, marka ay xijiga gurayaan. Marka ay jadargoyska tahay waxaa loo baahdaa raas ama cunno shaqaalaha la siiyo. Maalintiiba shaqaaluhu inuu u soo shaqeeyo ninka xijiga galay ama kiraystay, aynu niraahdo 200/- qiimahood baa suurtowda; 6/-oo keli ah buuse ku leeyahay shaqaaluhu, sida ay beeraleydu u yiraahdeen halhayska:

marti koytee ama in koyneebo
labiyo tobankey galaanjoo fadee....!

Sanadii 100 ilaa 200 handar baa u go'i kara ninka xijiga leh, ama kiraystay.

Dhaaraanka shaqaaluhu qaataan marka ay xijiga gurayaan khaadumad baa la yiraahda, jeebkiisuuna ka gataa. Ninka ama haweenayda hawlkarka ah oo durba kafaddiisa buuxiya khaddaan baa la yiraahdaa. Cunnada shaqaalaha la siiyo inta ay xijiga gurayaan raas baa la yiraahdaa, sida annu kor ku tilmaannay. Raasku wuxuu ka kooban yahay:

| | |
|---|---|
| quraac oo ah shaah iyo nus rodol timir ah | sh. so. 1.50 |
| qado ah rodol bariid ah iyo damashkiis (iidan) | " 2.50 |
| casho oo ah hal kimis ah oo weyn iyo damashkeed" | 2.00 |
| qiimaha qofkiiba dharaartii lagu maqdacay | shs. 6.00 |

Qofka la maqdacay raaskiisu wuxuu ku kacaa sanadii:

30 × 12 × 6/- = shs. 2,160/-. Xijiluhu wuxuu heli karaa sanadii 200 × 80 × 2/- = shs.32,000/-, ama 200 handar oo min 80 kiilo ah oo 2/- lagu gaday kiiladiiba. Kharaj oo dhan sida kirada gaadiidka, canshuurta, kd. waa in uu bixiyo xijiluhu.

Dhirta xijiga mar waa la kireeyaa, xiji buu galay baa la yiraahdaa ninka dhirta ku shaqaysanaya. Labo min oo timir ah iyo joonyad bariid ah buu sad ama kiro u qaataa ninka geedka xijiga lihi, haddii



uu kireeyo. Ninka xijiga galay iyo shaqaalaha uu maqdacay xoogwadaag baa laysku yiraahdaa, waxayna u xisaabtamaan sida soo socota:

b) laf oo ah raasamaalika xijigalaha
t) xoog oo ah wixii la helay marka lafta laga reeba

Laftu waa marka xijiluhu geedka laftiisa leeyahay, xooguna waa shaqada shaqaaluhu geedka geliyeen.

Dukaanle ama suuqle baa calaha xijiga laga gurayo geeya badeeco, iyadaana laysku bedeshaa ee lacagi ma jirto. Sida hoos ku qoran buu suuqluhu wax kaga gataa shaqaalaha xijiga:

1) isdhaaf - rodol timir ah iyo mid maydi ah baa lays dhaafsadaa
2) rubiqaad - rodol maydi ah buu suuqluhu kaa siiya rodol rubuc dhimman oo timir ah
3) saddexmeelood - rodol timir ah wuxuu la qiima yahay rodol iyo nus maydi ah
4 kalabar hoose - laba rodol oo maydi ah waxay u dhigmaan rodol timir ah.

Fiiro gaar

Qiimaha aannu kor ku tusnay wuxuu jirey waqtigii ka horreeyey curashadii Kacaanka Oktoobar, waagaas oo dib loo habeeyey soosaaridda iyo abaalgudka shaqaalaha xijiga.

6) Beeyo waxay ka baxdaa geedka moxor ama luufoodka la yiraahdo. Moxorku dhulka ciidda ah buu ka baxaa oo waa la beeri karaa. Lufoodkuse dhadhaabka buu ka baxaa, sida maydiga. Salkiisu ma ballaarra ee xididdo buu leeyahay, waana la nagfaa, sida maydiga. Goor walba waa la gurtaa (gooshi), laba toddobaad baana loo kaadiyaa nagafka ka bacdi, sida maydiga horraankiisa. Kulaylka bay ku baxdaa beeyadu, qaboobihiise lama gurto oo sida caanaha bay u milantaa, ama shubantaa. Uguyaraan 7 - 8 qolofqaad bay u baahan tahay xagaagii, Abril ilaa Setembar, nagafka ka dibna waa la gurtaa, ee lama kayda-

sado sida jadarka. Miraha xagaagii baxa kharaf (khariif) baa la yiraahdaa, xabagtana nakhwe baa la yiraahdaa, lufoodka buuna ka baxaa. Nakhwe waa wax la cuno.

Hawsha guud ee beeyadu waa sida maydiga. Weerta oranaysa "badwi baan sarcay sanadaan" macneheedu waa beeyo ama xabagta aan maydiga ahayn oo dhan. Sakham waa wixii aan beeyo iyo maydi ahayn.

Miisaanka beeyada handar baa lagu qiyaasaa, 1 handar = 4 faraasiiladood; 1 farasiilo = 20 rodol.

Beeyadu waxay u kala baxdaa una kala sarraysaa sida soo socota:

1) kharaf oo tan xagaagii baxda, jilfo, xuub, kd. baa ku jira.
2) nakhwe oo ah xabag soocan
3) boydo (dhegdheg) oo ah tan dayrta baxda; boydo hogta bay ku soo dareertaa, boohin buu ka yimid eraygu.

7) Xabagta la cuno

Xabagta la cuno waxaa ka mid ah:

1) bilcil - waa la daqraa geedka ka dibna la gurtaa wixii ka baxa.
2) xankookib - godin baa lagu diiraa
3) cobol - waa sida lam. 1.
4) cadaad -
5) fawlalaa
6) qurac
7) murre
8) hadi



Hadiga iyo murraha daawo-ahaan baa loo cunaa, inta kalese quud-ahaan. Dhirtaas oo dhan waa la xannaaneeyaa oo nolosha dadka bay waxtar weyn u leeyihiin, sida xoolaha nool. Haddii uusan roobka diraacgood ama ximir ku di'in xabagta oo dhammi si wacan uma baxdo.

**8) Gaadiidka faleenka lagu raro**

Marka karoortu buuxsanto callaal ama dheeg baa lagu guraa oo rati la saaraa. Callaalku waa dermo sidii xashimeed loo tolay, dheegguna waa joonyado la isku tolay kiish oo kale. Afroortu waa joonyad iyaduna. Nakhwaha qaaliga ah ee burburka laga dhawrayo maxaamalad baa lagu guraa. Ugu yaraan 20/- baa ratiga yamaarshaha ah (ugu xoog weyn awrta) lagu maqdacaa dharaar kasta ee uu soo sidey faleenka. Ka dib doon baa loogu dhoofiyaa dalalka dibedda ee faleenka soomaaliyeed suuq weyn ku lahaan jirey kumanyaal sannadood ka hor. Canshuurta laga qaadi jiray kolka doontu geyso dalalka carbeed ardiyad baa la oran jiray. Inta hawsha geedku socoto xiji baa la sarcayaa ama la beerayaa, wixii la goosto ama la tacbaa faleen baa la yiraahdaa.

**9) Suugaanta xijiga**

Marka jadarka la gurayo hees-hawleed bay shaqaaluhu ku heesaan. Haweenku marka ay seyaalkooda la shaqaynayaan waxay ku heesaan:

1) waa seerimo seerimaysannaa
aniyo seygaygu
ninna serinki
looguma tago
oo seera dhaba weeye...

Ragguna waxay ku heesaan:

2) jaallow boowow
heesta ama jiid
amuu jalawey
amuu jaraqabo
halla jiifine...

Ratiga yammaarshaha ah kolka faleenka ama alaabo kale lagu rarayo waxaa loogu heesaa hees-hawleed ay ka mid yihiin kuwa hoos ku qoran:

3) laba galab-carrawtiin iyo
guura maraa haray.
Sidii caynku kuu gubey baa
cagtu ii dalooshaa

gurgur saabliyo
haan gadaan weyn
la gurguurtow

haddaan dheeli kuu raro
iyo dhoomalaalaad
igu dhuubis baad tahay
oo waadan ii dhalan

moroh iyo maraar ruug
meygaag abaareed buu

micida u lisayaa ...

**10. Uunsi**

Dhir badan oo udgoon, xijiga ka sokow, baa jirta, kuwaas oo haweenka Soomaaliyeed ku carfiyaan oogadooda; daawo-ahaanna loogu dhaqmo. Dhirtaas inteeda badan Soomaaliya bay ka baxdaa, qaarna dibedda baa laga keenaa; waxaana ka mid ah:



**b) uunsiga**

1. jaawe - waa nooc ka mid ah luubaanta, waxaa laysku daraa jaawaha, cuud iyo cambar-madow (ma aha midka badda), idan ama dabqaad baa lagu wada ridaa oo lagu shidaa.
2. cuud - buddo
3. cuud - madow oo Sanca (Yemen) laga keeno
4. ceeryaamow
5. foox
6. marfur (markar, falax - falax)
7. hadi (eeg Qayb Kow T 7)

Daawo ahaan baa loo cabbaa hadiga, inta lagu qoosho biyo; awrta iyo fardahana waa lagu cayiliyaa qooshkaas.

**t) kuwa la ismariyo**

1. cillaan (xinne) - liin-dhannaan iyo biyo baa lagu qooshaa, calaacalaha, lugaha iyo ciddiyaha baa lagu guduudiyaa; sanca iyo magaalooyin kale oo carbeed baa laga keenaa xinnaha.
2. Kuul- iniino kuusan, sida shanfaroolaha oo ifaya sida biladaye; waa la tumaa, ama la shiidaa;
oo biyo lagu qasaa; ka dibna carruurta dhalata baa loo mariyaa indhaha, si aragoodu u fiicnaado.
3. malmal cad
" madow
" xildiid (xaldiid)
biyo baa lagu qooshaa, carruurta dhalata baa loo mariyaa dhalada, ama kugta; malmalka cad dun baa lagu duubaa oo umusha baa loogu xiraa cududda ilaa ay ka baxayso muddadaas.
4. huruud (sabakh) - biyo baa lagu qooshaa, ka dibna wejiga finanku ka soo baxeen baa la mariyaa daawo-ahaan.
5. indho-kuul (kuul) (eeg Ir. 2) - lubaan iyo dhusuqa madow ee digsiyada baa la isku dhalaaliyaa; haweenka baa ku quruxsada ama ku madoobeeya baalasha indhaha.

## QAYB LABO B): DHIRTA LAGA SAMEEYO WEELKA

### 1) Qabo

Geedka qabadu wuxuu ka mid yahay geedaha waxtarka u leh reer baadiyaha soomaaliyeed waxaana laga tolaa weelka wax lagu shubto ee ay ka mid yihiin:

haamaha
dhiilaha
ubbooyinka, kd.

Qabadu waa geed aan weyneyn wuxuuna ka baxaa hawdka oomanaha ah ee aan biyo ka dhoweyn. Marka qabada la gurayo waxaa lagala kulmaa hawl badan ee kala duwan. Kolka hore dab ayaa lagu shidaa geedka oo hangool baa la isugu duwaa laamaha, si ay uga gubtaan qodaxda iyo caanuhu. Haddii aan la gubin lama guri karo, maxaa yeelay laamaha qabadu qodax iyo dhacaan caana u eg bay leeyihiin. Qodaxdu wax bay muddaa caanuhuna way gubaan dadka jirkiisa sida caanaha geedka dharkaynka. Xaabada lagu shido dabka lagu gubo geedka waa xansaso aan dhamac lahayn, haddii kale waxaa gubanaya laamaha dhuuxooda oo weelka laga toli lahaa. Markii qodaxda iyo caanuhuba ka gubtaan baa gudin ama masaar laamaha lagaga jaraa oo meel la tuumiyaa, si dhacaanku uga dhammaado.

Ka dibna mindi ama mudac baa lagu dhilaa laamaha oo laysugu tidcaa 50 ilaa 80 liilaan, si ayan u kala dhumin. Tidica ka dib baa misna laysugu xiraa 10 ilaa 25 tidic ama xirmo, waxaana looga dan leeyahay in ay dhib yaraato markii qabada la rarayo iyo si ayan u kala lumin. Tidica waa la kaydin karaa muddo ku siman hal ilaa laba sano, haddii laga dhawro qorraxda iyo roobka. Hadday qorraxdu ku badato way ris gashaa ama mirirtaa oo jajabtaa qabadu, roobkuna waa madoobeeyaa.

Marka la rabo in la bilaabo tolidda weelka biyo yar baa lagu dharbiyaa oo la furfuraa tidica. Isla markaas mindi baa lagu qoraa oo la liil bixiyaa ama la simaa iranka, waxaana qormadaas loola jeeda in iranka ama liilanku sahal u maro duleelka mudacu mudey marka weelka la tolayo. Qoriddaas waxaa ka soo baxa iranka iyo gucunka. Iranka ama liilanka gucunka baa lagu tolaa oo isu haya duubkaas isasaaraan unugga ilaa weelka qarkiisa. Gucunku waa serbida galoolan oo ka bilaabata unugga, kuna dhammaata haanta



qarkeeda. Kolka hore mudac baa lagu dalooliyaa gucunka, irankaa laga dusiyaa daloolkaas oo lagu soo laabaa, sida irbadda iyo dunta. Haantu guud ahaan shan xubnood bay ka kooban tahay:

1 - unug
2 - kelli
3 - qoor
4 - qar
5 - aagaan - (haruubka)



Sawir: Haan la tolayo.



Marka la bilaabayo tolmada weelka unug baa la yiraahdaa, markii la ebyana gocoyo ayaa la yiraahdaa. Weelka marka la xoolaynayo kolka hore waa la aslaa, asalkana geeda ay ka mid yihiin sarmaanta, qaroonta, xagarka ayaa laga sameeyaa. Kal iyo mooye baa lagu tumaa asalka, aad markii loo tumo baa digsi lagu shubaa, biyo baa lagu daraa oo lagu kariyaa. Kolka asalku karo baa haanta gocoyada ah lagu shubaa oo lagu gedgediyaa, si asalku u wada gaaro haanta gudaheeda. Saddex ilaa afar maalmood baa saas la yeelaa, si ay haantu uga dheregto asalka. Xayr geel ama ari baa haanta lagu shubaa asalka ka dib, si xayrtu u awdo dalool kasta oo mudaca iyo iranku ka duseen kolkii haanta la tolayey. Markaas ka dib haantu waa dhaqan gashaa.

Weelka qabada laga tolo waxaa kale oo ka mid ah, haanta ka sokow, dhiilaha, ubbooyinka, xaarimada, kd. Haamuhu guudahaan waxay u kala baxaan saddex cayn :

b. dhoonhoraad
t. dhoondanbeed
j. aagaan (mid yar)

Saddexdaas haamood saas bay u kala weyn yihiin oo u kala xigaan ratiga garbihiisa ee xooggiisu u badan yahay. Dhiiluhu iyana waxay u kala baxaan saddex jaad :

1) dhiil dhawrto oo qaadda 7 ilaa 14 litir
2) dhiil dhito oo qaadda 4 ilaa 7 litir
3) dhiil carruureed oo qaadda 1 litir iyo nus.

Dhawrto waa caanaha marti ama dan kale loo kaydiyo xilliga barwaaqada ah. Qoys baa keena dhawrtada ama qoysas baa isku biiriya. Dhito waa caanaha la lulo oo subagga lagala baxo ee ciirta noqda. Dhiil carruureeddu waa mid yar oo carruurta caanaha loogu shubo.


Hawsha ku saabsan tolidda weelka iyo xoolayntiisa oo dhan haweenka baa qabta, ragguna haanta gadawgeeda bay galoolaan, siiba dhoonhoraadda.

## 2) Argeeg

2) Dhirta soomaalida miyigu weelka ka toshaan waxaa kale oo ka mid ah geedka argeegga, oo ka baxa iliilaha hawd iyo doox-ooyinka Nugaaleed, aalaaba. Argeeggu waa geed gaaban sida nagaarka, aalaabana dhirta kale buu isku maraa oo ku taagsadaa. Caleentissu way engegtaa jiilaalkii, xididdadiisuse way qoyan yihiin weligood.

Xididdadaas baa qori fiiqan lagu qodaa oo diirka sare lagaga dhilaa, lafta hoosana la iska xooraa. Halkii xidid labo ama saddex liilan buu noqdaa. Xididku waa isku rooraa. Halkii xidid kuwa kale baa ka baxa, mararka qaarkood. Xididku waa isku dhegaa kolka uu engego, ka dibna waa la isku xiraa, sida cawska rarada laga sooho. Ka dib xashin ama kolay baa lagu ridaa, si ayan cayayaanku u cunin. Muddo dheer buu oolli karaa argeeggu, sida qabada, haddii si fiican loo xannaaneeyo oo laga ilaaliyo cayayaanka cunaya, sida camarka, baranbarada kd.






# HAAN

1 2 3 4 5 6 7

FURE: 1 - Sariir (garab)
2 - Lug
3 - Kelli
4 - gar
5 - qoor
6 - agaan
7 - fur

Marka weelka laga tolayo biyo baa lagu dharbiyaa sida qabada, kolkaas buu kala baxaa xididku. Inta la isleeyahay maalintaas baa la toli karaa baa la qooyaa. Mudac baa ka dibna lagu feeraa oo gucun iyo iran loo kala saaraa. Argeeggu ka dhib yar qabada marka la tolayo iyo xoolayntaba, suu waa diir jilicsane. Haanta laga tolo argeegga sida qabada baa loo xooleeyaa, kana biyo qabow, kana qiima roon, kana subag badan marka ciirta lagu lulo. Haanta argeegga saddex bilood ku dhowaad baa la toli karaa, maxaa yeelay argeeggu aad dhulka uguma badna, sida qabada, geedka ugu weynna 2 ama 3 liilan baa laga heli karaa. Haanta laga tolay qabadu way dillaacdaa, tan argeegguse way diisantaa oo si sahlan baa loo toosin karaa, qabadase waa in la tolo dillaaca. Gobollada Woqooyi Buro baa looga yaqaan haanta argeegga, Jubbada Sarena Barbaar baa looga yaqaan. Weelka laga tolo qabada oo dhan waa laga tolaa argeegga. Hawsha argeegga oo dhan haweenka reer miyiga baa qabta.

**Xarar tolmo ah bay dumarku u yeelaan weelka ay ka tolaan qabada, argeegga, kd., waxaana xararkaas ka mid ah:**

1. **gucun-maroor, oo ah diillin maroorsan ee lagu dhigo haanta ama ubbada**
2 **jeedal, oo ah xarar u samaysan hab jeedal (nadi) ee lagu dhigo haanta**
3. **feero-waxaro (afmeer), oo ah shan rig-rigo ee ku wareegsan haanta afkeeda.**


3) **saabka haanta**

Guud ahaan saabku wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

1) saabka haanta waxaa laga dhigaa laamaha geedka:
mareerka
dhebiga
miracasta
xididka sarmaanta kd.



# HAAN SAABSAN




# HAAN SAABAAN

1 2 3 4 5 6 7

FURE: 1 - Saab (gembis)
2 - Liglig
3 - Gadow
4 - Jiljil
5 - Higaag
6 - Lingax
7 - Fur

Dhirtaas laamaheedu wey soo loodsamaan ee ma jabaan, weyna fudud yihiin. Sidaas darteed baa looga dhigaa saabka haamaha.

Ragga iyo dumarku way wada sameeyaan saabka haamaha.

2) jiljilku waa seedda geela, meesha ulaha saabku ka kulmaan baa lagu xiraa, mana go'do seeddaasi muddo dheer.
3 gadowgu waa ul galoolan oo dhumuc weyn, sida afka wadaanta, waana haanta xooggeeda.
4 siddo ama liglig waa saabka geeskiisa kore, dhuraadka baa la suraa.
5 lingax (ningax) waa mayrax aagaanka ku xajisa haanta.
6 sariir (unug) ama gorob waa haanta salkeeda.

**4) Suugaanta Haanta**

Haantu waa weelka ugu weyn weelasha aqal-soomaaliga yaal, uguna mug weyn. Sidaas awgeed, murti qoto dheer leh baa ka ag aduudantay weelkaas waxtarka u leh nolosha reer miyiga. Isticmaalka haanta waxaa ugu weyn in biyo lagu shubto, in ciirta lagu lulo,durbaankana waa lagu tuntaa iyada oo maran. Marka haweenka miyigu ciirta lulayaan hees-hawleed macne weyn leh bay ugu heesaan, ayna ka mid yihiin kuwa hoos ku qoran:

1) haanta subagga badan kolka afadu ammaanayso:
waa gorof aan xooleeyey
oon geed ka soo qaaday
gacalkayna ima siinnin
- juguc, juguc, juguc....!

2) kolka afadu subagyari ku dhaliilayso haanta:
haanyahay ku garan waayey geeljire ku qooraansey
geed dheer lagaa soo lul
ma fayoobidoo ogiye
ma furkaa lagaa dhuugay ?
haantu iyadoo doora
oo doora
oo doora
oo doobi laga buuxsho
bay doora doob aragtay
oo doora doorowdey
- juguc, juguc, juguc...!



3) haan maran baa idin afka lagaga dhuujiyaa sida reemaha,ka dib gacmaha baa lagu garaacaa marka durbaan (haan) cayaartoyadu ka tumanayaan gobollada Soomaaliya qaarkood.

Heesaha durbaanka waxaa ka mid ah:

haanyahay daryaan
oo diririglee
dooxada ka yeer
duul maqan u yeer;

maroodi hobsheeyayey hee
wiyilo hugugglayey hee
haldhaa baalka hufayey hee
haleelo mirootayey hee
horweyn hogob daaqayey hee
hillaac bilig leeyahayey hee
hareeri magoolayey hee
— baw, baw, baw....

## 5) Xab (qarbad)

Soomaalida degta dhulka buuraleyda ah, sida Calmadow iyo Calmiskood ee ku yaal gobolka Bari, waxay aalaaba biyaha ku kaydsadaan xabab. Xabku waa harag laga bixiyo, cukad-ahaan, ariga waaweyn, sida orgiga sogobka ah iyo riyaha goolaha ah ee la qasho, si uu u qaado biyo badan.

Farsamada ku saabsan samaynta xababku waxay, sida badan, gaar u tahay dumarka; soo-dhaamintiisase ragga baa u badan oo waa hawl u baahan muruq.

xoolaynta xabka

Sidii aannu kol hore u niri, soomaalidu wey aslaan ama xooleeyaan weelka, gurgurka, gogosha aqalka ay samaystaan, si looga ilaaliyo basaasta iyo dayaca.

Weelka lagu shubto biyaha ee la aslo waxaa ka mid ah xababka, haamaha, dararka (naar), wadaamaha, kd. Farsamada asalku waxay u qaybsan tahay labo nooc oo ku saabsan degaanka bulshada ku dhaqanta weelkaas, sida:

b) asal buureed (xab)
t) asal deexeed (haan - eeg Qayb Labo 1)

Kolka hore hilibka baa laga wada hoolaa haragga, ka dibna waxaa loo rogaa dhinaca leh dhogorta oo hoos mara. Markaas ka dib waxaa haragga lagu dhex ridaa saxan ballaaran oo asal la yiraahdo Kurunkurxo ku jiro.

Geedka la yiraahdo Jagcarta ee maydigu ka baxo (eeg Qayb Kow 2) jiliftiisa qoyan bay haweenka soomaaliyeed mindi kaga soo xaquuqaan ama xoqaan; ka dibna waa la waraa jilifta ilaa ay ka engegto. Jilifta jagcarta midabkeedu waa guduud dhiig-xigeen ah, dhacaankeeduna waa kulayl dila cayayaanka ku dhasha hargaha. Sidaas darteed baa asalka geedkaas looga dhigaa asal-horaadka xabka.

Kolka jiliftu engegto waxaa laga soocaa mirifta ama qoryaha ku dhex jira, ka dib saxankii haraggu ku jirey baa lagu dul shubaa, biyana lagu qooyaa. Qoshkaas muddo labo caanomaal ah baa loo kaadiyaa, si uu haraggu u kurun-kurxoobo ama u asal qaato. Ka dib saddex manjood, salawida ama dabada iyo surka baa laga dhuujiyaa qarbadka, iyada oo lagu guntayo xarig-xaskuleed adag. Markaas baa la afuufaa ilaa neefi ka buuxsanto xabka, majinta hartayna la xiraa. Ul baa lagu tun-tumaa, si maqaarku u gig tirmo ama u kala fido. Muddo toddobaad ku dhow baa neefta loo daayaa, si loo hubiyo in haraggu duleelo iyo in kale, oo yahay biyo-kamadhibcaan.



Markaas ka dib baa la dhaqan geliyaa xabka oo biyo lagu shubtaa. Biyaha ugu horreeya ee lagu shubo xabka cusub way gudutaan, asalka awgiis, oo licig baa la yiraahdaa. Dadku ma cabbaan licigta ee ariga iyo duunyada kale baa lagu waraabiyaa. Kolka licigta laga shubo aslid labaad iyo mid saddexaad oo isla kurunkurxo ah baa la geliyaa qarbadka, si uu habsami ugu dhaqan galo, cayayaankuna ugu dhalan korkiisa. Xabka cusub waxaa la yiraahdaa Xurke, ama harag cusub.

Markii afar jeer lagu soo dhaansado qarbadka waxaa lagu rogaa asalka afraad ee laga sameeyo geedka Jirme. Laamaha qoyan ee geedkaas jilfahooda baa la soo fujiyaa oo la tumaa; ka dibna sidii jagcarta oo kale loogu aslaa xabka. Jirmaha salkiisu waa guduudxigeen, wuxuuna adkeeyaa jurmiga ama qirada haragga, qurmidda iyo suyucana waa ka dhawraa.

Afartaas asal ka dib qarbadku waa dhaqan galaa; oo xoolayntiisii idlaatay, surka oo biyaha lagaga shubo iyo majin laga shubto mooyee dulleellada kale oo idil waa la cubaa oo lama furo. Muddo sano ah ka dib dhogorta dhinaca sare baa ka hoolantaa xabka, Qundul baana la yiraahdaa. Biyaha qundulku kama qabow iyo macaan yara kuwa ku jira qaboojiyaha magaalooyinka; koronto iyo gaas shidana xabku uma baahna.

Caanahana waa lagu shubtaa xababka yar-yar ee ninku ku qaadan karo tunka, kolka uu socdaalo, sibraar baana la yiraahdaa.

Sida xababku u kala culus yihiin baa loogu raraa ratiga si ay isu dheeli tiraan, sida:

xab dheeg
seeto
gub
guro

Kuwaas midkoodba waa labo, ratiga yamaarshaha ahna waxaa lagu raraa siddeedaas qarbad. Nin aan isku hubin muruq ma hinjin karo xabka geeddi-manjoolaha ah ee ugu weyn qarbad-yada lagaga dhaqmo gobollada Bari ee Soomaaliya.

### 6) Suugaanta xabka

Sugaan guubaabo iyo xifaalo ku saabsan baa ka unkan tahay farsamada iyo ku dhaqanka xababka. Haweeneyda aan xabkeedu fiicnayn baalinnimadeeda bay raggu ku dhaliilaan; tixaha jiiftada ah ee loo tiriyeyna waxaa ka mid ah:

1) naag xumey xariggaa
gaabanaa guntanaa
dheraa dhud yaraa
waw kacdaye
waw kastaye
say u keentay
ugu gee...

Hees-hawleeddaasi waxay ka digeysaa xargaha lagu raro xababka oo go'a; xabka oo manjihiisu ayan si fiican u xirnayn oo quba biyaha. Arrimahaas waxaa lagu dhaliilayaa afadii samaysay qarbadka. Intii biya ah ee xabku u celiyo, ha yaraadeen hase badnaadeene, uunbaa loo geeyaa afada areebada ah. Haddii kalax muggiis u soo haro iyada baa isyeeshay guul-darradaas, bay yirahdaan raggu. Siddeeddii xab oo wada miigsan ama buuxa baa afada gaarida ahna loo soo dhaamiyaa; iyada iyo tii kalaxa keli ah ama juluqdu u soo hartay way kala fog yihiin farshaxan iyo qaymi naagnimo.

Hees hawleedda raggu ku raro xababka waxaa ka mid ah:

2) buuxi oo miiji
oo salawida (dabada xabka) adkee...



## QAYB SADDEX: DHIRTA QUUDKA LEH

### 1) Timir

Geedka timirta waa la beeraa sida mooska, magaciisa asiiliga ahna Nakhiil baa laga yiraahdaa gobollada Bari. Eraygaasi af carbeedka buu ka soo jeedey, macnehiisuna waa tallaal, oo jirriddiisa bay soomaalidii hore inta ka keensadaan dalalka Carbeed bay dalkooda ku tallaali jireen, siiba xeebaha bari ee Soomaaliya. Dhulka bannaan iyo calaha oogadooda oo durdurrada iyo hawada qabow leh baa lagu beeraa timirta. Tallaalka ama kurtunka timirta god yar oo biyaha u qabta baa lagu fariisiyaa, saala xoolaad oo burbursan ama nabaad baa lagu shubaa kurtunka, ka dibna waa la waraabiyaa. Biyaha dhanada ah buu ku bixi og yahay geedku, 3 sano buuna ku curtaa, biyaha macaanse 5 sano buu ku mireeyaa.

Saddex ilaa afar fac (fac waa 70 sano, inta uu qof jiri karo) baa la gurtaa timirta, maydiguna waa la mid. Sana kastaba laamuhu way ka go'aan geedka jirriddiisa, ama wuu baar goostaa. Meesha laantu ka go'day Karaab baa la yiraahdaa, oo girgir bay noqotaa. Girgirku hal sano buu xisaabsan yahay, sidaasaana lagu gartaa geedka filkiisa.

Odayaalka waaya-aragga u ah beeridda timirtu waxay yiraahdaan nakhiilku waa lab iyo dheddig, labadubana xay cad bay bixiyaan inta ayan mirayn. Ubaxa geedka labi budo buu isu rogaa bil ka dib, dheddiguna miro yaryar oo cagaaran ama gorob la yiraahdo buu dhalaa. Budada geedka lab inta la guro baa lagu dhoobaa xayga geedka dheddig, si ay labada ubax "isu ursadaan", oo si fiican ugu mireeyo geedka dheddig. Haddii aan xayga la isursiin miruhu si wacan uma baxaan oo way shaashoobaan.

Nakhiilka 3 bilood xay baa saaran, 3 kalena waa gumuc ama mira ceeriin ee cagaaran, 3 kalana waa busur ama bisayl sabakh ama huruud u eg, ka dibna way dhugcaan miruhu oo waa bisayl ebyan. Laanta miruhu ka raaracaan far baa la yiraahdaa, farahoo idilna khayl baa laysku yiraahdaa. Nakhiilka ugu yar 1 khayl baa ka baxa, kan ugu weynna 20 khayl.

Nakhiilka waa la kala dhaxlaa, oo facba fac buu uga tagaa. Beerta ugu weyn ee 1 malyuun oo geed ku taal Geesaley baa la yiraahdaa, dhanadayna ku baxdaa. Waa la wadaagaa geeseleyda, qofba qaar buu ku leeyahay dhirta, mid 10 leh, mid 100 leh kd. Qof kasta wuu badsan karaa dhirtiisa, hawlkarnimadiisa bayna ku xiran tahay.

Beeraha biyaha macaan ku baxa way badan yihiin waxaana ka mid ah kuwa magacooda la yiraahdo:

Xayslaho
Xoogaad
xeela'
daralehe
ruunyoh
saynweyn
saynyar
coommayawen
coomayayar
ceelmoqor
qorolehe
yabuudaan, kd.

Marka miruhu bislaadaan maalindhaaf baa loo guraa inta ayan geedka ka soo dhicin, hadba intii bislaata, haddii kale dhulka bay ku dhacaan oo qofkii doona baa gurta. Ka dib meel aqalka dushiisa ah baa lagu dirciyaa, ama engejiyaa. Ka dibna jiraab ama kolay caw laga falkiyey baa lagu cabbeeyaa inta la cusbeeyo, oo la kaydsadaa, ama la iib geystaa.

Nakhiilka weyn 20 khayl baa ka bixi karta, jiraabkiina 10 khayl baa ku qiyaasan muggiisa. Jiraabku 4 faraasiladoo (80 rodol) buu qaadi karaa qiyaasta, rodolkiina 50 senti buu joogaa. Timirluhu sanadii wuxuu heli karaa:

$$\frac{100 \times 20 \times 80 \times 50}{10 \times 100} = \text{Shs. } 8{,}000$$

Kharajka shaqaalaha, kirada gaadiidka, canshuurta, kd. baa ka go'aya waxa soo gala timirlaha, sida xijilaha. Qofka tobanka geed iyo in ka yar lihi khaylka u baxa ma beec geeyo ee xaaskiisa baa ugu bar baxa jiilaalkii. Gobollada bari si wacan bay uga baxdaa timirtu, badideedase dalalka Carabta baa looga keenaa Soomaaliya, siiba Ciraaq.

Fiiro gaar

Toban sano ka hor buu jiray sicirkaasi; haatanse kor buu u kacay.



## 2. Suugaanta Timirta

Waxtar weyn bay timirtu u leedahay dhaqaalaha dalka, oo waa hanti joogto ah tacab badanna u baahan. Sidaas darteed, murti weyn baa ka aduudantay geedka timirta oo hawsheedu u badan tahay xagaagii. Qofkii aan u hawshooni waa ka qadaa oo dhirtii oo wada muruxsan oo mirihii laga gurtay buu ku baraarugaa; sidaas darteed bay ku baxday hees-hawleeddani:

xagaa seexdaa
ma xorooboo
xariir ma huwado. . .

Sida sheekadu werisay, nin reer miyi ah baa beri u yimid nin reer beled ah, oo shaqa weydiistay. Kolkaas buu ku yiri awrta ii ilaali, inta rodol timir ah mushqaayad u siiyey. Galabtii buu qawsaarkii soo hoyiyay awrtii, isaga oo timirtii saaka la siiyey weli faraqa ku sita, oo moodey in aan timirta la cunin haddii aan la karin. Ka dib rodol kale oo timir ah buu awrlihii ugu daray qawsaarkii, isaga oo aan ogeyn in uu rodolkii saaka la siiyey uu weli sito. Qawsaarkii inta qoslay bu yeen:

boowow, timirtii horaba dab loo waa!

Waxay kale oo soomaalidu ku maahmaahdaa:

Timir laf baa ku jirta!

Maahmaahdaas macnaheedu wax hubso weeye, ama waa arrin sida aad moodeysay noqon weyday. Timirta laf baa ku jirta, sida la ogyahay, waxaana loo baahan yahay in uusan macaankeedu ku hodin oo inta aad lafta ku liqdo ayan cunaha ku joogsan, ama uur-ku-jirta wax kaa yeelin.

### 3) Daray

Geedka daraygu waa weyn yahay sida mukayga, wuxuuna ka baxaa meelaha biyamareenka ama dixda ah. Geedkaasi waa ban-joog oo cidi ma beerto. Jiilaal kasta oo dhaca ma engegto caleenta daraygu. Xilli kastana wuu mireeyaa geedkaasi oo sanada oo dhan waa laga gurtaa. Sidaas awgeed baa magaca Daray loogu bixiyay geedka, macnehuna waa wax aan idlaanayn oo weligood cusub

kolkii la doonana la gurto. Tusaale ahaan, hilibku waa marax iyo dari. Geedka banjoogga ah haddii mirihiisa mudda badan la gurto yeelaal ama hayin buu noqdaa.

Xay ma bixiyo daraygu marka uu miraynayo, sida canjeelka, ee miruhu waxay ka dhashaan laan yar oo geedka jirriddiisa ka soo fuurta. Miruhu gucji ama gacan bay ugu dhoobmaan laamaha, sida mooska. Miraha yaryar oo ceeriin corgog baa la yiraahdaa, saala geel bayna le'eg yihiin, midabkooduna waa cagaar. Saddex bilood bay corgoggu ku bislaadaan oo guduud buu noqdaa midabkoodu, sida yaanyada, dhuubaan baana la yiraahdaa. Miraha bardaha iyo canjeelkana dhuubaan baa iyagana la yiraahdaa.

Daraygu wuxuu ka mid yahay dhirta quudka leh oo dadku kaga bar baxo abaaraha xun. Corgogga biyo baa lagu kariyaa, laba goor baana biyaha hore laga daadiyaa, si ay miruhu aad ugu qasaalmaan. Kolka ay biyaha saddexaad ka dhammaadaan baa dheriga gudihiisa fandhaal ama xurbin lagula walaaqaa, sida gashiishada. Caano iyo subag baa lagu iidaamaa. Dhuubanta geedka oogadiisa ku dhugucda sideeda baa lagu cunaa, iyada oo iniinaheeda iyo xuubkeeda wadata;

Darayga iyo Berduhu waa isku cayn, mirahoodana isku si baa loo wada cunaa. Haddii la doono in la kaydsado dhuubaanta qorraxda baa lagu waraa, inta la cusbeeyo, marka ay qallashana xashin baa lagu guraa.

### 4) Suugaanta Darayga

Dhuubaanta geedka oo oogadiisa ku dhugucda sideeda baa lagu cunaa, iyada oo iniinaheeda iyo xuubkeeda wadata. Sidaas awgeed bay ku baxday maahmaahda oranaysa:

1) Miro barde duuduub ayaa loo liqaa!

Marka summaaraystada ama arahsatadu gurayaan miraha darayga, hees-hawleed bay qaadaan, waxaana ka mid ah:

2) Halow halamlow
hal miroodlow
halaan qaadaba
hal kalaa yaal. . .!

Heestani waxay muujinaysaa tirabadnida miraha darayga iyo in ay hawl badan tahay guriddoodu.



### 5) Canjeel

Geed ahaan canjeelka baa dhirta ugu weyn, uguna miro badan, uguna har qabow. Waadiyaalka ama aroorrada gobolka Boosaasood buu ka baxaa, sida badan, cidina ma beerto ee waa iska baxaa. Sannadii mar buu mireeyaa, roobka diraacgood ama ximirka buu ku baxaa. Xay udgoon ee cadcad oo u eg ubaxa riiraha ama geedxamarka subagga lagu shiilo buu canjeelku bixiyaa kolka hore. Shinnida baa gurta xaygaas oo malab ka samaysa. Labo bilood ka dib miro yaryar oo qumuc la yiraahdo baa ka soo dhex baxa xayga. Qumucdu way gahayrtaa labo bilood ka dib oo qardhe baa la yiraahdaa. Laf yar oo qurxub la yiraahdo baa qardhaha ku hoos jirta. Qurxubta ariga baa la siiyaa jiilaalkii oo ku darara. Bisha shanaad bay shimbiruhu ku yeeraan, iyana way u xilli tiriyaan geedka, sida dadka oo kale. Markaas hal-gelis baa la yiraahdaa oo halhal baa bislaada. Halkii bislaadaaba wuu soo go'aa oo ku soo dhacaa geedka hoostiisa. Carruurta iyo maqasha baa gurta, haldhacsi baana la yiraahdaa. Dadka waaweynise geedka bay koraan oo halhalka bisil soo gurtaan, qardhatuujis baana la yiraahdaa. Halgeliska waa la soo guraa, haan maran baa lagu shubaa oo lagu huuriyaa, si ay dhaqso ugu bislaadaan miruhu. Haddii fiidkii la huuriyo aroortii way bislaadaan. Inta aan habeenkaas bislaan derin baa lagu fidiyaa, oo xerada xooluhu ka soofaan baa lagu waraa, si ay uumiga hiisha ugu bislaadaan. Miraha sidaas loo bisleeyo digadhig baa la yiraahdaa. Marka ay miruhu ku bislaadaan geedka dushiisa dhuguc ama hootadhac baa la yiraahdaa. Kolkaas baa la koraa oo la soo ruxaa geedka oo miraha laga soo daadiyaa, oo laga haqab beelaa. Inta aan miraha la cunin waa la kala soocaa. Magoolka ama mirasanka baa ugu fiican. Halka khaashay ama buka iyo kan shimbirtu docda ka rudday waa la iska tuuraa.



Sawir: Canjeel (Mukay)



Miraha canjeelka lama kala laha, ee qofkii u soo horreeya baa gurta. Dhuguca qaarkiis waa la engejiyaa dhuubaan baana la yiraahdaa. Xashin baa lagu kaydiyaa inta cusbo lagu daro, si jiilalka loogu bar baxo. Dhulka aan la degganeyn dhuubaanta ka baxda dadka baa soo gurta, amaah baana la yiraahdaa; soo guridda amaahda araah baa la yiraahdaa. Halhalka geedka ku hara halbidhood baa la yiraahdaa, soo guriddiisana lagu bar baxaa, sidaas buu geedkaasina waxtar weyn ugu leeyahay nolosha dadka, siiba reer miyiga.

**6) Suugaanta Canjeelka**

Dadka miratahanka ahi waxay ku maahmaahdaan:

miraba nin guraa
magoolkooda leh. . .

Maahmaahdaas ujeeddadeedu waa ninka miraha gurta baa kala yaqaan halsankooda.

**7) Garas**

Garasku wuxuu ka mid yahay geedmadowda ama geedabaareedka aan qallalin, abaar kasta oo dhacda, sida higlada, jiica kd. Meel kasta wuu ka baxaa garasku, sannadiina mar buu mireeyaa, sida canjeelka. Roobka diraacgoodka ama ximirka buu ku baxaa isna, cidina uma xilli tiriso. Xay yaryar oo cad buu bixiyaa garasku, ka dibna wuu mireeyaa oo 6 bilood bay ku gahayraan. Miraha garasku saddex gal bay leeyihiin marka ay bislaadaan: galka sare waa cawlan yahay, kan labaad waa guduud oo murux baa la yiraahdaa, kan saddexaad waa xuub cad sida xaashida oo "beerka" buu ku gadfan yahay. Beerku waa labo qalbac oo madmadow ee isugu dheggan sida faruuryaha sare ee geela. Sidaas baa loo yiraahdaa garasku waa "faruuran" yahay. Dadku way sumaarsadaan ama u arah tagaan garaska kolka ay abaari dhacdo. Markii la engejiyo miraha beerka iyo galkiisa baa soo hara, ka dib waa la cusbeeyaa oo xashin lagu shubaa. Ugu yaraan 10 gu' baa la kaydsan karaa garaska.

Inta la doonayo in la kariyo waa la qooyaa marka hore, 6 saacadood muddo ku dhow bay qoyntaasi qaadataa. Ka dibna waa la kariyaa. Sagaal saacadood buu karistiisu qaataa. Saddex saacba biyihii hore waa laga daadiyaa, oo kuwo cusub lagu shubaa. Biyaha lagu shubayo saddexda saacadood oo ugu dambeeya dambas baa

lagu la shubaa, si uu ku noqdo macaan dhanaanxigeen ah. Inta uu karsamayo xabbad lagama bixiyo, si uusan u guntoobin ama u adkaan sidii dhagax. Marka uu bislaado dambaskii baa laga mayraa oo sidiisa loo cunaa, ama caano iyo subag baa lagu iidaantaa.

**8) Suugaanta Garaska**

Garasku murtida soomaalida buu galay, ay ka mid tahay maahmaahdan:

1) raagsiinyo badanaa
ma garas baa!

iyo halxiraalaha ah:

2) sogob saddex harag leh garo!

**9) Yicib**

Geedka yicibtu banjoog (yeelaal) weeye oo lama beero, dhulka carrasanka ah ee bannaan buuna ka baxaa, siiba gobolka Hiiraan, Mudug, Galguduud, kd. Geedyicibeedku waa labo cayn:

b) muqlay oo qansaxa dherer le'eg
t) suuley oo muqlayga ka yar

Roob-ku-bexeen weeye geedku, kolka horena ubax cawlan oo carfoon buu saaraa, ka dibna mira yaryar oo gobor ama ciji la yiraahdo baa soo baxa. Toddobaad ubaxa baa baxa, toddobaad cijiga, toddobaadna qardax ama gahayr bay noqdaan miruhu. Ka dibna jalaw ama bisayl bay noqdaan oo waa la guraa. Miraha muqlaygu kuwa quullaha bay u eg yihiin, waana labo qalbac oo beer cadi ku dhex jiro. Suuleygu ka mira waaweyn muqlayga, xubinta hore ee suul-gacmeedka buuna le'eg yahay qardaxiisu. Sanada ay yicibtu aaranto caadood baa la yiraahdaa, sanada ay abaaraysatana barbar baa la yiraahdaa. Kolkii jalawga la soo guro waa la qolof jebiyaa burrin baana la yiraahdaa.

Qardaxa baa lagu bilaabaa cunidda miraha yicibta, oo iligku-diir baa la yiraahdaa.

Qardaxa la kaydinayo waa la dubaa ama la rarmiyaa, ka dibna inta la cusbeeyo baa xashin lagu shubaa, oo abaaraha xun lagaga bar baxaa. Marka ay reer miyigu caleenshaah waayaan, caleenta geedyicibeedka bay shaah ka dhigtaan, sida gogobada, ama geedxamarka.



**10) Suugaanta Yicibta**

Sida dhirta kale oo waxtarka weyn u leh reer miyiga, murti qoto dheer leh baa ka ag aduudantay yicibta iyo hawsheeda. Miraha yicibtu wax ka macaan badan, sidaas darteed dadka, duunyada iyo dugaagga qaarkiis wax ka jecel, geedka dushiisana laguma soo gaaro mar haddii ay dhugcaan. Sidaas bay ku baxday maahmaahda:

fadhi iyo fuud yicib la isku waa!

**11) Mareer**

Carrada sare iyo godbahaba wuu ka baxaa mareerku, dhererkiisu waa meel-dhexaad, mar-marse aad buu u koraa geedkaasi. Xilliga kaliisha ah ee roobku soo dhow yahay buu mireeyaa mareerku. Waa cagaar kolka ay curdanka yihiin miruhu, kolka ay dhugcaanse waa guduud dhiig oo kale ah; kuwa xamurka bay le'eg yihiin. Miid malab oo kale u macaan oo iniin laf ah ku dul dheehan bay leeyihiin miraha mareerku oo laga muud-muudsadaa; nacfi weynse uma laha dadka oo miiddooda baa aad u yar. Shimbiraha baa aad u jecel miidda mareerka.

Laamaha mareerku toos bay u baxaan oo way dhuudhuuban yihiin; dhigaha aqal-soomaaliga, lool iyo qabaxda, bay dumarka reer-miyigu ka samaystaan laamahaas, raggooduna ulaha ay ku xarragoodaan bay ka goostaan.

Miraha mareerku aad bay u qurux badan yihiin kolka ay dhugcaan oo ku hilan yihiin geedka dushiisa. Shimbiraha baa meel dheer ka arka oo soo raaca guduudkooda oo isku xoomiya geedka oogadiisa, iyaga oo ku jiriibanaya ama ku ilaaqtamaya codadkooda kala duwan. Waxaad Hawd ku aragtaa kaymo mareer ah oo wada mireeyay kaliishii, oo dallad dhiig u eg wada hagoogan.

Aad bay u toolmoon tahay aragtida hoobaanta mareerku kolka laga arko sheedda; in kastaba, waa loo wada col oo cayayaanka oo idil, sida dixriga, baa gala miraha oo quuta miiddooda macaan.

**12) Suugaanta Mareerka**

Suugaan yaab leh baa laga tiriyey hoobaanta mareerka, quruxdeedana waxaa la garab dhigay oo lagu jimeeyay quruxda dumarka, sida tixaha hoos ku qoran:

1) dirxilaha mareer waa cas yahay
daawashada guude
dawliilka baas baad ku hodi
duul aan ku aqoone. . .

2) mareerow mira casow
xaggaan kuu soo maraa. . .



**QAYB AFAR: DHIRTA DAAWADA LEH (Geedakaris)**

Waagii hore inta aan la baran daawada cusub ee haatan la yaqaan dadkii hore geedaha caleentooda iyo xididdadooda bay cudurka ku daaweyn jireen. Kumanyaal gu' ka dib bay aqoonta qofku gaartay heer uu ku garto waxtarka iyo anfacada aan dabayaaqa lahayn, ee ay naftiisa u leedahay abuurta ku wareegsan agagaarkiisa, oo daawada dhirtu (geedakaris) ka mid tahay.

Reer-miyiga soomaaliyeed waxay weli ku dhaqmaan daawada dhirta ay ka dhaxleen facyaalkoodii hore. Dhirtaas dhawr ka mid ah baannu jecellahay in aannu meeshan kaga faalloono, maxaa wacay lama wada koobi karo oo aad bay u tiro badan yihiin. Cudurrada ay dhirtaas ku daaweeyaanna way tiro badan yihiin iyaguna, laf jabtay kabiddeed iyo cirrid xanuunaya daawadiisa inta u dhexaysa dhirtooda bay ka helaan reer-miyigu. Geedakariyeyaaku caloolxanuunka bay fiiro gaar ah siiyaan, oo yiraahdaan cudurrada oogada oo idil buu sabab u yahay.

Daawada dhiryaqaannada adduunku ku sanceeyaan cudurrada caadiga ah waxtarkeeda dhaqtarro aqoon dheer leh baa xaqiijiyay, shakina kuma jiro; dalal badan baana lagaga dhaqmaa daawada dadweynaha, oo taageeraysa tan cusub. Daawadhireedda geedakariyeyaalka Soomaaliyeed wax ku sanceeyaan, sida ay yiraahdaan, annana kulama asaraartami karno, waxaa ka mid ah:

b) dacarfaal
t) caallirjoojis
j) kabidda lafaha
x) baanasho
kh) qaniinyo halaq

Sidii aannu kol hore u niri, daawada ay dhiryaqaannada miyigu wax ku sanceeyaan oo dhan waxay ka sameeyaan geedaha Soomaaliyeed caleentooda, xididdadooda, jiliftooda, mayraxdooda, mirahooda, xabagtooda, kd. Inkastaba, dhawr geed ee ku saabsan b) iyo t) oo keli ah baannu meeshan kaga faalloonaynaa.

b) Dacarfaal

Dhiryaqaannada reer miyigu buro weyn bay siiyaan sifaynta caloosha, daawadhireedda ay ku sanceeyaanna waxtarkeeda wuu garan karaa qof kasta oo aqoon guud u leh daawooyinka, ama garaad qaba, ee u fiirsada sancadooda. Daawada dacarfaalka waxaa laga sameeyaa dhir caan ku ah Soomaaliya oo ay ka mid yihiin:

1. carmo
2. dacar
3. galool
4. jaleelo
5. kulan (shillin)

**1. Carmo**

Waa geed mira yaryar oo la cuni karo leh, oo kuwa bunka u eg kolka ay geedka ku yaalliin. Inta ayan bislaan miruhu oo cagaaran yihiin baa biyo lagu kariyaa, ka dib waa la miiraa oo la qaboojiyaa inta aan dacarfaal ahaan loo cabbin. Caleenta carmada waa la qallajiyaa, oo la tumaa. Ka dib dabqaad dhuxulo dab ahi ku jiraan baa lagu shubaa caleentii la budeeyay, sida luubaanta. Qofka hargabka iyo xummadda qaba baa hoosta loo geliyaa dabqaadkii oo caleentii carmada qaaceedii ka dalluumayo, sida fooxa. Buste baa la huwiyaa qofka, si uumiga udgoon ee carmadu u diiriyo oogada qofka.

**2. Dacartu**

Xaskusha bay u egtahay aragga guud, dhulka bannaan iyo balliyada bay ka baxdaa, aalaaba. Caleema ballaaran oo buruq iyo dhacaan casi ka buuxo buu leeyahay geedkaasi. Laf iyo mayrax toona ma leh caleemuhu, geedka jirriddiisayna ka baxaan, sida cawbaarka. Marka ay gahayrto laantu hoos bay u godantaa, way engegtaa ka dibna geedka ka go'daa. Ubax keli ah oo 2 mitir dherer le'eg baa kor uga dhex baxa caleemaha dacarta, sidii hooto waran, guudkana shucub isna cas ku leh. Ubaxu weligiis kor buu u taagan yahay ee ma goto, sida caleemaha. Erayga "dacar" macnahiisu waa caloolxanuun, qaras, kharaar, dhacaanka laamaha dacartuna aad buu u kharaar yahay. Sidaas awgeed baa, malaha, magacaas loogu bixiyey geedka. Caleemaha engegan ee dacarta dadka duumada qaba baa lagu uumiyaa, sida carmada. Laamaha dacarta ee qalalan waa la tumaa oo budo laga dhigaa. Markaas baa biyo lagu daraa oo inta la miiro, sida carmada, la cabsiiyaa qofka la qarasbixinayo. Dacarta sun dugaagga lagu laayana waa laga sameeyaa. Dhacaanka dacarta oo aan biyo lagu barxin baa loo mariyaa lihibka lagu dagayo dugaagga.





Sawir: Qoraha iyo Dacar

### 3. Galool

Waa geed dheer oo ka baxa dhulka sare iyo godbahaba. Mullaaxda laamaha aan weli gahayrin baa la ruugsiiyaa qofka la dacar faalayo. Dhacaanka mullaaxda oo macaan dhanaan-xigeen ah waa la liqaa, caana geel ama ari ama fuud baana la cabbaa goorta ay calooshu socoto ka dib, sida ay yiraahdaan dhiryaqaannadu. Cunna qallafsan lama siiyo qofka intii beri ama laba ah, si ayan socodka caloosha u joojin.

### 4. Jaleelo ama Salamako

Waa geed gaaban oo ka baxa dhulka bannaan, sida balliyada Nugaaleed. Xididdadiisa yaryar baa la rujiyaa, ama caleenta, qorraxda baa lagu qallajiyaa oo la tumaa. Ka dib caano lo'aad ama ari baa lagu kariyaa oo la qaboojiyaa, si xididdada gufarkoodu weelka salkiisa ugu ururo oo dureeruhu u miirmo. Qofka la qarasbixinayo baa markaas la cabsiiyaa.

### 5. Kulan

Waa geed daawooyin badan laga sameeyo, oo Yaaqa ama Canjeelka u eg, qodxihiisa mooyee. Caleenta kulanku weligeed ma engegto oo waa abaarku-noole geedku. Mullaaxda cad ee laamaha baa biyo lagu kariyaa, sida jaleelada. Ka dibna waa la miiraa oo la cabbaa. Mira sida kuwa bunka u eg kase waaweyn baa ka baxa geedka kulanka. Xagaagii buu mireeyaa kulanku, casaan iyo madow isku dhafan weeye midabka miruhu, kolka ay bislaadaanse dhuguc guduudan bay guudka sare uga ekaadaan. Qolof adag oo beer hoose oo saliid lihi ku dhex jiro, sida lawska, bay miruhu gudaha ku leeyihiin. Miraha bisil biyo baa lagu kariyaa, sonkor ama malab baa lagu daraa, si loo macaaneeyo dhadhanka dureeraha shurbadda u eg ee ka soo baxa waxyaalahaas la isku daray. Marka ay qabowdo baa hadba in yar laga cabbaa, si loo socodsiiyo caloosha. Beerka iyo kelyahana dheef bay siisaa shurbadda kulanku, sida ay sheegeen geedakariyayaalku.

t) Caallirjoojis

### 1. Murcanyo

Waa geed dherer iyo toos uga baxa dhulka sare. Miro yaryar oo guduudan kolka ay bislaadaan oo la cuno baa ka baxa murcanyada. Xididdo casaan-xigeen ah oo yaryar buu leeyahay geedku, iyagaana la rujiyaa oo la tumaa, oo dhacaankooda bay ku rafaaqmaan, sida burka. Nabarka caallirka ah ama markaas cusub ayaa lagu dhejiyaa rafaaqa murcanyada, oo loo daayaa qorraxdu ha qallajisee. Malaxda iyo dhacaanka ayuu rafaaqu ka soo nuugaa nabarka, waana engejiyaa oo sifeeyaa meesha bukta iyo agagaarkeeda.

### 2. Gogobo (Gagabood)

Waa geed xididdadiisa lagu dhayo nabarrada dadka oogadiisa iyo xoolaha cadhada qaba, sida murcanyadaana looga shaqeeyaa marka nabarka lagu dhayayo. Caleemaha gogobada ee cagaaran shaaha bay ku karsadaan reer miyigu, sida Yicibta. Qof aan u baran kharaarka-dhanaanka shaaha gogobada uma adkaysan karo kolka hore, caraf iyo udgoon maskaxda u roon buuse leeyahay, oo dheellitira kharaarkiisa. Waxaa laga yaabaa inay gogobadu, haddii la hagaajiyo, beddesho ama la tartanto caleenta shaaha "Brook Bond", "Simba Chai", kd. ee haatan adduunka badidiis indhaha ku kala qaado subax kasta. In Soomaaliya soo saaridda shaaha kula beretanto Sri Lanka, oo ah dalkii shaaha, ma suurowdo yaa oran kara, haddii gogobadu hir gasho!

### 3. Xardhagax

Waa dhagax la tumo. Marka wiilasha reer miyiga la gudo ayaa budadaas lagaga dhayaa meesha mindiishu sartay, si uusan dhaawucu u hurgumin ama u kacdoon. Dhaymaha hore toddobaad buu saarraadaa nabarka, ka dibna waa laga fujiyaa oo dhaymo cusub la saaraa. Saddex dhaymo ayaa loo baahan yahay, si dhaawucu ku biskoodo. Saalada Bakaylaha iyo geed la yiraahdo "Shanbogsi" iyagana waa lagu dhayaa dhaawaca gudniinka inamada.

### 4. Murre (malmal)

Waa xabag sabakh midabkeedu yahay, oo ka baxda geed gaaban oo calaha gobollada bari iyo galbeed ee Soomaaliya ka baxa, sida Jadarka. Xabagta waa la tumaa kolka hore oo biyo lagu qasaa. Dureere adag buu noqdaa isku dhafkaasi, meesha mindiishu ka sartay gabdhaha reer miyiga ee la guday ayaa in yar lagu dhibciyaa, si uusan u caallirin nabarku. Malmalka waxaa kale oo lagu bukhuuriyaa (eeg t) 1) wiilasha iyo gabdhaha la gudo, carruurta yaryar kugtooda ama dhalada jilicsanna waa lagu malaasaa malmalka, si ay u adkaato.

## 5. Kiriiri

Waa geed yar 1 ilaa 2 mitir dherer le'eg, dhulka bannaan buuna ka baxaa. Miro yaryar oo kulkulucsan buu leeyahay, lamase cuno. Marka ay bislaadaan dhuguc guduudan bay noqdaan, dhulkayna ku dhacaan inta geedka ka go'aan. Iyaga oo ceeriin ama bisil baa biyo lagu kariyaa miraha, ka dib waa la qaboojiyaa, iyaga oo ah dureere shaah u eg. Qofka cirridku buko ama nabarro kaga yaalliin afka gudihiisa bay geedakariyeyaalka miyigu ugu luqluqaan dureer-ahaas. Waa la kabbadaa oo lagu luqluqdaa, dhabxanagga, cirridka iyo afka gudihiisa baa carrabka oo dhacaankaas wata la marma-riyaa, bushimaha oo xiran, ka dibna waa la iska tufaa. Dhawr goor baa la kabbadaa oo sidii oo kale la yeelaa. Inta aan la seexan ka hor iyo marka la soo tooso aroortii baa lagu luqluqdaa kiriiriga, dhawr beri baana la wadaa luqluqashadaas.

## 6. Caday

Waa geed ku badan dalka Soomaaliya, xilli kastana qoyan oo abaar-ku-noole ah. Caleema ballaaran buu leeyahay, dherer iyo hagaas labadabana waa u baxaa. Xididdo dhaadheer buu dhulka ku sii deystaa oo nacfiga hoos ka siiya. Xididdadaasaa la rujiyaa oo laabis in dherer le'eg loo jarjaraa. Qodxo ma leh geedka cadaygu oo sahal baa gacmaha loogu jari karaa. Dhinac baa diirka laga fujiyaa oo la ruugaa, si uu u jilco oo uusan cirridka wax u yeelin marka lagu rumayanayo. Laamaha cadayga ee curdanka ahna sidaas oo kale baa loogu rumaydaa. Caraf ama hah yare kulul, sida Gumarta, ee udgoon buu afka ku reebaa rumayga xididka cadaygu, oo afka ka raba huurada iyo caallirka cirridka. Rumay caday ee dhudhun dhe-rer le'eg bil kugu filan, 5 ama 10 senti buuna ka jooga suuqa Xamar, miyigase in aad laanta laacdo oo soo jabsato ama xididka ruqsato oo keli ah baad u baahan tahay. Cadaygu cirridka iyo ilkaha jirrid-dooda ma qodo, sida burushka laga sameeyay xargaha ama saynta fardaha, ee reer Yurub ku isticmaalaan. Ilkaha caanaha ka cad ee hablaha reer miyiga iidheh ka weyn uma aannu samayn karno cadayga.

## 7) Culay (cugay)

Reer-miyiga Soomaaliyeed way culaan weelka ay ku shubtaan caanaha, si uusan weelkaasi u cabdhin ama qurmin. Dhirta geed-kulaylka ah oo jilifta ama dhuxushooda udgoon lagu yaqaan baa lagu culaa weelka, tolmo ama qoraal mid kasta ha ahaadee. Dhir-taas waxaa ka mid ah kuwa hoos ku qoran:



b) Dhirta culayga

1. bilcil (jilif)
2. jirme (dhuxul)
3. jiic (dhuxul)
4. sarmaan (dhuxul)
5. shillin (kulan — eeg qayb b) 5) — dhuxul
6. mirafur dhuxul
7. meygaag
8. higlo
9. ayaaho

Marka reerku deggan yahay dal-cawseed aan lahayn dhirta culayga, weelka caws baa lagu deebiyaa ama lagu culaa. Cawska deebta waxaa ka mid ah kuwa hoos ku qoran:

t) Caws-deebeed

1. toon
2. jillab
3. dureeme
4. dooyo
5. gubungub
6. garrow
7. sifaar

Weelka la culo ama la deebiyo waxaa ka mid ah:

1. doobi (doobte, gaawe, dhakal)
2. dhiil
3. haan (lagu kaydio caanaha)
4. haruub

Culidda iyo deebinta weelku waa hawl dumar, doobiga lagu liso geelase ragga baa deebiya. Toddobaadkiiba in mar la culo weelka baa loo baahan yahay, si caanuhu u carfoonaadaan kolka la dha-mayo, ama la dhitaysanayo. Haddii weelka la culo dharaar kasta caanuhu ma garooraan. Haweeneyda aan culin weelkeeda raggu ma dhamo caanaheeda oo basari bay ku sheegaan.

Culidda weelku waa hawl ballaaran oo u baahan waaya-aragnimo iyo farshaxan. Horta waxaa la soo jaraa laamaha qallalan ee dhirta culayga, waana la yar-yareeyaa si ay weelka gudihiisa u galaan. Ka dib waa la shidaa, oo dhawr qori oo holcaya baa lagu

dhex ridaa haanta ama dhiisha oo lagu aaburaa oo lagu ruxaa, si uusan u guban weelku. Ruxidda ka dib culaygu weelka buu ku dhex damaa, ka dibna waa laga soo saaraa oo la shidaa mar labaad, oo haddana lagu ridaa weelka. Toddoba jeer baa sidaas loogu celceliyaa ilaa weelku ka dhidido, taas oo tusaale u ah in weelku u culmay si fiican. Culidda ka dib weelka waa la car tiraa, oo jajabka culayga baa laga sifeeyaa. Maro catir (car tir) ah ama cidaad mayrax ah baa lagu tir-tiraa weelka, si gudihiisu u hufnaado.

Weelka aan haruubka lahayn, sida doobiga, dhakalka waa la hogeeyaa, ama waa la qori-dableeyaa. God le'eg afka doobiga baa laga faagaa dhulka oo lagu shidaa culaygii, ka dib doobiga baa lagu af gembiyaa, si uu u culmo. Saddex goor baa sidaas loogu celceliyaa, labo ilaa saddex beri baa sidaas loo culaa doobiga.

Haanta waa ka culliin badan yahay doobigu, qaac keli ah buuna ku culmaa ee olol looma oggola. Haddii culaygu yar yahay, waa la qori-dableeyaa doobiga, oo qori dab ah baa lagu war-wareejiyaa gudihiisa, ilaa uu ka carfoonaado. Culidda doobigu waa hawl rageed, maxaa wacay geela bay ku maalaan.

Reer-magaaluhu saabuun dibedda laga keenay bay ku xashaan weelka, reer-miyiguse dhirta dhulkooda bay ka faa'iideystaan, ee wax dal shisheeye laga keenay ma sugaan.

**8) Suugaanta Culayga**

Gaarinnimada haweeneyda Soomaaliyeed, siiba kuwa miyiga, waxaa lagu gartaa hufnaanta weelkeeda ay cunnada ku siiso seygeeda, ama martida:

1. Casarkii haddaan dhiil la culay
caano kugu siiyey
cishihii haddaan sarar cuddoon
kugu cashaysiiyey
asii aadan caloosha igu hayn
Caliyo yeelkaaha . . .!

2. Meygaagga Mudug
oo miro la dhacay
midabkiisa ley. . .!

3. Ayaaho udgoon
aroorradu (bannaannadu) ma laha. . .



**AFEEF**

Waa yaab weyn haddii la eego sida abuurtu u kaalmayso qofka Soomaaliyeed. Sida aynu u ogaannay, dhirtaas waxtarka weyn lihi dalka Soomaaliyeed bay ka buuxdaa, iyagaana iska baxa ee cidi kuma tacabto. Inkastaba, abuurtu deeqsi ma aha oo mar kasta afka uguma gurto wuxuu doono qofku; aalaabana waxba kuma siiso, haddii aadan ka marooqsan khayraadkeeda. Sidaas awgeed, waa lama huraan in dhirta aannu kor ku tilmaannay iyo boqollaal kale waxtarkooda si cilmi ah loo baaro, oo daawadooda lagula diriro cudurka. Geedakarisyadii Soomaaliyeed ee noolaa facyaalkii tegey dhaxal qiime weyn bay inoo dhafeen, markii ay sheegeen dhirteenna waxtarkooda. In takhtarradeennu si cilmi ah u jitaabiyaan daawada dhirteenna, in ay cabbiraan, miisaamaan oo kaydiyaan, iyo in ay adduunweynaha ugu shafeecaan baa loo baahan yahay. Hawshaas ma ay awoodin facii hore ee dhiryaqaanka ahaa, say farsamo ku filan uma haysane.

Haddaba, waxaa naga digniin ah in aannaan annagu jitaabin dhirta aannu kor ku muujinnay waxtarkeeda; sidaas darteed, qofna kula talin mayno isticmaalkooda, mar haddii aan la aqoon daawadhireedda cabbirkeeda iyo miisaankeeda. In dhirtaasi jirto baannu sheegnay oo meeshan kaga sheekaynay.

## QAYB SHAN: AQAL SOOMAALI

**B) 1. Gogosha Cawda**

Geedka cawda cidi ma beerto ee isaga baa iska baxa, wuxuuna ka baxaa waadiyaalka coonkooda ama biyamareenka. Geedkeedu waa abaarku-nool, sida ay biyo u hesho bayna u kala kori ogtahay cawdu. Marka ay laantu bashi ama sabuul noqoto oo hal mitir dherer le'ekaato baa la goostaa. Mindi dheer baa lagu jaraa cawda, oo riishka ama galka laga bixiyaa, ka dibna qorraxda baa lagu waraa, si ay u qallasho. Labadii bashiba isdhaaf baa la isugu xiraa, markaas siib baa la isku yiraahdaa. Tobankii siib xirin baa la isku yiraahdaa, tobankii xirmoodna boqol baa la yiraahdaa, loona gadaa. Boqolku mar 10/- buu joogaa, marna ka badan. Cawda lama kala laha, e dadka meesha deggan baa goosta.

Coosh waa magaca guud ee cawda, wuxuuna u kala baxaa:

b) gogol oo ah caw falagsan
t) baar oo ah mid aan falagsanayn

Sannadii "baar baan goostay" buu yiraahdaa ninka cawda gurta. Ratiga yamaarshaha ahi wuxuu qaadaa saddex kun oo boqol-boqol u xiran oo beledka baa loo safriyaa. Ka dibna rag suuqley ah buu ka gadaa ninka soo goostay cawda, iyana dibedda bay doonyo ugu dhoofiyaan, ama Soomaaliya gobolladeeda bay ka sii gadaan.

Inta geedku soo baxayo waa in saddex bilood loo kaadiyo, ugu yaraan labo goor buu sannadii ninkii doonaa goosan karaa cawda. Markiiba ka soo qaad 3,000 oo baar ah, ee min boqol xirmood ah oo boqolkiiba 10/- joogo.

$$= \frac{3{,}000 \times 100 \times 2 \times 10/-}{100}$$

= Sh. So. 60,000/ buu sannadii heli karaa ninka cawda goostay. Miraha ka baxa geedka cawda cawaag baa la yiraahdaa oo waa la cunaa.

Dhaqaalaha dalka door weyn bay cawdu ka cayaartaa oo waxaa laga falkiyaa:

1. gogol
2. weelka baa laga tolaa
3. caddiir baa laga soohaa

Gogosha cawdu caynan badan oo dermooyin ah bay u qayb-santaa, oo ay ka mid yihiin:

**2. dermooyin**

1. jeexgogol oo ah nooca ugu sarraysa, ee martida sharafka leh loo goglo,
2. dhexaley oo ah derinta ay gaaridu seygeeda u gogosho,
3. iskushub oo ah derinta aqalka gudihiisa lagu gadfo oo lagu qurxiyo
4. mayraqyaley oo iyadana lagu qurxiyo aqalka
5. xiriir oo lagu dedo aqalka gudihiisa
6. salli oo lagu fariisto oo aan weyneyn
7. dhamac oo awrta lagu heeryeeyo
8. darfooley oo ah tan guriga duleedkiisa lagu dedo
9. sujaayad oo jeexgogosha laga hoos mariyo
10. fayliki oo ah derin hawleed oo wada cad
11. haleelo oo ah dermo wada cad ee aan lahayn midab; qof keli ah baa ku seexan kara. Iranka haleeladu waa mid-mid keli ah.
12. lammaano, waa mid irankeedu yahay labo-labo.
13. garabweyn oo ah mid weyn oo wada cad, aqalka baa lagu dedaa.

Gobollada bari ee Soomaaliya baa laga falkiyaa oo lagaga dhaqmaa dermooyinkaas badidood. Falkinta iyo xardhidda der-mooyinku waa farsamo u gaar ah haweenka Soomaaliyeed.

**3. Weelka cawda**

Inta weel qabada laga tolo cawdana waa laga toli karaa, sida:

1. haan
2. sati (santuukh)
3. abxad
4. safad (dhiil)
5. qufad (dhiil)
6. masaf (gal xeero)
7. masaraf (gundhigga xeerada diyaafadda)
8. sifaal (xeerada shaqaalaha xijiga gura)
9. maxmalad (kafadda xijiga lagu guro)
10. dambiil (marooqsin alaabada lagu guro)
11. jafaan (dambiil xijiga lagu guro)
12. babis baa laga sameeyaa
13. xaaqin (mafiiq) baa laga sameeyaa

**4. Caddiir**

Waa xargaha lagu xiro udbaha aqallada iyo sariiraha caddiirka ah. Ninka cawda gurta xargihiisu waa wada caw, waxaana ka mid ah:

1. bayd, ratiga dhuuntiisa baa lagu xiraa
2. xarig hileed oo cawda lagu xiro
3. dabar
4. dabagelis
5. dhafarka haya ratiga heeryadiisa
6. cayn, kd.

(eeg Qayb shan J) 4.)

### 5. Aslidda cawda

Marka hore waa la dharbiyaa cawda, biyaha badda baana u fiican. Ka dib waa la dhilaa oo caaradda baa la isugu guntaa labo daliigoodba, si ayan u kala daadan. Markaas baa cawda lagu guraa haan gorof ah oo god dheer lagu ridaa, afkana loo furaa. Falkinta iyo aslidda cawda waa sanco ay ku xeel dheer yihiin dumarka Soomaaliyeed. Waxyaalaha asalka cawdu ka koobmo waxaa ka mid ah:

dhawr kalax oo biyo badeed ama cusbo ah
afar xantoobo oo saalo geel ah
budo shebi, kd.

baa lagu shubaa haantii cawdu ku jirtey. Marka ay toddobaad ku huursanaato baa cawda laga soo bixiyaa haanta oo qorraxda lagu waraa, iyada oo huruud u eg. Ka dib marka ay engegto baa lagu celiyaa haantii oo dacar caleemaheed la tumay lagu qasaa, oo toddobaad kale lagu huuriyaa. Markaas ka dib inta la soo saaro cawda baa biyo macaan lagu mayraa. Markaas bay haweenku aqal la galaan cawda oo u diidaan in raggu (labood oo dhan) arkaan marka ay agloolayaan ama xayraynayaan. Dumarku sidaas waxay u yeelayaan waa in ayan "ban marin" ama uga xumaan cawdu, oo caado ay ka dhaxleen hooyooyinkoodii farshaxanka ahaan jiray weeyaan. Waxay kale oo garwaaqsadaan maahmaahdii haweenka Soomaaliyeed ee oranaysay:

indha rag
in xun
waa laga dhawraa!

Halhayskaas ujeeddadiisu waa in ayan haweenku ragga tusin asalka inta uusan dhaqan gelin oo urayo indhahana u roonayn. Dermada quruxda badan ee ay afadaadu kuu goglayso dhibta ay ka soo martay falkinteedii ina rag ma wada oga.

Markii la agloolo cawda waxaa lagu ridaa "buul" ama haan maran oo iyana xabaalan, oo toddoba beri loo kaadiyaa haddana. Sababtu waa in ay aglooshu si fiican u gasho cawda dhumucdeeda oo ay u raagto derinta laga falkin doono. Cawda midabkeedu markaas waa huruudxigeen. Marka ay buulka ka soo bixiyaan bay dumarku mar labaad isku xiraan aqalka oo kala doortaan midabka ay u rabaan dermooyinka ay ka falkin doonaan cawdaas. Marka ay mariyaan ranjiga ay rabeen bay dumarku cawda ku celiyaan haantii



dacarta, saalada iyo waxa kale ku jireen, si ay u huurto oo u daayaan toddobaad kale. Goortaas ka dib meel hoos ah baa lagu waraa cawda iyada oo dhaqangal ah.

Ranjiyada lagu aslo cawda dibedda baa laga keenaa qaarkood, waxaana ka mid ah:

1. Shebi (buluug)
2. fuwo (guduud)

Beledka Cadan iyo dalal kale oo ka tirsan Aasiya baa laga keeni jirey ranjiyadaas waagii hore. Shebigu midab buluug ah buu noqdaa fuwana guduud weeye.

Dhirta Soomaaliyeed ee asalka cawda laga sameeyo waxaa ka mid ah:

1. dacar (madow)
2. saalo geel (huruud)
3. carmo
4. cusbo

6. Xararka dermooyinka (barbaro)

Dermooyinka midabkoodu wuxuu guud ahaan u kala baxaa labo cayn:

b) caddaan oo ah kuwa aan midabka lahayn, waxaana ka mid ah dermada la yiraahdo ilshanaad.
t) casaan oo ah kuwa midabka leh oo idil ayna ka mid tahay dermada la yiraahdo dhexaley.

Sharaxa ama xararka dermooyinku wuu fara badan yahay, waxaana ka mid ah:

1. darfo
2. gundiid
3. gacnadheere
4. kuulimo
5. kobo (baro-baro)
6. kaabi
7. laasfarjiin
8. qamarcas
9. mayracyo
10. ilyar

11. halyarad
12. saddexjab (qaab karaawil), oo ka kooban saddex midab: madow, casaan iyo guduud
13. rig
14. badeecad

Midabyadaas kuwooda ugu qurxoon waxaa ka mid ah laasfarjiin oo ah midabyo isku jira. Kuulimadu waa dhexyaallo guduudan oo loo dhexaysiiyo caddaanka iyo madowga, si derinta iskushubka quruxdeedu u soo baxdo. Gundiidku wuxuu isugu jiraa caddaan, madow iyo buluug-xigeen; waxaana lagu xardhaa dermada dhexaleyda ah ee afada gaarida ahi u gogosho seygeeda. Kobuhu way noqon karaan midab kasta. Halyarad waa diilliin kala dhex marta kobaha ama bara-baraha kale; madow ama guduud bay noqon kartaa diillintaasi.

## 7. Suugaanta Dermooyinka.

Haweenka Soomaalidu way isugu faanaan farshaxannimada iyo qaymigooda, ragguna way ugu xishaan marka ay guurdoon yihiin, oo qaymiga bay ku eexaystaan haweeneyda. Gabar aan gogosha falkin aqoon ama weelka toli aqooni ceeb weyn bay ahayd berigii hore, ragguna guur kama deyi jirin. Sidaas awged, hooyo kasta maamulka reerka bay ku ababin jirtey gabadheeda, siiba falagta iyo tolidda.

Raggu dermooyinka ma falkiyaan, waxaase jiri jirey nin la oran jiray Cali-xambaarsey oo falkinta dermooyinka farshaxan ku ahaa.

Beri buu u yimid gabar dermo casaan ah falkinaysa, markaas buu Cali damcay in uu iranka u toosiyo gabadha, kolkii uu arkay in irankii ka gedmedey ama ka qalloocday, buraanbur buu ku yiri:

1) hoogto halyaradkii
kaa hallow

rigta sow badeecadi
kama horreyn?. . .

In kastaba, gabadhii kajan iyo likaaco bay u qaadatay buraanburkii Cali, markaas bay iyana u jawaabtay, oo teen:

2) hannoo guudweynaanninoo
googarad hannoo xirraan
ee Xambaarsow



raggiyo naagaha
mid uun ku daran. . .!

Erayga halyarad, rig iyo badeecad waa magacyada sharaxa ama barabaraha dermooyinka (eeg Qayb shan B) 6).

3) falkooy dhegalooy dhaqaaqey
doonyihii dhoofee dhaqaayey. . .

In ay durba ebido dermada ay falkinayso bay rajayneysaa haweeneyda ku heestay tixahaas, oo doonyaha tegaya ee xilligoodu soo galay u iib geeyaan dermada.

## T) Rararada

Soomaalida reer-guuraaga ahi, siiba kuwa dega gobollada Mudug, Nugaal, Togdheer, Sanaag, kd., waxay dhistaan aqal fudud oo lagu raro awr kolka ay guuraan. Aqalkaasi wuxuu ka koobmaa qaybo ay ka mid yihiin gogol, gurgur, dhigo, udbo, xargo, kd.

### 1. Jarco iyo weylaalis

Jarcadu waa saanta geela, ama waa labo neef oo lo' ah hargahood oo la isku tolay, saanta oo laga hoolay hilibka baa lagu dhisaa ama togaa meel bannaan; dhinaca hilibka xiga baana la kor mariyaa, si qorraxdu u engejiso. Sida badan aqalka baa lagu dedaa jarcada, gogol-ahaanna waa loogu dhaqmaa.

Hargaha weylaha ama dibida yar-yarna waa la isku tolaa oo weylaalis baa la yiraahdaa. Waa gogol qurxoon weylaalistu, siiba kolka laga sameeyo hargo midab leh.

### 2. Raar (harar)

Raarka waxaa laga soohaa caws ka baxa gobollada kor lagu tusay, cawskaasna waxaa ka mid ah:

dareemaha
sifaarka
garrowga
qaroomaalaha
cawsqansaxa
qawdheeraha, kd.

Qaroomaaluhu wuxuu ka baxaa dhulka cadduunka ah, cawsqansaxuna wuxuu ku badan yahay kaymaha hawd, geedka qansaxa ah

buuna ka hoos baxaa, sidaas baana loogu bixiyey magaca. Qawdheeruhuna dooxooyinka iyo balliyada buu ka baxaa. Cawsaskaas oo idili waa banjoog oo cidi ma beerto. Qawdheeraha mindi baa lagu jaraa, kuwa kalese gacanta baa lagu rujiyaa marka dhererkoodu gaaro dhudhun. Ka dib qorraxda baa lagu waraa, goorta uu engegana ummaag ama xirmooyin baa la isugu xiraa, si uusan u kala daadan.

Dhawr iran oo caws ah baa la isfeer dhigaa, ka dibna xargo dhuudhuuban oo xaskul (xig) laga miiqay iyo cawskii baa la isku maleegaa ama soohaa. Dun kala midab ah oo laga keenay magaalooyinka ama xig aslan haddii lagu maro raarku wuxuu yeeshaa xarar ama barabaro qurxoon oo kala nooc ah, sida kuwa dermooyinka.

Waxaa jira magacyo u gaar ah farsamada ku saabsan samaynta raarka, waxaana ka mid ah:

1. masay (ummaag) oo ah cawska duuban ee geedigu isku xajiyo
2. ciyi oo ah daliig yar oo caws ah oo laga jeexo masayda, laguna nudo daliig kale oo masay ah oo la siman tii laga soo jeexay markii hore, si barabaro ama hogo loogu yeelo raarka.
3. Geeddi, oo ah xargaha isu xajiya masayda. Geeddigu mayrax ama xaskul buu ka samaysan yahay; dhawr midab baana loo aslaa, haddii la doono in la xardho raarka.

Xararka raarku waa barabaro ama hogo, sidii aannu kol hore u niri, waxaana ka mid ah:

1) dumar-hawir (qaab dheemman)
2) kub (hog) waa bar madow oo marriin ah
3) ganuun (qaab saddexgees)

Erayga hawir waa hawogelin, jeclaysi. Xorarka qurxoon ee rarada bay jeclaystaan dumarku oo iskaga daydaan ama isku fallisaan.

Marka la soohayo raarka dhawr daliigood oo caws ah (masay) oo far xubinteed le'eg baa la isku qabtaa oo geeddiga lagu maleegaa. Masayda waa laga dhawraa qallooca, si marriinka iyo xorarku ugu soo baxaan habsami.





Sawir: Raar.

Guud ahaan afar cayn weeye raradu:

1. dulsaar
2. dhinacsaar
3. raargogol
4. abjad (qobtol)

Labada hore aqalka baa lagu dedaa, sida magacoodu muujinayo; kan saddexaad waa la gogladaa, kan afraadna ratiga dhaanka baa lagu heeryeeyaa, oo waa mid duugoobay.

Rarada cusub ee la xannaanaynayo duubashi baa la yiraahdaa. Gabdhaha ugub duubashi ay ku aqal galaan bay samaystaan; ninka guur-doonka ah ee haasaawe ugu yimaada waxay u gogoshaa raarka ay ku fara yaraysatay gabadhu. Ceeb weyn bay ahaan jirtay gabar reer-miyi ah oo aan samayn aqoon rarada, waa in ay dhisan taqaan aqalkii ay geli lahayd berri. Raggu kama deyi jirin guur inanta aan lahayn qaymi, baalida ah.

### 3. Kebed

Kebeddu rarada aqal-soomaaliga bay ka mid tahay, wayna bilicsan tahay oo qurxisaa aqalka oo waa gogol xarrago. Kebed aqal iyo mid rati bay u kala baxaan kebduhu, midda hore baa weyn oo qurxoon, aqalka baana lagu dedaa ama lagu daahaa.

Hawl weyn weeye samaynta kebeddu, haween badan baana isku kaalmaysta. Kebedda waxaa laga soohaa mayraxda dhirta Soomaaliyeed. sida galoolka, qansaxa, quraca, qararrada, kd.

Mayraxda jillowda ah ee adag mudac baa lagu feeraa inta ay qoyan tahay, oo gan ama gas baa la yiraahdaa, ka dibna waa la aslaa, sida dhigaha. Mayraxda galoolku way iska guduudan tahay oo asal ma doonto kolka lagu samaynayo kebedda. Dhinaca leh ganka baa la xijiyaa dhulka, ama ratiga kolka la saarayo. Dhinaca kale caano baa la yiraahdaa. Mayraxda qaarkeeda kale waa la miiqaa oo la soohaa, ka dibna xargo yaryar oo geeddi la yiraahdo baa laga dhigaa (eeg Qayb T) 2—3). Ganka qaarkiis waa la duubaa, sida gucunka haanta, ama masayda raarka, barooq baana la yiraahdaa. Geeddiga iyo barooqda baa la isku maraa ama maleegaa oo kebeddu ka unkantaa. Mayraxda aan weli la soohin oo kebed laga dhigin waxaa la yiraahdaa maleeg.



Sida raarka baa xig ama dun laga keenay magaalooyinka lagu soohaa oo marriin looga dhigaa kebdaha qaarkood; waana lagu xardhaa ama barabaro baa loo yeelaa kebedda, sida raarka iyo dermada. Barooqdu waa masayda kebedda.

Barabaraha kebedda waxaa ka mid ah:

1) muuse oo ah 2 gane oo cad iyo 2 madow oo isxigsada.
2) raaf-dawaco oo ah 1 gane oo guduudan iyo 1 madow oo isxigsada.

Gane waa marriinka kebedda; ganuhu waa ka yar yahay barooqda; labaduba waa xargo soohan.

Jarcada, raarka iyo dermada kor iyo hareeraha baa lagaga dedaa aqalka; kebeddase daah ama ilaxir baa laga dhigaa; weylaalistana waa la gogladaa.

Raradaas oo idil dumarka reer-miyiga baa sameeya oo asla. Raggu jarcada buu dhisaa, udbahana way soo jaraan oo qoraan. Hawsha aqal-soomaaliga inteeda kale haweenka baa dusha u rita.

## 4. Suugaanta Kebedda

Kolka la soohayo kebdaha haweenku waxay qaadaan hees-hawleed murti qoto dheer leh, si ay isugu maaweeliyaan oo hawshu ugu fududaato. Waxaa heesahaas ka mid ah tixaha hoos ku qoran:

1) Marka haweeneyda soohaysa kebedda ku faanayso farshaxannimadeeda.

Awdal laga keenyey
ololog dheerey
il bari lagaga oriyey;

Geesi geel keeniyo
gaari xirataa
galool lagu daahyay
geedba geedka u dheer
laga garaacyey
galool muray
mullaaxdiisey;

2) Marka ay dhaliilayso haweeneyda baalida ama areebada ah:

naag aan daah xiraney
doca dalooley
wan loo diley
dugaag gurayey
naag aan daah xiraney
doca dalooley
tukuhu doonya daaneeyey
ninkeedii dabayl raacyey
daah aan jirin jiiddoy
jiiftoo huruddoy
jabtoy jalawgu waa roobey. . .!

3) Marka ay haweeneydu sheegayso hawlbadnida kebedda:

xaabsatoy kebedey
xaamuq badaney
maxaan kaga xil beelaayey?
kaga xil beeshaayey
xarigga beegiyo



masaydoo xaddillaatayey
dhabarka kama looddoy
luquntu jabaney
aday lumiyayey lulatoy

baranbaraa xagatey
buul xun bay
dhex tiillayey
bilista yaa ii xil qarin
xarigu waa go'aye. . .!

baranbaraa xagatey
boqol gu' bay dhul tiillayey
bilista yaa ii xil qarin
xariggu waa go'aye. . .!

## J) 1. Dhigo

Dhiguhu waa feeraha ama saabka isu haya aqalka oo idil, waxayna u kala baxaan qabax iyo lool. Aqalka meel-dhexaadka ah ee aan dhab u weyneyn waxaa lagu dhisi karaa 23 dhigood, 11 qabax iyo 12 lool ah. Qabaxa waxaa ka mid ah:

**b) Qabax**

1. Dhigdhexo oo dhererloogu mudo aqalka raartiisa, madaxeeda kalena udub-dhexaadka ku mudan irridda baa lagu xiraa; dhulkana ma gaaro faygeedaasi.


2. suuqyo oo dhinacyada ka xiga dhigdhexada; qiyaas dhudhun le'egna ka durugsan. Madaxa hore ee suuqyada waxaa lagu xiraa dhig horaadda madaxeeda kalena muska baa lagu mudaa, sida dhigdhexada.

1. Dhigfeereed oo midiba dhinac kaga mudan tahay aqalka, dhererna u saaran; labadooda afba dhulka bay ku qotomaan.

1. dhig-gembiso oo dadab u saaran aqalka, kuna xigta dhigdambeedda, dhinaca irriddana ka xigta.

1. Dhighoraad oo dadab u saaran irridda korkeeda, sida dhigambisada; labada afna ugu mudan yihiin dhulka.

## AQAL SOOMAALI (1)




**FURE**

1 - Udub-dhexaad (Udub-Xoog)
2-3 Udub-horaad (2)
4 - dhig-dhexo
5 - dhig-dambeed
6 - dhig-horaad
7 - dhig feereed
8 - Suug (2)
10 - lool



**t) Lool**

Lool waa kuwa dhumucda yar, gudub baana weligood loo saaraa aqalka, labada dhigfeereed baana lagu xiraa, ee madaxyadooda laguma mudo dhulka. Labo-labo baa la isugu xiraa loolka, qurxinta aqalka baana loogu tala glay.

Dhigaha waxaa laga sameeyaa laamaha iyo xididdada dhirta loodsami karta ee ay ka mid yihiin sarmaanta, dhafaruurta, galoolka, gobka, kd. Laamaha ama xididdada waa la qallajiyaa, ka dibna waa la isku nudaa oo lagu maraa ama duubaa jil, si la isugu xajiyo. Dhigaha intooda badan waxaa xarig-ahaan loogu maraa ama duubaa jil ama indhal laga jeexay harag riyaad; si la isugu xajiyo ulaha dhiguhu ka kooban yihiin. Muddo ka dib jilku waa qallalaa oo jabaa, haddii aan la xoolayn ama la aslin.

**2. Aslidda dhigaha**

Waxaa jira asal ka duwan midka cawda (eeg Qayb Shan B) 5.) oo u gaar ah dhigaha aqal-soomaaliga; kaas oo laga wanaajiyo dhirta ka baxda Soomaaliya, sida Bilcilka, Galoolka, Sarmaanta iyo dhir kale oo geed-kulayl ah. Asalka dhirtaasi dhaqso uma milmo.

Jilifta ama xididka geedka oo qoyan baa la tumaa, ka dibna biyo baa lagu karkariyaa. Xayr ama jifi baa lagu daraa asalka, si uusan u milmin markii roob ku da'o shayga aslan, cayayaankuna u cunin. Dhigaha, udbaha, xargaha, haamaha, qarbedyada, kd. waa la wada aslaa, si basaasta ama abaalada looga ilaaliyo. Alaabada aqal-soomaaliga, udbaha inta aan ahayn, haweenka baa sameeya oo asla, ama dayactira. Raggu udbaha bay soo jaraan oo habeeyaan.

**3. Suugaanta Asalka**

Haweeneyda baalida ah ee aan xoolayn aqalkeeda dumarka kale way dhaliilaan:

> heblaayo waa isma-oga
> waa aqalkeeda-ma-aslato.

**4. Udbo**

Udbuhu waa tiirarka kor u haya aqalka oo idil, la'aantoodna isma taagi karo dhismuhu. Dhirta geed-adayga ah, sida galoolka, quraca, jiica, kd. baa laga sameeyaa udbaha, si ay u waaraan.

Uguyaraan udbuhu waa lix, labo hore, labo dambe iyo labo reedo ama dhinacyo. Udubka ka taagan bartamaha aqalka, kuna qotoma dhigdhexaad, waxaa la yiraahdaa udub-dhexaad, ama udubxoog. Kaas baana ugu dhumuc iyo xoog roon udbaha oo idil.

**5. Suugaanta Udbaha**

Marka aqalka lagu raro ratiga afarta udub ee xarigga caynku isu hayo waxaa la yiraahdaa kabaallo; waxay kabaalladu isu hayaan heeryada iyo aqalka intiisa kale. Kaalinta udbuhu kaga jiraan dhismaha aqal-soomaaliga waxaa muujinaysa murtidaan:

Kabaallo is cuskaday  
waxaa caynka loogu giijiyaa  
xooggoodu ha isla jiro  
wax ka weynna ha qaadeen. . .


**6. Xargaha**

Aqal-soomaaliga lama rari karo, lamana dhisi karo xargaha la'aantood, maxaa wacay iyaga baa isu haya aqalka oo idil. Xargaha lagu xirxiro aqal-soomaaligu way tiro badan yihiin; kuwa lama huraanka ah waxaa ka mid:

1. cayn oo isu haya kabaallada iyo ratiga
2. bayd oo isu haysa dhafarka iyo ratiga qoortiisa, si aan rarku ugu dhicin gadaal.
3. dhafar oo isu haya heeryada oo idil
4. dabagelis oo isu haya heeryada iyo ratiga dabadiisa, si ayan heeryadu horay ugu dhicin.
5. yeel waa magac ka dhexeeya caynka, dhafarka, baydda.
6. hoosin oo lagu xiro jarcada korkeeda.

Xargahaas waxaa laga sameeyaa hargaha xoolaha, xaskusha, cawda, kd., waxaana loo aslaa sida dhigaha. (Qayb Shan J)2.)





AQAL SOOMAALI (2)

## QAYB LIX: B) MARASHIDII SOOMAALIDII HORE

### 1. Qayraan (dhuu)

Tilmaamaha lagu soo sooco qolo kasta ee u gaarka ah waxaa ka mid ah marashidooda iyo habka ay u qaataan. Waxaynu ognahay in hugii hore ee Soomaaliyeed dhab uga duwanaa midka da'da haatan joogta qaadato. Dharkii haweenka Soomaaliyeed qaadan jireen, tusaale-ahaan haddii aynu u soo qaadanno, wuxuu ahaa mid aad u xarrago badan, kuna jaan go'an baxaalliga haweeneyda.

Intii aan la helin dunta cudbiga ee laga sooho dharka, Soomaalidu waxay qaadan jireen, siiba gobollada Bari, Woqooyi, kd., hargaha xoolaha (idaha, weylaha, sagaarada, kd.) oo inta la megdeeyo oo la aslo la isku toli jirey. Qayraan ama dhuu baa la oran jirey hugaas; raggu labo go' buu ka tolan jiray, dumarkuna googarad iyo garbo-saar.

Dhuugii waxaa beddelay dhar ka soohan cudbi oo midab leh badidiis; una eg midka ay qaataan dumarka Aasiya, siiba reer Hindiya iyo berri-carab. Kuman-guurooyin tegey buu isa soo beddelayey dharkaasi, isaga oo la socda dhadhanka iyo dhaqanka bulshadu hadba joogtey. Waa waqti laga joogo ugu yaraan boqol sano dharkii haweeneyda Soomaaliyeed qaadan jirtay waxaa lagu xusuustaa shayada hoos ku qoran oo badidood sheeko uun laga hayo:

dumarka (googarad)

1. Curreji — macawis, shaadir, beledka Cureej oo Maskad ku yaal ba laga keeni jirey; gabdhaha Soomaaliyeedna waa loo bixiyaa magacaas.
2. Goroyaati — macawis laga keeni jiray beledka Goryo ee ku yaal Maskad.
3. Qorifali — 1. mid leh toddoba weji ama diillimood
   2. mid leh shan weji
4. booraji — marsiino gabdhood
5. badan — marsiino dumar la qabo
6. xijaar-xijaar — darfo cas bay lahayd, inteeda kale caddaan.



7. caqdad — Hindiya baa laga keeni jirey
8. malkhabad — Hindiya baa laga keeni jirey.

**Garbasaar (hagoog)**

1. Caqdad
2. Subeeciyad (cureeji)
3. Malkhabad
4. Suuri (masjed)

Ragguna waa qaadan jirey Subeeciyadda iyo Suuridda. Garbasaarradaasi barabaro ama midab kale bay lahaayeen.

**Gambo**

1. Shankhad, madow bay ahayd
2. Waddo, madow bay lahayd, dalool (shabag) ma lahayn. Indiya baa laga keeni jirey gambooyinkaasi.

**Kabo**

Bari-weyn (fay-dheer), Soomaalida baa toli jirey; jir (xarar) bay ku lahaayeen ciribta (barida); kolka haweeneydu ku soconayso way jiidmi jireen, diririgleyn jireen, raggii horena way u bogi jireen shanqartaas.

**Qalabka Qurxinta**

1. Jilbad, qoorta bay haweenku suran jireen, lacag bay ka samaysnayd jilbaddu; Indiya iyo berri-carab baa laga keeni jirey.
2. Diglimo, cududaha baa la gelin jirey, sida dugaagadaha, lacag buu ka samaysnaa.
3. Waqafyo, gacmaha cukurradooda baa la gelin jirey, qalin bay ka samaysnaayeen, shunuufyo (kubbado yaryar) baa ka laalaadi jirey, carro carbeed baa laga keeni jirey.
4. Kureedyo, dhegaha baa la suri jirey, dhegtiiba lixmeelood, saddex kor iyo saddex hoos, baa la suri jirey, shunuufyo baa ka lulan jirey, qalin baa laga tumi jirey kureedyada.
5. Kaatuuno (kawaatiin), tobanka farood ee gacmaha waa la wada gelin jirey, dahab ama qalin baa laga tumi jirey, lac (fay cas) bay wada lahaan jireen.

Qalabkaas haweenkii Soomaaliyeed ee jirey boqol sano ka hor baa qaadan jirey, kuwii awood u leh. Ugu yaraan saddex boqol rubood bay ku kici jirtey alaabadaasi, sida duqowdu werisay.

**Dharka Ragga**

1. Khayli-mandheeri, guduud iyo madow bay ahayd, Mukala iyo Shixir baa laga keeni jirey;
2. Khayli-cad, guduud iyo caddaan bay ahayd;
3. Kulumbaawi, cayn-cayn bay ahayd, Colombo, Sri Lanka, baa laga keeni jirey.
4. Suuri, Suur iyo Maskad baa laga keeni jirey.
5. Goroyaati, (eeg Ir. 2 Qaybta Googarad).
6. Declaani, Macawis
7. Cimaamad Yahuudiyad, Indiya baa laga keeni jirey, dukaamada Yuhuudda ee Cadmeedna waa laga keeni jirey; sidaas baa loogu bixiyey magacaas.

Ragga iyo dumarkuba way qaadan jireen subeeciyadda.

## T) KAYDINTA DHAQANKA QARANKA

Xamar waxaa ku yaal Guriga Kaydka Dhaqanka Soomaaliyeed, halkaas oo lagu kaydiyo alaabada dhaqanka Soomaaliyeed oo ah afar kun oo shay iyo meelahaas. Alaabadaas waxaa laga soo ururiyey gobollada Soomaaliyeed oo idil, waxayna u kala qaybsan tahay weel, gogol, dhar, hub dagaal, qalab shaqo, qoraallo tahaan, yaambada iyo kawaawadu waxay ka mid yihiin qalab-hawleedka beeraleydu sameeyaan; godinta iyo hangoolku waa qalab-hawleedka xoolaleydu farsameeyaan; marada Aliindidana waxaa sooha farsamo-dhaariga ku nool Xamar iyo magaalooyinka kale ee ku yaal deexda. Idaadda iyo hootada lagu jillaabto kalluunka waxaa farsameeyay badmaaxeenka Soomaaliyeed; hilqadaha iyo dugaagadaha dahabka ah ee carwadaas yaalna qalinshubaha Soomaaliyeed baa ku fara yaraystay.

In Soomaalidu lahaan jirtey farsamo iyo ilbaxnimo gaartey heer aad u sarreeya, kuman-guurooyin badanna soo jirey, waxaa ka marag kacaya alaabadaas haatan taal Guriga Kaydka Dhaqanka ee



Xamar, taas oo tusaale fiican ka bixinaysa dhinac kasta ee nolosha bulshada Soomaaliyeed. Waa mid lagu faani karo kaydkaasi, waa dhaxal joogto ah ee fac walba u gudbinayo midka ka dambeeya.

Dhawr goorood ee qorahani u daawasho tegey carwadaas wuxuu dareemay in dadweynuhu, siiba dhallinyarada ardada ah, ayan dhaaxa u daawasho tegin Guriga Kaydka Dhaqanka, si ay u kororsadaan aqoontooda guud ee ku saabsan dhaqanka dadkoodu kasbay intii uu soo jirey. Waynu jecelnahay oraahda ah "hidde iyo dhaqan bay leedahay Soomaalidu," in yar baase dhab u taqaan waxa ku hoos duugan oraahdaas lagu macaansado afka.

Waa in aynu ku mintidno ilaalinta, qaddarinta iyo sii kordhinta dhaxalkaas aabbe, si dadkeennu ayan u dhaxal wareegin berri ka maalin.

## QAYB TODDOBA: DHISIDDA DOONTA

### 1. Dhisidda Doonta

Haddii la eego xiriirkii ganacsiga iyo dhaqanka ee boqol-guurooyin ka dhexeeyey dalalka Carbeed iyo Soomaaliya, iyo gaar ahaan erayada Carbeed ee badmaaxeennada Soomaalidu ku adeegtaan, waxaa la moodaa in qarniyadii hore Soomaalidu ka dhaxleen Carabta farsamada ku saabsan dhismaha iyo maamulka doonyaha. In kastaba, haatan fuundiyo Soomaaliyeed baa dhisa doonyaha. Saanaca dhisa doonyaha Muuli baa la yiraahdaa, shaqaalihiisana Taabac baa la yiraahdaa. Muuligu 30/- ilaa 40/- buu mushqaayad u qaataa dharaartii, taabacana 15/- baa la siiyaa. Muddo saddex bilood ah baa lagu dhisi karaa Buudiga. Doontu waxay u baahan tahay xannaano iyo dayactir joogto ah, haddii kale suyuca badda baa kala daadiya xubnaheeda muddo yar. Bil kasta gudaheeda, 14ka ilaa 18ka, doonta waa la fariisin karaa badda, siiba waqtiga ay caariga tahay, si loo dayactiro; habsi ama nasasho baa la yiraahdaa fariisintaas doonta ee gaaban. Habsiga dambe wuxuu soo galaa 27ka ilaa 3da bisha ku xigta.

Alaabada loo baahan yahay marka la dhisayo doonta, siiba Buudka ee aan dhab u weyneyn, waxaa ka mid ah:

| | | |
|---|---|---|
| Alwaax 300 xabbo min 400: | | 120,000, |
| Shalmaan (feeraha doonta) 500 korjo min 20/ | | 10,000 |
| Dakhal | | 10,000 |
| Shukaan | | 5,000 |
| Qaariyadda dakhalku ku xiran yahay | | 4,000 |
| Qaariyadda cubeydaarka (xargo) oo dambe | | 3,000 |
| Qaariyadda suuradda hore | | 2,000 |
| Qaariyadda saddexaad | | 300 |
| Rawaajiic iyo cayaaryaalka | | 5,000 |
| Musbaarro 5 faraasilo min 200/ | | 10,000 |
| Xayr iyo nuurad la isku kariyo oo dibedda laga mariyo doonta | | |
| 10 teneg xayr | 50/ | |
| 5 joonyadood nuurad | 50/ | 100 |
| cudbi lagu qolfaafo (gufeeyo): 1000 rodol min 10/ | | 10,000 |
| siifad lagaga shubo gudaha — 2 birmiil min 400/ | | 800 |
| barroosinta iyo silsiladaha ku xiran | | 2,000 |
| cammaarka (xargaha barroosinka) | | 1,000 |
| shiraaca (alcood) | | 15,000 |
| shiraac yar | | 10,000 |
| taangiyada biyaha 4 min 400/ | | 1,600 |
| sixiimad | | 4,000 |
| maacuunka lagu dhaqmo, noocyo baan | | 5,000 |
| xareedaanka (jiko) | | 5,000 |
| suuliga | | 4,000 |
| Qiimaha doonta Buud | | Shs. 227.800. |

Iska dheh labo boqol iyo soddon kun (Shs. 230,000/) shillin in doonta Buudka ahi joogtey sanooyinkii kontonaad ee aad loogu dhaqmi jirey doonyaha shiraaca leh. Qiimahaasi kor buu u kacay, siiba markii matoor lagu beddelay shiraacii ee xawligii doontu kordhay.

Looxyada laga sameeyo doonta waxaa ugu fiican Miteeg oo laga keeno Hindiya iyo Dhamasta oo ka baxa Soomaaliya, siiba Tooxin.

Buudigu 1,500 kiintaal oo min 5/- ah bay qaaddaa; afar safar (3 berri-carab iyo 1 Sawaaxil) bayna ugu yaraan doontu samayn kartaa waqtiga badfuranka ah. Dakhliga soo gala sannadii ninka leh doonta Buud waxaa lagu qiyaasi karaa: 1,500 X 5/- X 4 = Shs. 30,000/- Dakhliga doonta waxaa laga jaraa cunnada badmaaxeenka, inta soo hartana waa la kala baraa oo bar badmaaxeenka baa leh, barka kalena ninka doonta leh baa qaata.

Haddii si fiican loo xannaaneeyo doontu way shaqayn kartaa 15 toban sano, dakhligeedana waxaa lagu qiyaasay:

15 X 30,000/- = Shs. 450,000/-. Sidaas awgeed, doontu waxay ku soo celinaysaa qiimihii lagu dhisay muddo 7.6 sano ah.

Marka laga gooyo cunnada iyo mushaharka baxridda doonlaha waxaa u soo haraya sannaddiiba, iska dheh Shs. 10,000/- oo saafi ah; ama Shs. 150,000/- muddada lagu qiyaasay doonta cumrigeeda ee ahayd 15 sano, ugu yaraan. Xisaabtaasi waxay, haddaba, tusaysaa rimixa weyn ee soo geli jirey doonyaleyda Soomaaliyeed waagii doonyuhu ahaayeen laf-dhabarka gaadiidka badda ee dalka.

Dhinaca kale, haatan la waa shiraacii qurxoonaa ee ka bidhaami jirey badaha Soomaaliyeed coonkooda; lamana maqlo magacyadii ilwaadda lahaa ee loo bixin jirey doonyaha, sida Yusureyn, Durji iwm. Matoor qaac iyo qaylo miiran ah baa saabiley ilwaaddaas oo idil; adduunyo raad beeshay dheh!:

## 2. Shaqaalaha Doonta

1. Naakhuude baxar
2. Naakhuude maal, oo doonta leh
3. Saranji, oo ah gacanyaraha naakhuuda baxarka
4. Karraaniga xisaabta
5. Daraag (shukuuni) oo ah 4 doonwade oo isku darajo ah, naakhuude baxarka ama saranjiga baa amra kolka doontu socoto.
6. Baxridda doonta oo ah 15 qof ama ka badan
7. Dakhalraac
8. Qawaas (badquus)
9. Qaarjoog (cunno-kariye)
10. Suqayar dirig (sixiimad-wade)
11. Suqayar biyo-keene
12. Kimiscun la korinayo oo badda la barayo

Hawsha naakhuude-baxarka waxaa ka mid ah in uu shixnad u helo doonta, daraagta buu tusaa majaraha ay ku wadaan doonta; masuuliyadda doontuna isaga bay saaran tahay. Inkastaba, haddii shil yimaado dadka buu ka mid yahay, taladiisana lama raaco markaas. Naakhuude-maalku xoolihiisa buu ilaashadaa, meel fiican baana la seexiyaa marka uu doonta la socdo; haddii uusan la socon doonta naakhuude lama yiraahdo. Saranjigu wuxuu ku qaybsan yahay hawsha doonta qaybinteeda, xannaanadeeda alaabadeeda iyo qaybinta raashinka baxrida. Wuxuu kale oo qaybiyaa suyuunta ama lacagta mushaqaayadda loo siiyo baxrida. Karraanigu wuxuu kala qoraa xoolaha doonta saaran sida loo kala leeyahay. Daraagta shaqadoodu waa in ay shixnadda ku raseeyaan doonta, iyo shukaanta haynteeda kolka doontu socoto. Baxridu biyaha bay ka dhuraan doonta marka ay socoto, habeenkiina daraagta bay la soo jeedaan oo la qabtaan saamiga. Dakhalraacu wuxuu soo xiraa xargaha ka soo go'a dakhalka, birrigana wuu ilaaliyaa inta fuulo dakhalka. Qawaasku wuxuu soo rayidaa ama adkeeyaa barroosinka, haddii uu dhulka qaban waayo; doontana wuu cufaa haddii ay dalooshanto. Qaarjooggu cunnada buu bisleeyaa oo qaybiyaa. Suqayarku bedenka buu ku wadaa baxridda, biyaha la cabbo buu



keenaa, hawlaha kale ee yaryarna wuu qabtaa. Kimis-cunku waa inammada saboolka ah ee lagu korinayo doonta korkeeda, baddana la barayo, si ay u noqdaan naakhuude hadhow.

## 3. Noocyada Doonyaha

Doonyaha waaweyn ee u dhoofa badweyn waa noocyo kala duwan, waxaana ka mid ah:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Buud oo qaadda | 3,000 Kiintal |
| 2. | Buun oo qaadda | 2,000 Kiintaal |
| 3. | Kooliyad qaadda | 1,500 Kiintaal |
| 4. | Sayruuq qaadda | 1,000 Kiintaal |
| 5. | Caabiri qaadda | 150 Kiintaal |

Marka doontu dhoofayso shixnadda baa lagu raraa horta, raashinka shaqaalaha baa lagu xijiyaa, ugu dambaystana cabirka ama dadka rakaabka ah ee kiro laga qaadayo iyo kuwa leh shixnadda baa fuula. Barroosinka ayaa baxridu fujiyaan, iyaga oo qaadaya heeshawleed hal-ku-dheggeedu yahay:

heelle yaa malooy
yaalamo salam
heelle salam
ka-baquu ku dhacaa. . .!

Markaas ka dib shiraacyada ama farmaan baa la saaraa, baxridduna waxay ku heesaan:

heelley yaa safar
macbuud salaam. . .!

## 4. Shiraacyada Doonyada

Shiraacyada doonyuhu waa saddex, mid kastaba doontu ha qaadatee:

1. Alcood, oo 36 qayd ah (qayd waa 3 yaardi), doonta Buudka ah baa qaadata.
2. Wasti (dhex-dhexaad) oo 20 qayd ah.
3. Fitini oo 16 qayd ah

Alcood waxaa doonta la saaraa marka dabayshu yar tahay, si ay ugu dheerayso. Wastiga waxaa la saaraa marka dabayshu meeldhexaad tahay, si loo gaabiyo xawliga doonta, dakhalkuna ku jabin.

Fitiniga waxaa la saaraa marka darbad xoog lihi jirto, xawli dheer looma baahna markaas.

Xargaha lagu xiro shiraaca oo kor loogu jiido Rawaajiic baa la yiraahdaa; markii shiraacu kor tagana waa la xiraa xargahaas, si uusan u debcin shiraacu. Shiraaca iyo dakhalku waa qaybaha socodsiiya doonyaha, dabayshana u qiyaasaa.

**5. Iidaad iyo Cayaaryo**

Afar xarig oo Iidaad la yiraahdo baa madaxa sare kaga xiran dakhalka. Labada iidaad ee hore Saadari baa la yiraahdaa; labada dambena Barandi. Hoos waxaa dakhalka kaga xiran xargo la yiraahdo Cayaaryo oo xajiya. Alaabada culus ee la saaro doonta waxaa kor loogu jiidaa cayaaryada, ama hoos loogu soo lalmiyaa kolka la dejinayo, sida wiishka.

**6. Qaybaha Doonta**

Doontu waxay ka kooban tahay qaybo kala duwan oo magacyo gaar ah leh, waxaana ka mid ah:

b) Gudaha

1. Qarracad oo ah meesha hore ee la dhigo qalabka doonta, sida xargaha, biraha, kd.
2. Suurad hore, oo ah qolka hore ee la dhigo shixnadda.
3. Qaariyad, oo ah meesha dakhalku ku rakiban yahay.
4. Suurad dambe oo ah qolka gadaale ee la saaro shixnadda.
5. Labo qaacadood oo ah dakhalka labadiisa dhinac ee la dhigo alaabada.
6. Khanni hore oo ah meesha la geliyo xaabada, si ayan u qoyin;
7. Khanni dambe oo ah meesha cunnada la geliyo

t) Oogada sare

1. Sadax dambe, oo ah meesha rakaabku fariisto

**7. Barroosinka**

Doontu labo barroosin bay u baahan tahay inay qaadato. Midka weyn oo 10 faraasiladood (1 faraasilo = 20 rodol) culaabtiisu tahay, Muuli baa la yiraahdaa; magacaas fuundiga sameeya doontana waa la yiraahdaa (eeg dhismaha Doonta 1.). Barroosinka ugu yar, oo



doonta lagula dhoweeyo xeebta, Khadba baa la yiraahdaa.

Marka doontu soo geleyso marsada naakhuuduhu waa istaagaa, xarigga Berred la yiraahdo oo farmaanka ku xiran buu qabsadaa. Ka dib baxrida buu dalbadaa.

Heerya qaliil. .. ! (af Carbeed — in yar gaabiya shiraaca). Doonta socodkeedu waa soo gaabtaa, shiraaca baa la dejiyaa, horay bay in yar u socotaa, ilaa uu naakhuuduhu ku dhawaaqo:

heerya barroos. . .! (tuura barroosinka).

Haddii uusan naakhuuduhu aqoon marsada uu gelayo, habeen ma geliyo doonta ee waaberi buu la sugaa. Badbaadada dadka iyo maalka buu ilaaliyaa.

## QAYBTA SIDDEDDAAD B)

## DABAYLAHA GANACSIGA

Doonyaha Soomaaliyeed ee leh shiraaca waxay boqol-guurooyin tegey ku dhoofi jireen xoogga dabaysha; taas oo leh xilliyo ay isku beddesho sanada gudaheeda. Dabaylaha joogtada ah ee doonyuhu ku dhoofaan waxaa ka mid ah :

b) **Koos**

Raasiga Casayr, ee ah cirifka bari ee qaaradda Afrika, wuxuu isku dadbaa, ama celiyaa dabaysha Koos la yiraahdo ee ka

A5' ab, sida soomaalidu u taqaan. Koosku wuxuu dhacaa afar bilood oo ka bilowda Dayrta (eeg Qayb Siddeed 6. x).

Kooska waxaa ku dhex jira xilliyo ama dabaylo kale oo yar-yar, sida :

1) caw
2) ciiraley

Dabaylahaasi waxay iyaguna ka yimaadaan dhinaca berri-carab iyo woqooyi.

3) Madlici, oo ka dhacda dhinaca badda, 2 bilood oo koos raacsan bay socotaa dabayshaasi.

t) **Shamaal (xagaa)**

Dabayl kale oo xoog weyn baa kooska kula hardanta Raasiga Casayr agagaarkiisa oo isburiya; Raasiga baana kala qaybiya oo seere u ah dabaylahaas. Shamaal (woqooyi - af-carbeed) baa loo yagaan dabayshaas; waxayna ka dhacdaa dhinaca Gacanka Carbeed iyo xeebaha woqooyi ee Soomaaliya.

Erayga "casayr" wuxuu ka soo jeedey af-carbeed, macnehiisuna waa "burburin"; dabaylaha koos iyo shamaal oo isburburinaya awgood buuna ku dhashay eraygu, sida ay werisey sheekada dadweynuhu.

Shamaalku wuxuu dhacaa saddex bilood oo bad-xiran ah, kuna dhex jira xagaaga.

Dabaylahaas hardankoodu wuxuu kiciyaa maayad (khayraan),



ama mawjad; taas oo doonyaha u jiidda xagaa jasiiradda Suqodara iyo koofur-bari. Kolkaas ka dib Raasiguna wuxuu kiciyaa maayad isagu iska leeyahay; oo iyaduna u jiidda doonyaha dhinaca koofureed, haddii ay ka fogaadaan Raasiga. Sidaas awgeed doonyaha waxaa loo dhoweeyaa oo lagu wadaa Raasiga dugsigiisa, si ayan maayaddu ugu jiidan badweyn iyo baaxad sooraha. Doonyuhu Cadan bay kaga soo dhoofaan shamaalka oo yimaadaan Soomaaliya, ka dibna khariif bay galaan kolka badxiranku soo galo oo xagaagu bilowdo.

dabaylo yar-yar baa ku dhex jira shamaalkana, waxaana ka mid ah :

1) dabooje-weyne oo Qod la yiraahdo
2) dabooje-yare oo Qayd la yiraahdo.

Xilligaas doonyuhu fariistaan khooriyada ee ayan u dhoofi karin badweyn xagaa baa la yiraahdaa. Khooriyada Caluula, Xaabo, Boosaaso (Mareera), Qandala, kd. bay fariistaan doonyuhu xagaagii, ilaa kooska dambe furmo.

j) **Asjab (wajiine)**

Marka koos iyo shamaal dhammaadaan waxaa kaca xilliga wajiine oo wata dabayl la yiraahdo Asjab oo ka timaadda woqooyi iyo berriga carbeed (Basra, Dabey). Asjabku lix bilood oo ku aaddan Dayrta buu socdaa; badduna way furan tahay.

Doonyuhu markaas Cadan (woqooyi) iyo Sawaaxil (koofur) way u dhoofi karaan; yohoon (kolka dabayshu horay u riixayso) bayna ku maraan safarkaas.

Asjab waxaa isagana ku dhex jira dabaylo yaryar oo dhextaal ah, sida :

1) Ximir oo roob wata; marka sanada doonyuhu (364 beri-eeg Qayb Sideed T) (s), 90 beri joogto buu bilowdaa ximirku.
2) Musareen oo ka yimaada berri-carab; kolka sanadku joogto 150 beri bay timaadaa dabayshaasi.
3) Baranbeer
4) Lixkor

5) Muqiibi oo ka timaadda barriga; 2 bilood oo raacsan Asjab weeye.

Labadaas xilli, Koos iyo Asjab, oo badfuran ah bay dhoofaan doonyuhu, sida caadiga ah.

**x) Suugaanta Asjab**

Asjab waa suldaanka badda bay yiraahdaan badmaaxeenku, waxayna ku heesaan, iyaga oo tilmaamaya xoogga iyo xawliga dabayshaas :

Asjabow odow
amar weynidda.

## T) DHOOFIDDA DOONYAHA SOOMAALIYEED

Saddexda xilli ee waaweyn ee joogtada ah ee lagu sheegay kor ka sokow, badmaaxeenada soomaaliyeed waxay tirsadaan xilliyo yaryar oo ku dhex jira xilliyada waaweyn. Xilliyadaasi waxay wataan, sida caadada ah, dabaylo iyo roobab; kuwaas oo saameeya dhoofidda doonyaha iyo ganacsiga ay wadaan.

Sidii aannu niri kol hore, Asjab (eeg j) waa xilli ku aaddan afar bilood oo ku aaddan Dayrta iyo Diraacda. Kolkaas doonyuhu, iyaga oo maran, ama sida badeecadda soomaaliyeed, sida libaax-badeed, xoolo jar ah, looxyo, kd., waxay ka dhoofaan berri Soomaal, waxayna soo guraan Rabshiga laga helo jasiiradda Kucaal iyo Xashiya ee Masqad ku yaal. Rabshigu waa saalo shimbireed ee lagu nabaadiyo beeraha, waxaana loo dhoofiyaa Cadan iyo dalal kale ee carbeed. Ka dib badeeco u badan cunno iyo dhar bay doonyuhu keenaan Soomaaliya.

Xilliga wajiinaha ah (eeg Asjab) baa soo gala, kolkaas bay doonyuhu qaadaan Maydi, Beeyo, ari jar ah oo Cadan loo iib geeyaa. Ka dib Soomaaliya bay ku soo noqdaan, iyaga oo sida cunno, dhar iyo badeeco kale.

**1. Yohoon Sawaaxil**

Safar dheer bay ka dib doonyuhu ku aaddaan Sawaaxil, ilaa Simba-Uranga, Tansaaniya; iyaga oo sida shixnad u badan libaax-badeed, kalluun kale, cusbo, kd. Dabaysha Asjab baa doonta horay u riixaysa, yohoon baana la yiraahdaa markaas doontu sidaas u socoto. Ugu-yaraan toban habeen bay doontu ku jirtaa yohoonka



Sawaaxil; yohoonka woqooyina (soo noqodka) intaas oo kale bay Soomaaliya u soo dhaxdaa. Markii xawaasha ama koosku soo galo, lix bilood ka dib, bay doontu ka soo noqotaa Sawaaxil, sababta oo ah dabaysha Makhoor (marka dabayshu ka hor imanayso doonta) baa jirta waqtigaas oo xayiraysa doonta.

Kolka doontu ka soo dhoofeyso Sawaaxil waa in la subko oo xayr geel iyo nuurad la isku kariyey laga mariyo dibedda; qolfadda (alwaaxda) dhexdana cudbi baa lagu gufeeyaa. Dahan baa la yiraahdaa hawshaas; marka la dahnayo doontu waa majxoban tahay, xeebta bay taal.

**2. Yohoon Cadmeed**

Markii badeecadda Sawaaxil laga rogo, yohoon Cadmeed bay ku dhoofi kartaa doontu, oo wajiinahii baa weli furan. Badeecadda berri-carab loo qaado waqtigaas waxaa ka mid ah maydi, beeyo, xaabo la shito, ari jar ah , kd.

Saddex habeen bay doontu ku tagtaa yohoonka Cadmeed; kolka dabaysha makhoorku dhacaysose labaatan habeen bay doontu kaga soo noqotaa Cadan.

Sida badan, doontaas Cadan buu badfuurku (wajiine) ugu dhammaadaa; haddii kale kuma khariifto, badxiran kuma sugto, ee waa ka soo carartaa, oo dabaysha shamaal (eeg t), bay doontu ku soo dhooftaa. Markaas ka dib xagaa oo badxiran ah baa bilowda mar labaad.

Dhowr marso ama khoorar oo dalalka carbeed ah bay ku nastaan doonyuhu wajiinaha; ka dibna toos bay u soo aadaan xeebaha bari ee Soomaaliya.

**3. Xawaal (Asjab tanga-mbili)**

Kolkaas dabayl xawaal la yiraahdo, oo saddex bilood ka dhacda Raasiga Casayr labadiisa docood, kuna qiyaasan Diraacda, baa soo gasha. Xawaal waxay ka dambaysaa wajiinaha, badduna way iska furan tahay. Doontu xawaasha way kaga iman kartaa Sawaaxil; haddii kale meesheeda bay ku khariiftaa ilaa yohoonta dambe ay ku soo aaddo Soomaaliya iyo berri-carab.

Inta xawaashu jirto doonyuhu waxay Soomaaliya keenaan badeecadda Sawaaxil, sida cunno, dhar, looxyada Qand-alka, kd. Isla waqtigaas xoolo jar ah iyo maydi bay Cadan u qaadaan inta

xawaashu weli jirto. Erayga "tanga-mbili" af-sawaaxiliga buu ka yimid, macnehiisuna waa laba shiraac; dabayl labo dhinac ka dhacaysa.

4. **Aqbalma-yaqbal (wejiine)**

Ka dib dabayl la yiraahdo Aqbalma-yaqbal oo saddex bilood socota, kuna qiyaasan wajiinaha, baa dhalata. Doonyuhu markaas badeecadda Cadmeed bay Soomaaliya keenaan, ka dibna khooriga bay galaan ilaa kooska dambe baddu furanto.

Sidaas darteed, sanada doonyaleydu tirsadaan waxay ku qiyaasan tahay sagaal bilood oo badfuran ah iyo saddex badxiran ah. Waqtiga badfuranka ah doonyuhu saddex safar bay u dhoofi karaan berri-carab, Mukala, Cadan, kd., Sawaaxilse mar qura. Socdaallada iyo badeecadda doonyuhu dhoofiyaan iyo midda ay ka keenaan dalalkaas waxaa muujinaya shaxda hoos ku qoran :

| xilli | ka dhoof | qaad badeeco | u dhoof | keen badeeco |
|---|---|---|---|---|
| Koos | Soomaaliya | maran | Kucaal | rabshi |
| » | Kucaal | rabshi | Shixir | maran |
| » | Shixir | cunno dhar | Mukala | cunno, dhar |
| Asjab | Mukala | cunno, dhar | Soomaaliya | cunno, dhar |
| » | Soomaaliya | cambaayad (beeyo) ahmi (jar) | Cadan | cunno, dhar |
| » | Cadan | cunno, dhar | Soomaaliya | cunno, dhar |
| » | Soomaaliya | libaax-badeed | Sawaaxil | cunno, qandal |
| Koos | Sawaaxil | cunno, qandal | Soomaaliya | cunno, qandal |
| » | Soomaaliya | maydi, ahmi | Cadan | cunno, dhar |
| Shamaal | Cadan | cunno, dhar | Soomaaliya | cunno, dhar |

5. **Magaalooyinka Carbeed ee doonyaha Soomaaliyeed u dhoofi jireen**

Doonyaha soomaaliyeed waxay boqol-guurooyin tegey u dhoofi jireen, iyaga oo xiji iyo badeeco kale sida, dalalka carbeed ee ku yaal xeebaha Badda Cas iyo Gacanka Carbeed. Xiriirkaas ganacsigu wuxuu suuro geliyey, sidii aannu kol hore u niri, in dhaqanka dalalkaas iyo kan soomaalidu isdheehaan, siiba dhinaca afka, taariikhda, aqoonta badmaaxnimada, kd. Erayada ku saabsan dhisidda iyo hawlaha doonyaha soomaaliyeed (eeg Qayb Toddoba) badi-



dood waxay ka soo jeedeen af-carbeedka, facyaal badan ka dibna way soomaaliyoobeen erayadaasi. Isdhexgalkaas dhaqan ee soo jirey qarniyo badan baa ku wacnaa arrintaas.

Magaalooyinka carbeed ee doonyaha soomaaliyeed u dhoofi jireen waxaa ka mid ah kuwa hoos ku qoran :

| magaalo | dal | magaalo | dal |
|---|---|---|---|
| 1 Cadan | Yemen | 18 Dabod | Meheri |
| 2 Mukala | Shixir | 19 Burud | » |
| 3 Shixir | » | 20 Xafif | » |
| 4 Xami | » | 21 Darbad al-Cali | » |
| 5 Dir | » | 22 Salala | Maskad |
| 6 Garam | » | 23 Murbad | » |
| 7 Qusecir | » | 24 Sadax | » |
| 8 Reda | » | 25 Nos (raasi) | » |
| 9 Musance | Meheri | 26 Qubatul Wihibi | » |
| 10 Sayxud | » | 27 Masaire | » |
| 11 Xatab | » | 28 Ishqira | » |
| 12 Kashid | » | 29 Gamera | » |
| 13 Sogar | » | 30 Sur | » |
| 14 Xaswein | » | 31 Maskad (xarunta) | » |
| 15 Xisod | » | | |
| 16 Farde(Raasi) | » | | |
| 17 Shitod (marso) | | | |

6. b) BILO ASJAB
1. Soon
2. Soonfur
3. Sidetaal gú
4. Arafo
5. Sako Diraac
6. Safar

t) BILO GU'
Waa Soon ilaaa Arafo, afartaas bilood ee u horreeya Asjab.

j) BILO DIRAACEED (xawaal)

Waa Seko iyo Safar, labada bilood ee u dambeeya (kadabatuur) Asjab; bilahaasi waa xawaal, doonyuhuna way u socon karaan dhinaca Asjab iyo Koosba. Sidaas awgeed, guga iyo diraacdu waxay ku gudo jiraan Asjabka.

Lixda bilo Asjab waa 30 beri middiiba, dayaxa bayna la soc-daan; 180 beri waa sanada nuskeeda, Nayruuska baana bilowda markaas ka dib.

x) **Bilo Koos**

| | | |
|---|---|---|
| 7. | Rabiic al-awal (mawliid) | |
| 8. | Rabiic al-aakhir (maalmadoone) | xagaa |
| 9. | Jamaad al-awal | |
| 10. | Jamaad al-aakhir (anbaylo) | |
| 11. | Rajab (Aw-Cismaan) | |
| 12. | Shacbaan (aw-Baabasan, Soondheere) | dayr |

Magacyada ku jira qaansooyinka waxaa laga yaqaan Xamar, Marka iyo meelo kale oo deexda koofureed ee Soomaaliya ku yaal.

kh) **Bilo Xagaa**

Waa afarta u horreeya bilo Koos, kuwaas oo ah Rabiic al-awal ilaa Jamaad al-aakhir.

d) **Bilo Dayreed**

Waa Rajab iyo Shacbaan, labada bilood ee ugu dambeeya bilo Koos. Kolka la joogo 60 ilaa 70 beri ee dayrta, doonyuhu berri-carab bay u dhoofaan.

Lixda bilo Koos iyaguna waa 30 beri middoodba oo la socda dayaxa; 180 beri weeye bilahaasi kulligood. Sidaas awgeed, 360 (180 + 180) beri weeye sanada doonyaleydu tirsadaan. Waxaa tira-daas lagu daraa 4 beri oo dayaxu dibbad (gudcur) yahay; 364 beri weeye kolkaas sanada dayaxu.

Sida muuqata, bilaha dayaxa ee doonyleyda soomaaliyeed tir-sadaan waxay leeyihiin magacyo carbeed. Xiriirkii waayaha badan soo jirey ee soomaalidu la lahayd dalalka carbeed iyo isdheehidda labada dhaqan bay muujinaysaa arrintaasi. In kastaba, waxaa jira bilo leh magacyo soomaaliyeed, kuwaas oo ku qiyaasan socodka qorraxda.



## BILO QORRAXEED

Waxaa jira bilo ku jaan go'an socodka qorraxda, sanadooduna tahay 364 berri, sida sanada reer-Yurub.- Bilahaas waxaa tirsada xoolaaleyda soomaaliyeed ee ku nool gobollada Mudug, Nugaal, bari, kd. Bilahaas iyo kuwa reer-Yurub oo u tusmaysan, in kasta oo ayan dhab isugu jaan go'nayn, waa kuwa ku qoran hoos :

| Bilo Soomaaliyeed | Bilo reer-Yurub |
|---|---|
| 1. Toddobo | January |
| 2. Amminla' | February |
| 3 Fushade | March |
| 4. Gusoore (Samoolad) | April |
| 5. Lixadhaqo (laxadhaqo, Cawlikudhashay) | May |
| 6. Dabboje | June |
| 7. Diraacgood | July |
| 8. Habarari | August |
| 9. Ximir | September |
| 10. Axal | Octoober |
| 11. Xays (xaysin, yaare | November |
| 12. Lixkor (laxkor) | December |

Soomaalida reer-miyiga ahi, siiba kuwa deggan gobollada kor lagu tusay, waxay bilo qorraxeed u sii kala qaybiyaan afar xilli oo midba yahay saddex bilood; lix doog ah (gu' iyo dayr) iyo lix jiilaal ah (diraac iyo xagaa)

r) **Bilo Diraaceed**

1. Lixkor
2. Toddob
3. Amminla'

s) **Bilo Gu'**

4. Fushade
5. Gusoore
6. Lixadhaqo

sh) **Bilo Xagaa**

7. Dabbooye

8. Diraacgood
9. Habarari

dh) **Bilo Dayreed**

0. Ximir
1. Axal
12. Xays

s) **Jimeynta Xilliga Badmaaxeenka iyo reer-Miyiga**

Bilaha qorraxdu waxay u dhigmaan, in kasta oo ayan isku jaan go'nayn, bilaha dayaxa (eeg Bilo Asjab iyo Bilo Koos); sanadood-una waa isle'egtahay oo waa 364 beri. Waxayse bilahaasi ku kala duwan yihiin sida la isugu min-guuriyo bilaha ku jira afarta xilli ee sanadu ka kooban tahay. Tusaale-ahaan, guga doonyaleydu waa 4 bilood, midka xoolaleyduse waa 3; diraacda doonyuhu waa 2 bilood, midda xoolaleyduse waa 3; xagaaga doonyuhu waa 4 bilood, midka xoolaleyduse waa 3; dayrta doonuhu waa 2 bilood, midda xoolaleyduse waa 3 (eeg Bilow Dayax iyo Bilo Qorraxeed).

Kala-duwanaanta sanada badmaaxeenka iyo midda reer-miyiga waxaa ugu wacan waa iyada oo doonyaleydu ku xisaabtam-aan socodka dayaxa; xoolaleyduna ku xisaabtamaan socodka qorraxda. In kastaba, sanada dayaxa baa dhab caan u ah oo soom-aalidu badidood ku xisaabtamaan.

7. **DIRIR**

Tahwiyeyaalka ama xiddigo-sheegeyaalka soomaaliyeed waxay kuman-guurooyin ka hor aqoonsadeen meereyaal caan ah, sida qundhacada, dayaxa, xiddigaha caanka ah kd. kuwaas oo "wada fariista" ama is-hareer mara waqti la yaqaan sanadiiba mar ama dhawr goorood. Isa-saamaynta caynkaas ah, siiba xiddigaha qaarkood iyo dayaxa, Dirir bay yiraahdaan tahwiyeyaalku.

Dirirrada doonyaleyda, iyo xoolaleyduba, tirsadaan, oo ku aqoonsadaan xilliyada sanada, way badan yihiin, waxaana ka mid ah kuwo hoos ku qoran :

1. **Magacyada dirirrada**

b) 1. Dirir Toosis, oo ah xiddig ka hor mara dayaxa
t) 2 Dirir Sagaaro oo ah xilli



Labadaas dirir waa isku mid; erayga Toosay wuxuu tusayaa waqti barwaaqo ah. Haddii dirirku maro habeen waa barwaaqo, haddiise uu maro maalin waa abaar, baa la yiraahdaa. Dirirka t) sagaarada baa ku orgoota, sidaas baa loogu bixiyey magacaa.

2. Toddob waa xiddig bil toddobadeed ag marta dayaxa; waa waqti barwaaqo ah.
3. Aminla' waa xilli, lama aamino, lama guuro waqtigaas.
4. Fushade waa waqti fiican, kuna aaddan gu'ga dhexdiisa.
5. Gusoore (samuulad) waa waqti barwaaqo ah, samaan.
6. Lixo
7. Saco
8. Daboojiyeyaal
9. Beenanaas waa labo xiddigood oo aalaaba wata dabaylo xoog leg; isla magacaas baana loo yaqaan dabaylahaas.

Magacyada lagu tusay Lr. 2 ilaa 5 bilo iyo xilliyoba waa loo yaqaan (eeg Bilo Qorraxeed).

Daboojiyeyaalku waa labo, toddoba beri baana u dhexeeya soo-bixiddooda midka hore iyo midka dambe. Xiddigaha kale way wada socdaan. Dhicidda Nujuumyadu waxay la socdaan Asjab; soo-bixiddooduna Kooska.

Dhaq-dhaqaaqa meerayaalka iyo isbeddelka xilliyada sanada waxaa ku xiran dhoofidda doonyaha. Sidaas awgeed, badmaax-eenka soomaaliyeed waxay tirsadaan sano bilaheedu la socdaan dayaxa, ama qorraxda.

8. **Suugaanta Dirirrada**

b) 1. aad samaatee
Samuulad ogow ...
(waqtiga habboon ee arigu orgoodo waa samuulad: ujeeddada tixduna waa sidaas).

2. Toddob toosyoo
toddobuu maray ...
(eeg dirirka 2-d)

3. kuu ducaynaye
bisha dirir iyo
Daalalo ogow ...
(bila Daadalo waxaa lagu tiriyaa, gobollada Soomaaliya qaarkood, dayrta iyo diraacda (eeg j) iyo d).

4. haddii laxa dhalaan
oo lixo dhacaan
oo Seermaweydo
sunkeedba la waayo
Soomaali sidee yeeli ...
(haddii iduhu (laxo) dhalaan marka lixuhu (xiddigo, urur) dhacaan oo gu'gu (seermaweydo) di'i waayo abaar baa dhacaysa, nolosha soomaalida xoolaleyda ahna dhibaato bay la kulantaa).

t) **Halhays**

haddaan dirir Aminlow
reerkayga ku raacsho
haddaan oori xumaataay
ardaagaaga fariisto
haddaan wiil ardaalow
reerkayga arrintiisa ku weydiiyo ... (eeg dirirka 3-d).

Aqoonta ku saabsan xiddiginta ee soomaalidu yiqiinneen kumaanguurooyin tegey waxaa gabaygiisa soo socda kaga faallooday Sayid Maxamed, geesigii qaranka soomaaliyeed :

j) **Gabay "SIDII MIYUU MUUJEY !"**

sidii Saxal (1) nujuumeed (2) markaan
Sacaha (3) eegaayey
ma Saxaabka (4) duuliyo cirkaan
sare u weydaartey
ma Samuuladkaan (5) sida ayaxa
samada uugaanshey
ma sagaashankii (6) oo go'aan
Sagal (7) ku geylaamay
Dirirkoo siddeed maray (8) miyaan
badh u siyaadeeyey
Sammaaddiyo (9) kulaylkii miyaa
saxansax loo dhaafshey
Sakal (10) roob daruuraha salliban (11)
saymo curanaaya
Sarkadhabanka (12) fiidkii maray
samadu ceegaagtay
goortay suxuurtii ahayd
Sarab (13) miyaa fuulay
haddii sawaaxiga gudguda (14)
dunida saameeylay (15)
onkodka iyo sawdkii markii
samadu xiimeysey
hillaacii saraaraha (16) ka baxay
sidii miyuu muujey ... !



**Fiiro gaar :**

Erayo ku saabsan xiddigiska iyo qaybo kale ee aqoonta abuurta baa ku jira gabaygan Sayidka, lagana yaabo in aan isku si looga wada aqoon gobollada Soomaaliya; erayadaas iyo fasiraaddoodu waa sida ku qoran hoos:

1. Saxal, ama Raage, waa mid ka mid ah meereyaalka ku wareega qorraxda, wuxuu u dhexeeyaa Cirjeexda (mushatar) iyo Uranus, waxaana ku wareegsan saddex garan-garood oo xalxalleefsan oo ifaya. Saxalka maalintiisu waxay le'eg tahay 10 saac iyo 14 daqiiqadood oo kuweenna ah, sanadiisuna waxay u dhigantaa 29 sano iyo 167 maalmood oo kuweenna ah. Sagaal dayax baa ku wareega Saxalka (eeg Qaamuuska Af-Soomaaliga, ee Dr. Yaasiin Cismaan, 1976).

2. **Nujuum, xiddigo, af-carbeed.**

3. Saco, waa xiddigaha cuntubyoda ah kuwo ugu cad bay ka mid yihiin : waxay ku yaalliin lixaha iyo Caddaadka agtooda oo aan ka fogeyn Diillincaanoodda.

4. Saxaab, daruurò, af-carbeed.

5. Samuulad, (eeg dirirka 5-d).

6. Sagaashankii, waa saddexda bilood oo jiilaalka ah, xagaaga ama diraacda.

7. Sagal, waa daliigo balballaaran oo Moodda galbeed u eg oo xilliga roobka cirka ku dhilma aroortii.

8. Dirirkoo siddeed maray (eeg dirirka 2-d).

9. Sammad, kulayl, huur

10. Sakal, lakabyo, dhoolal daruur ah

11. Salliban, saynsaaban

12. sarkadhaban, roob yar oo da'a midka weyn ka hor

13. Sarab, dhismo ka samaysan ulo, teed

14. Sawaaxi gudguda, xiinka roobka mirta ah, oo habeenkii da'a.

15. Saameelay, qariyey, wada gaarey.

16. Saraar, meel sarraysa dusheeda kore.



## 9. RUGAHA RAXMAANIGA IYO DIIRADDA

Badmaaxyada soomaaliyeed waxay si fiican u yaqaannaan majareyaal ama jagooyin ay ka tilmaaman qaataan kolka ay ku dhoofayaan doonyaha leh shiraaca ee ku socda dabaysha. Naakhuuduhu wuxuu ka qiyaas qaataa rugaha Raxmaaniga oo ah warqadda jaangooyada badaha iyo birriga, iyo diiradda oo tusta jahooyinka. Saranjiga iyo sukuuniga buu naakhuuduhu tusaa majaraha lagu wadayo doonta. Afar waaxood weeye diiraddu. Waaxdiiba waxay u sii kala baxdaa toddoba majare iyo afar kale oo dheeri ah (4 x 7 = 28 + 4 = 32 rugood).

### 1. **Majare**

Lixda majare ee ugu caansan ee doonyaha soomaaliyeed ku socdaan waa :

b) Waaxda Jaah (woqooyi) oo ku aaddan Mukala kolka doontu ka dhoofto xeebaha bari ee Soomaaliya; dabaysha Asjab buu wataa majarahaasi.

t) Goddob (koofur) oo ah majaraha doontu soo qabsato marka ay ka soo noqoto Mukala oo ku soo socoto Soomaaliya; dabaysha Asjab (wajiine) buu wataa majarahaasi.

j) Madlac (galbeed) oo ah majaraha doontu ugu dhoofto Indiya; dabayl dhex-dhexaad ah (koofur iyo woqooyi) buu wataa madlacu.

x) Ximaareyn, oo ah majaraha doontu ugu dhoofto Sawaaxil (Sinjibaar, Simba-Uranga) kolka ay ka tagto Soomaaliya.

d) Naaqad, oo ah majaraha doontu kaga soo noqoto Sawaaxil, oo ku aaddo Soomaaliya.

Waax kasta waxay u sii kala qaybsantaa 8 jaho, sidaas awgeed kulligood waa 32 jaho rugaha diiraddu.

Waaxda Jaah, tusaale-ahaan, waxay u qaybsantaa jahooyinka soo socda :

1. Jaah
2. Ferdeg
3. Nacash
4. Naaqa
5. Cayuug
6. Waaqac
7. Sumaag
8. Turaya

Waaxda Goddob waxay iyaduna u sii kala qaybsantaa majarayaalka hoos ku qoran :

1. Goddob
2. Sandobaar
3. Sahayl
4. Ximaareyn
5. Aqrab
6. Aqliil
7. Tiir
8. Maqiib



Waaxda Madlac (bari) iyo Maqiib (galbeed) iyaguna waxay u sii kala baxaan sida Jaah iyo Goddob, magacyadooduna waxay la mid yihiin lix iyo tobanka kor lagu sheegay. Madlac waxaa kale oo ku jira labo jaho oo la yiraahdo Turaya (lixo).

Rugaha diiradda ka sokow, badmaaxyada Soomaaliyeed kolka ay ku jiraan safarka badda waxay ka qiyaas qaataan xiddigaha caanka ah ee cirka koonfureed ka muuqda. Xiddigintuna guud-ahaan waxay ka mid tahay laamaha cilmiga ee badmaaxeenka Soomaaliyeed si fiican u yaqaaniin. Xiddigaha doonyaha soomaaliyeed ka majare qaataan habeenkii waxaa ka mid ah :

Ximaareyn
Turaya (xiddigta waaberi)
Ximir
Dabbooje
Sacaha, kd.

In kastaba, xiddigahaasi ma aha majare joogto ah oo way dhacaan, dabaylana way wataan; sidaas awgeed doonyaleydu iskuma aaminaan.

b) **Libaax badeed**

Badeecadda doonyaha soomaaliyeed u dhoofin jireen dibedda, dakhli weynna soo gelin jirey dalka, waxaa ka mid ah libaax-badeedka oo badidiisa laga jillaabto xeebaha gobollada bari ee Soomaaliya. Libaaxa leh qiimaha sare, suuqa adduunkana laga jecel yahay, waa dhawr nooc, waxaana ka mid ah :

1. Jeer-jeer
2. Xaash
3. Damis (1. dhegmadow, 2. dhegcad)
4. Saraacimo (seefle)
5. Shakhaawis (dhegmadow)
6. Shiriid (gareen, dheg-madow)
7. Shooxad
8. Geelbadeed
9. Cawar (dhegmadow)
10. Qafaar
11. Muumin Saleebaan (hoboboro)
12. Maafoos (dhegcad)
13. Miishaaf (dhegmadow)
14. Nibraan "
15. Halked "
16. Sanotole "

Saraacimada iyo Maafooska waxaa loo yaqaan "dhegcad", dhegahooduna ka qaalisan kuwa libaaxyada kale. Addimada (baal-biyood) kaga yaal dhinacyada iyo duudka libaaxa bay soomaalidu ku sheegaan dhego. Maafoos, Nibraan iyo Shooxad waa libaaxyo aad u waaweyn, waana dhib si lagu qabto. In ay badweyn u jiitaan bedenka iyo kalluunsadaha kolka maqaaladda lagu qabto baa suur-owda. Labo nin baa soo bixin karta, bur weyn oo Maasuud la yiraahdo baa lagaga dhuftaa maskaxda oo lagu suuxiyaa inta aan lagu soo ridin bedenka.

Saraacimadu seef dheer bay ku leedahay afka oo wax ku dis-haa, haddii aan durba laga jebin marka la soo qabto. Cawarka waa la jecel yahay hilibkiisa; isaguna libaax khatar ah weeye.



Soomaalidu ma cunto, sida badan, Muumin Saleebaan; bax-ridda ku dhacda badda buu dusha ku qaadaa oo geeyaa berriga, sida sheeko xariirada badmaaxeenku werisey.

Waxaa jirta in kalluunka qaarkiis magacyo kala duwan looga yaqaan gobollada ku yaal xeebaha ee Soomaaliya; tusaale-ahaan libaaxa saraacimo (eeg Ir. 4) Seefle baa looga yaqaan meelaha qaarkood: Faramaggooggo, Farabadan iyo Sannaani waa isku bahal (eeg Qayb t) 58). Degaanka iyo farsamada kala duwan ee gobollada dalka baa dhaliyey arrintaas.

Marka la qabanayo libaaxa waxaa loo dhigaa Jilib, oo ah birta qaroofsan ee ka gasha afka; ama waxaa lagu qabtaa shebeg. Cad hilib kalluun ah, lacaaf, baa la suura jilbaha afkooda, si loogu dago libaaxa oo uu u wada liqo. Jilbaha iyo xargahooda Shakad baa la isku yiraahdaa, maalin baana la dhigaa badda oo lagu ugaarsadaa. Jilbo aan lacaaf ku xirnayn libaaxu ma galo; waa bahal garaad badan bay yiraahdaan kalluunsatadu.

Bilaha xagaaga oo ku aaddan inta u dhexaysa Maajo iyo Agoosto bay u badan tahay qabashada libaaxu. Dabaylaha markaas jira waa Aqbalma-yaqbal iyo Asjab.



sawir: Libaax badeed



Haddii kalluunsaduhu leeyahay huuriga iyo qalabka kale ee lagu kalluunsado, waxaa suurtowda in uu sanadiiba qabsado 1,000 libaax-badeed, ugu-yaraan. Hilibka libaaxa waxaa loo kala qaybiyaa cad iyo dhego, qaybta dambe baana qaalisan; faraasiilladii waa 300/— ilaa 800/— ugu-yaraan. Dalal Jiina, Jabbaan ka mid yihiin baa loo dhoofiyaa dhegaha libaaxa Soomaaliyeed. Fuud yaab leh baana laga wanaajiyaa dhegaha. Cadka kale faraasiilladii waa 50/—, Sawaaxil iyo dalal kale baana loo dhoofiyaa. Sidaas awgeed, kalluunsaduhu wuxuu sanadiiba heli karaa ribix lagu qiyaasay :

| | |
|---|---|
| dhego libaax 100 faraasiilo min 300/- | shs. 30,000. |
| cad libaax 900 " " 50/- | 45,000. |
| | shs. 75,000 |

Tiradaas waxaa ka go'aya raaska, ama cunnada la sii aammaahiyey iyo mushaqaayadda baxrida kalluunsaduhu kireystey, kirada alaabada jillaabidda, haddii uusan isagu iska lahayn, canshuurta kd. Kharajkaas oo lagu qiyaasay ugu-yaraan shs. 30,000/—, wuxuu jirey toban sano ka hor, waagii qalabka jillabiddu hooseysey.

t) **Noocyada Kalluunka kale**

Guud-ahaan kalluunka laga jillaabto badaha soomaaliyeed waa noocyo badan, waxaannu ka soo qaadanaynaa qaar ka mid ah oo qayb weyn ku leh, sida libaaxbadeedka, dhaqaalaha dalka :

1. Baaq
2. baaldheer
3. Buluqbuluq (tabadiin yar)
4. Baroole
5. Booraad
6. Bayaad
7. Tarraaqad
8. Tabadiin (buluqbuluq)
9. Tardabo (qardabo)
10. Turunbuukh
11. Jeedar (tabadiin)
12. Xanjoole (farasbadeed)
13. Xarfo

14. Xoosh
15. Xalwaayo

16. Khashaar
17. Dhabeer

18. dabasaqaf
19. dabagucun
20. Diiri
21. Doorib (gocoorre)

22. Saaruq (halkable)
23. Saafi
24. Sarco
25. Safan
26. Saynub
27. Silqo
28. Soocooban
29. Seenseemane
30. Sumaan
31. Shiiraan
32. Shoox (gaxash)
33. Shoofe
34. Shabeel
35. Shaaruubaale
36. Shorooq (iskambe)

37. Dhabeer
38. Dhabdhabbo
39. Dhasandhoos
40. Dhuubaani (gocoorre)

41. Caylo (dabaqoray)
42. Carabi (yaryar)
43. Cambarshe (farasbadeed)
44. Codweyn

45. Gajle (garle)
46. Gaxadh (shoox)
47. Gaadoowe (dhuubaani)
48. Gaararro



49. Gadaarre
50. Gocorre (shaarubaale, doorbid, dooraab)
51. Gabaar
52. gabaraale
53. Guduudo

54. Faraley
55. Farasbadeed (xanjoole, cambarshe)
56. Farey
57. Faquur
58. Faramaggooggo (sanaani)
59. Faardo
60. Fujaan
61. Funi
62. Foodimaadle

63. Qariib
64. Qardabo (tartabo)
65. Qaan
66. Qubosaar (loolaaq)
67. Qafish

68. Kaxan
69. Loolaaq (qubosaar)

70. Madaxdhaqax
71. Madaxgoos
72. Maryan
73. Maraamiis
74. Masbadeed

75. Naaqiin

76. Halkable (habarey maanyo)
77. Hoboboro
78. Huqle
79. Huruuf


80. Waniin

81. Abeeso (badeed)
82. Abuumaqas

83. Adoolo
84. Aseebo
85. Awsaar
86. Afkulibaaxle

87. Ilkoole
88. Ilbarbar
89. Iskaambe (abuumaqas)





sawir: Kalluun (Tarraaqad)

Kalluunka lagu tusay kor badidiis waxaa laga helaa badaha soomaaliyeed, hilibkoodana la jecel yahay. Tarraaqaddu (7) way hilib jilicsan tahay oo waa idihii badda; tabadiinkuna (8) waa hilib adag yahay oo waa geelli badda, bay yiraahdaan kalluunsadeyaalka soomaaliyeed. halkable (76) soomaalidu, sida badan, ma cunto oo waa kalluun u eg dad. Hoboboro (77) hilibkeedu waa seedo miiran, sidaas baan loo jeclayn.

j) **Qalabka Jillaabidda Kalluunka**

Alaabada ama cuddada libaaxbadeedka iyo kalluunka waaweyn soomaalidu ku jillaabato waa sanco gabowdey oo ab-ka-ab soo jirtey, awoodda wax-soo-saarkeeduna aad u yartahay. Qalabkaas waxa ka mid ah :

1. Shabaag
2. Liikh
3. Jiriif
4. Idaad
5. malqo
6. Damrad (waran)

Shabaagta badda baa lagu fidiyaa, karaabad ama calaamado looxaan ka samaysan oo lagu aqoonsado meeshay shabaagtu taal, korna biyaha ugu haysa, baa darfaha sare kaga xiran. Barroosin baa hoos kaga xiran shabaagta, si ayan biyaha iyo kalluunka waaweyn u jiidan. Rasaas ama miisaan ka dhawra murugga ama laallaabka ayaa darfaha hoose kaga xiran shabaagta. Libaaxa iyo kalluunka kale ee waaweyn baa lagu qabtaa shabaagta.

Jiriifku waa kiish xargo laga soohay, biyaha xeebta u dhow baa lagu fidiyaa. kiishka afkiisa weyn ee furan buu kalluunku ku ururaa, marka uu buuxsamana waa la soo jiidaa. Liikhu wuxuu la mid yahay Jiriifka, dhinac sanco iyo ku dhaqankiisaba.

Idaaddu waa xarig dheer oo lagu aslay ranji u eg biyaha badda, si uusan kalluunku u dareemin. Xarigga caaraddiisa hore Jilbo ama maqaalimo bir qaroofsan ah baa lagu xiraa. Jilibka afkiisa qoolaaban baa lacaaf ama cad hilib ah lagu taxaa, si loogu dago kalluunka oo uu u liqo lacaafta iyo hilibkaba. Haddii la doono habeen bay jilbuhu ku baryaan badda, subaxa dambe buu kalluunsaduhu soo jiidaa jilbaha, isaga oo sita lacaaf cusub oo lagu camiro ama beddelo tii hore, haddii kalluunka kala baxay.



Malgaddu waa shabaag yar oo qof keli ahi xeebta kaga qabsado kalluunka yaryar. Malgada raxan kalluun ah baa lagu hab siiyaa; rasaastii ama miisaankii darfaha kaga wareegsanaa baa hoos u jiida malgada, oo kalluunkii ku horoysa shabaagta dhexdeeda, si uusan u baxsan.

Damraddu waa waran dhego leh, oo hooto ku daaban, sida waranka baana loogu ridaa kalluunka. Ninka horay ka fuushan huuriga baa Taxluukad ama lacaafta ku garaaca huuriga dheeggisa, si dhiiggu ugu daato badda oo libaaxu u soo uriyo. Markii libaaxu u soo dhowaado huuriga buu ninku kor u ceshadaa taxluukadda, oo damradda meel halis ah, sida surka iyo dabada, kaga wareemaa libaaxa. Ka dib xariiggii ku xirnaa suulka damradda baa loo sii dayaa libaaxa, ilaa uu daalo. Markaas baa la soo jiida xariigga, oo madaxa laga dilaa libaaxa.

Haddii ayan damraddu meel halis ah kaga dhicin libaaxa oo nafta loo yaabo, xarigga baa loo gooyaa, ama ciidan baa loo yeertaa oo nabar kale lagu dhuftaa bahalka.

x) **Bislaynta Hilibka Kalluunka**

Siyaalo kala duwan bay badmaaxeenka soomaaliyeed u bisleystaan hilibka kalluunka. Hilibka libaaxa sida badan waa la saafaa, waa la cusbeeyaa oo lagu waraa milicda. Markii uu beryo warnaado oo engego baa laga mayraa ama dibedda baa loo dhoofiyaa. Hilibka sidaas loo hagaajiyey haddii la rabo in laga dhigo sanuunad, horta waa la qooyaa oo cadad yaryar loo jarjaraa, ka dibna waa la kariyaa, subag ama saliid iyo dhirudeyg, sida xawaash, qorfe, riire kd. baa lagu dallacaa. Haddii la doono bariidka ama badarka baa sanuunad ama kortsaar (koosaar) looga dhigaa; rooti ama kimisna waa lagu cunaa. Faraha baa la isku goostaa, macaan dartiis, hilibka kalluunka kolkii sidaas loo sameeyo.

Mar waxaa la yiraahdaa bar (sanuunad) oo timir baa lagu cunaa: mar waa hogo oo kimis iyo timir baa lagu cunaa. Hilibka libaaxa (waniin, dibaabad) biyo badan baa lagu kariyaa, ku dar subag ama saliid, cun keligiis, fitamiin-ahaan; rabish baa la yiraahdaa saxankaas.

Layaab ma lahayn gabadhii wallacday ee ku heestay :

kululow kalluunkii
baan jantay
badda bawbacdeedii
baa jantay
qubo qaalin geel le'eg
baan jantay ! ...

kh) **Sadaf (luul)**

Labo qolfood ama dhulmano dhexdood buu sadafku ka dhashaa. Dhulmanahaas mid waxaa la yiraahdaa sadaf oo laga helo Daanadda ama midka ugu qaalisan luulka; midda kalena waxaa la yiraahdaa Bilbil oo ka qiimo yar sadafka. Bilbilka waxaa laga helaa biyaha gala birriga, sida khooriga Hurdiyo. qolfaha sadafka iyo bilbilka waxay ka unkamaan bahal nool oo way isku abuurmaan kolka la taabto, oo hilbo cadcad baa kaga yaal gudaha. Labada qalbac dhexdooda buu ku dhashaa luulku, oo ah iniin cad oo kankoonsan sida kubbadda, wax kastana ka adag. Sebennadii hore luulku wuxuu ahaa badeecadda ugu qaalisan ee laga dhoofiyo Soomaaliya, xijiga ka sokow. Jabbaan iyo dalal kale baa soo saaray luul-gacmeed aan asiili ahayn oo qiime jebiyey kii Soomaaliya. Daanadda ugu fiican hal ukun ah bay le'eghtahay, kun shilin kama yara qiimaheedu. Inkastaba, dhaaxa lama helo daanadda.

Qolofta luulku qiime bay leedahay oo dibedda baa loo dhoofiyaa, qolofta bilbilkuse ma laha qiime.

Qawaas ama badmaax si fiican u yaqaan dabaasha baa soo gura luulka, labo-labo (qawaas iyo Jarraar) bayna isu raacaan iyaga oo wata huuri. Muraayad (damuus-wale) labada dhinacba wax lagaga arko bay ku fiiriyaan biyaha dhexdooda, meel dheer bayna wax ka arki karaan. Markii la arko sadafka xarig Buldi la yiraahdo oo miisaan kaga xiran yahay afka baa lagu ridaa meesha sadafku yaal, si lagu cabbiro dhererka biyaha. Ka dib qawaas (quuse) baa quusa, isaga oo sii raacaya buldiga, oo soo qaada sadafka. Haddii dhererku ka badan yahay 5 baac (baac = 2 mitir) lama quus oo waa halis. Jarraadku waa in uu huuriga ku hayo meesha qawaasku ka quusay, muraayaddana wuu ku eegaa inta jaalkiis ku maqan yahay biyaha. Haddii jarraarku arko libaax ku soo socda jaalkiis, buldiga buu ruxaa, si uu ugu digo, kolkaas buu ka soo baxaa badda, isaga oo baqo ah. Quusaaga waxaa qoorta u suran kolay daldaloola, Jiriif, ee uu ku soo rido sadafka; mar hal xabbo buu hellaa, marna dhawr sadaf.



Mindi baa lagu jeexaa qolofta, luulka baa laga bixiyaa, qoloftana waa la engejiyaa, si hilibka kaga yaal guduhu uga sifaysmo. Sadafku goon ama dhadhaab ku dhex taal badda buu isku dhejiyaa, bilbilkuse waa fariisan karaa badda salkeeda.

Bilbilku uma baahna muraayad lagu fiiriyo, meel aan mool ahayn oo qof jooggiis le'eg buu yaallaa; hal qof baa soo buuxin kara beden hal maalin.

Sooguuridda luulku waa hawl halis ah, oo u baahan geesinnimo; libaax-badeedka iyo bahallo kale baa khatar geliya quusaaga, oo marmar ku dhinta badda. In kastaba, dhib iyo dheef waa isku dhafan yihiin, bay yiraahdaan soomaalidu.

d) **Suugaanta Badda**

Badmaaxeenka soomaaliyeed waxay abuureen suugaan ballaaran oo facyaal badan soo jirtey, bulshada inteeda kalena wada gaartey. Habeenka doontu gudeyso baxrida qaarba lix saacadood bay soo jeedaan, iyaga oo doonta ku wada majaraha naakhuuduhu tusay, si ay iskaga dhawraan hurdada waxay qaadaan heeso; welwel iyo cabsi laga qabo badda bay heesaha qaarkood ku saabsan yihii :

**Hees-hawleed**

1. eebbow shiraac jeexmiyo
   sharad (xarig) go'aya kaa magan ...

Haddii shiraacu jeexmo ama dakhalku jabo doontu halis bay gashaa: haddii sharadku (xarigga isu haya shiraaca iyo dakhalka) go'ana dakhalka iyo shiraaca baa kala tegaya, xooggii wadey doontana waa joogsanayaa. Khatar baa lagu sugan yahay haddii sidaasi dhacdo.

Waxa ay kale oo heesuhu ina tusayaan wadajirka iyo iskaashiga ka dhexeeya badmaaxeenka soomaaliyeed ee u bareeray halista badda iyo geesinnimada ay raggaasi ku food saareen halistaas :

2. baddu daw la maro ma leh
   duur lagu tilmaansado
   sida dalaqyadii Hawd
   ninka dooni mariyaa
   ma dadkuu wax dheer yahay ...

3. doonyaha dabayl baa waddiyo
daaradda Ilaahe
iyo xarigga deeban la yari
oo wax daadihiya ...

4. baddu baaxad weynaa
bir la duubay culusaa
ballanka eebbe adakaa ...

5. isma weyno walaal
isma weyno weligeen
ways weheshannaa ...

6. fuley waa qarqaray
fooraha sabaan (duufaan) ...

7. deebaani iyo yooshigaa
nadarku (araggu) saaraaye
nab waxay ka tiri khaanaddoo
nabar ka gaaraaye ...
(deebaani waa xargaha dambe ee shiraaca, yooshiguna waa kuwa hore).

8. musareerayey (wareerey)
muusareen qarxaday
mala dhoofayaa ...

9. tisciin Ximir muddadi soo baxay
oo mir iyo roob keenay
shiraaceeda muulka ah ninkii
maafirka (dhalada) u geeyey
inuu kaasi meel daran ku wado
banahe (ba'a e) yaw sheega ...

10. Musareen qarxaday
moosinkoo
mari awood waayey
magaaladu maslaxad fiicanaa
maal haddaad dhaqato ...



r) **Heesaha Ammaanta Doonta**

Kalgacalo weyn bay badmaaxeenku u qabaan doonta ay ku dul nool yihiin, siiba midda lagu yaqaan dheeraynta iyo mugweynida. Heeso ku saabsan kalgacaladaas qotada dheer ee lagu ammaanayo doonta, sidii qof nool, waxaa ka mid ah :

1. haddaad doonyaha sifartaan (tartan)
sifartaan oo Saaxil qabtaan
ka sinsimo (dus-dus) sidaadii ...

2. buudigayagoo Bumbey tegey
bad Karaaji soo marayoo
belen (bariid) sida ma aragteen ...

3. badda taajiyoo (jeex)
birriga u tallaw ...

4. saddex baa dallaalo (dhereg) leh :
naakhuude dooni leh
naag dooroo nin deysa (liita) leh
geelayagaa dallaala leh ...

5. qoolaabaney (shukaanta doonta)
qorigaa ma jabo ...

6. adna roor
anna aan ku raawisee ...

Nin Muuli ama saanac ah oo saluugsan mushqaayadii uu ka qaatay nin uu u dhisay doon baa tiriyey tixdan :

7. nin waliba abaalkuu dhigtaa
loo dhudhumiyaaye
siduu dhuunigii iigu galay
bedenkii maw dhuubtay ...

s) **Heesaha Maaweellada iyo Xusuusta**

Sidii aannu u niri kol hore doonyaha soomaaliyeed waxay u safri jireen dalal ay ka mid yihiin berri-carab, Sawaaxil, Indiya, kd. muddo dheer bayna ku maqnaan jireen socdaalkaas. Hilow iyo boholyow ay u qabaan dalkooda baa ku dhici jirey baxridda soom-

aaliyeed ee mudda dheer arag ooryihii iyo ehelkii ay jeclaayeen. Si ay isku maaweeliyaan, si boholyowgu uga yare debco, baxridu waxay aduudeen heeso yaab leh, sida :

1. Sawaaxil nin tegey
sahal ugama yimi
Hindiya nin tegey
hami waa qabaa
Cadan nin tegey
cayn noolba arag ...

2. illeyn baddu waa sariir
lagu sacab tuntaa ...

3. xalay waan hurdoo
waxaan ku hamiyaa
haasaawe dumar
hilin loo maraa ...

4. waxaan kuu qabiyo
waxaad ii qabtaa
isu qaybiyoo
kala qaayo weyn

5. hablihii Xudeyda
xogtooda la maqal
mohoroddu waw labo mar-karis
(dhaqaale ma leh habluhu)

6. doonnideer soo shax lihi
sow i sheegatee
oo ninka shukaanta u hayaa
shaadir igu rogee (i guursadee) ...

7. saddex xiiso weynaa :
xaryanta raaciddeedii
xamaro fuuliddeedii
barbar-seexadkii dumar ...

8. garoob geedo isku shubay
garabkayga uma quuri karo ...



9. xiddigta waaberi xilley
hee !
wiil gabar mar furay
hee !
ma u soo fig tiri ! ...

10. iyada: hadba waan kacaa
oo banka joogsadaa
shabshablow shamaalkii
maxaa la tagey ...

reer Suuri iyo
reer Saaxil yimid ee
doonyihii Bumbey
ma bir baa ku jaban ...

isaga : amba waa jeclaa
inaan soo dhaqsado
ee jiilaashigii (badxiran) baa
jidka igu xayirey ...

sh) **Suugaanta Kalluunka**

Suugaanta kalluunku way badan tahay, kuse dheeraan mayno. Gabar Faadumo Diiriye la oran jirey baa beri waxaa soo doonay labo nin, mid duula oo wax dhaca, iyo mid kalluumayste ah. Gabay bay ugu tartameen inantii, duulaagii baa yiri :

1. ina-Diiriyaay heensahaa
dibedda noo yaale
duul lagu anfacay bannunnahay
col iyo duullaane
iska soo dawaaf waxaan ku geyn
daas karuur badane ...

Kalluunsadehiina wuxuu yiri :

2. ina-Diiriyaay huurigaa
dibedda noo yaale
duul lagu anfacay baannu nahay
doorib iyo xuude
iska soo dawaaf waxaan ku geyn
daas kalluun badane ...

Ninkii kalluunsadaha ahaa bay Faadumo dooratay, baa la yiri, maxaa yeelay isagu waa muriqiisa-maale, ninka kalese booli buu ku noolyahay.

3. gaxash iyo gariir
goomahay (qararka) jiraan ...

4. Faarduhuba bad faaftay buu
faran-fardeeyaaye
haddii uusan nafta u feeyigeyn
feleg (geeri) ma dhaafeen ...

5. boowow
shiriid rimani
shabaggeenna diid ...

## QAYB TOBAN: ERAYBIXIN

Kol hore waxaannu niri in xijiga Soomaaliyeed loo iib geyn jirey dalal badan oo ka tirsanaa adduunkii qadiinka ahaa. Arrintaasi waxay keentay in erayo shisheeye oo tiro badani galaan hawlaha ku saabsan soo-saaridda iyo iibgeynta xijiga, taariikhda iyo afka Soomaaliyeed; ilaa haddana erayadaasi ku kaydsamaan af-guriga lagaga hadlo gobolka Bari ee Soomaaliya.

Erayadaasi waxay u badan yihii kuwa ka soo jeedey af-carbeedka, kaas oo si ballaaran u saameeyey dhaqanka Soomaaliyeed guud-ahaan.

Dhinaca kale, waxaad mooddaa in erayada shisheeye ee galay hawlaha xijiga, iyo dhaqanka Soomaaliyeedba, ay ugu fil weyn yihiin kuwa ka soo jeedey Masartii hore, Giriigga, Latiinka, carabiga iwm.

Erayada ka soo jeedey Masartii qadiinka ahayd ee galay waayaha reer Punt waxaa loo filayaa in ay ka mid yihii kuwa soo socda :

| 1) **erayada Masartii hore** | **macnaha Soomaaliga** |
|---|---|
| Punt | dalkii eebbe |
| rac | waaq, eebbe, qundhac, qorrax (eraygu wuxuu ka yimid afafka Cushitic, sida Oromo, Soomaali.) |



2) **Erayga Giriigga**

| | |
|---|---|
| Avalites | Awdal |
| serapion | Xamar |
| Nikon | Marka |
| Peripulus | warbixin sahan, socdaal sahan, socdaal |
| Berber | bulsho reer-miyi |

3) **erayada Latiinka**

| | |
|---|---|
| Sinus Aerithreus | badda guduudan (cas) |
| Olibanum | jagcar (yagcar), geedka xijigu ka baxo. |
| Frankinscene | maydi |

4) **erayada carbeed**

| | |
|---|---|
| Badwi | reer-miyi, nooc xabag ah |
| Bukhuur | qaac |
| jamaajiin | jajabka soo hara kolka la kala sooco faleenka |
| xamaali | qaadid |
| khariif | xagaa, badxiran |
| khaadumad | dhaaraanka shaqaalaha xijigu ku shaqeeyo |
| dubaalad | dunta liifadda faynuuska |
| rubi (qaad) | waax |
| sakham | dhaawac |
| sarac | beerid |
| sawaad | nooca ugu qiimo yar maydiga, caleemo |
| shootal | ubax, budo |
| faraasilo | tiro dhan |
| fas kabiir | nooc maydiga |
| fas siqiir | nooc maydiga |
| kafad | kolayo lagu guro faleenka |
| laban | luubaan, caano-geed |
| maxamalad | eeg Kafad |
| magraal | nooc maydiga |

| | |
|---|---|
| mushaad | nooc maydiga |
| nakhwe | miro, xabag |
| ardiyad | dhul, canshuurta faleenka laga qaado kolka la geeyo dalka carbeed |
| aqdun | golof, aan irmaanayn |

5) **erayada Hindiga**

| | |
|---|---|
| rodi | kimis, rooti |
| dobi | dharmayre, doobi |
| prasaheb | guddoomiye, haybadle, barasaab |
| sarkar | serkaal |

Afu wuxuu ka mid yahay raadraacyada lagu baaro taariikhda iyo ilbaxnimada dad kasta leeyihiin; sidaas awgeed, erayada kor lagu tusay iyo kuwa la mid ahi wax weyn bay ka sheegi karaan waayaha Soomaalidii hore.

Waxaa iyaguna jira erayo ka haray af-Soomaaligii qadiinka ahaa ee lagu dhaqmi jirey waayo hore. Erayadaas badidood waxay weli ku nool yihiin afguriga lagaga hadlo gobollada Bari ee Soomaaliya, siiba hawlaha ku saabsan tacabka faleenka. Way badan yihiin erayadaasi, waxaana ka mid ah kuwa hoos ku qoran :

| 6) **erayada ka haray Af-Soomaaligii hore** | **macnaha erayga** |
|---|---|
| beeyo | boohin |
| jadar | nooc xabagta |
| jafaan | dambiil |
| xanjo | xaji, adkee |
| xarre | cayayaan cuna dhuuxa geedka jagcarta |
| xiji | xig, maalid badan |
| doonni | doon, badeeco baa lagu doontaa doonta |
| raas | cunno, sahay, saad |
| serin (soorimo) | soohdin, seeraha u dhexeeya dhirta xijiga ee la kala leeyahay. |
| sed (sad) | kirada la siiyo ninka leh dhirta xijiga; dhirtaas cidina ma beerto ee abuurta bay iskaga baxdaa. Qofka ku tacbada baase loo aqoonsadaa in uu leeyahay, carruurtiisa baa ka dhaxli jirtey. Haatan iskaashato Kacaanku dhisay baa ka xoogsata xijiga, wixii ay tacbadaanna dawladda baa ka iibsata. |



| | |
|---|---|
| sifaal | xeero |
| dhadhaab | dhagax |
| gorse | gurid |
| gafar | soo-guuridda xijiga |
| galay | xiji buu galay, kiraystay |
| gaax | dhirta aan la daqrin, la sarin |
| cal | buur |
| cogor | cayillan, dihin |
| fadhi | gofka galay ama bixiya sedka (sad) xijiga buu ku "fadhiyaa, kireystey" |
| faleen | falid, abuurid, tacbid |
| fiirto | dhacaan cad, fiiri |
| koroor | taallo |
| mayidi | meyd, meydka baa lagu aglooli jirey maydiga waagii hore, si uusan u qurmin oo u waaro. Maydh (dhaq) in eraygu ka soo jeedeyna waa suuroobi kartaa. |
| malmal | maalid |
| migaaf | mindida gaf ku sii geedka, eray soo koobmay weeye. |
| miciyaan | badnaan |
| nagaf | daqar, bilow |
| habto | nooc xabag ah oo dhulka ku hibitiqda. |
| nooli | nolol, i noolee |
| afroor | joonyad |

# RAADRAAC QORAAL (BIBLIOGRAPHY)


1. Ancient Record of Egypt, vol. 2 By J.H. Breasted, Chicago, 1909
2. Historical perspective of Somalia By Mohamed Hassan Yusuf (memograph), Mogadishu, 1970.
3. Kalluunka, Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, Mog., 1975.
4. Lewis I.M. - The So-Called Galla Graves of Northern Somaliland, "Man" 1961, vol. LXI.
5. Larousse Encyclopadia of Animal Life, Ninth impression, 1974.
6. National Geographic Magazine, 1976.
7. Numismatic inscription By Mohamed Hassan Yusuf, Mog., 1970.
8. Periplus of The Eretrean Sea.(quoted in item 10)
9. Scientific Notes, Somali-Soviet Expedition, Moscow - 1974.
10. Soomaaliya, Cultural Department, Ministry of Education, Mog., 1976.
11. Tropical Fish By Dr. Herbert R. Axelrod, Fawcett Publications, New York, 1964.
12. The Dawn, Mog., 17 October, 1972.
13. Torgny Säve — Söderbergh — the Navy of the Eighteenth Egyptian Dynasty, Uppsala University Arsskrift, 1946:6